| 196. | L/x/le | Xabiibo Cali Xaaji                   |
| 197. | L/x/le | Sacdiyo Jiinow Axmed Afrax           |
| 198. | L/x/le | Cabdullahi Maxamed Xasasn Cariif     |
| 199. | L/x/le | Cabdulcasiis Axmed Oreey Barta       |
| 200. | L/x/le | Cabdi Xaseen Wardheere               |
| 201. | L/x/le | Cabdullahi Mukhtaar Axmed Cali       |
| 202. | L/x/le | Aweys Maxamed Abati Macow Orfeey     |
| 203. | L/x/le | Cabdullahi Xassan Cali Dhageey       |
| 204. | L/x/le | Cabdullahi Maxamed Colow Waasuge     |
| 205. | X/le   | Feysal Haruuse Daahir                |
| 206. | X/le   | Maxamed Boostee Maxmed               |
| 207. | X/le   | Cabdullahi Naxar Cabdulle            |
| 208. | X/le   | Farxiyo Maxamed Daahir               |
| 209. | X/le   | Cali Maxamed Hasan                   |
| 210. | X/le   | Cabdiladiif Cali Maxamuud Cali       |
| 211. | X/le   | Ibraahim Abukar Cabdi                |
| 212. | X/le   | Cali Axmed Cali Calasow              |
| 213. | X/le   | Libaan Cumar Bare Dirir              |
| 214. | X/le   | Xuseen Cabdicasiis Xuseen Gacaal     |
| 215. | X/le   | Cali Xasan Siyaad Cosoble (Tariin)   |
| 216. | X/le   | Liibaan Bare Ducaale Guuleyd         |
| 217. | X/le   | Maxamed Cabdiwali jaamac             |
| 218. | X/le   | Maxamuud Yasiin Maxamed Cumar        |
| 219. | X/le   | Cabdirshiid Cali Adan                |
| 220. | X/le   | Cabdulahi Xasan Dooyow               |
| 221. | X/le   | Cali Maxamed Daahir Cabduule         |

|      |      |                                   |
|------|------|-----------------------------------|
| 222. | X/le | Cali Axmed Maxamuud Sh.Cumar      |
| 223. | X/le | Salax Xasan Aadan                 |
| 224. | X/le | Cabdulahi Xasan Cusmaan           |
| 225. | X/le | Tahliil Xasan Xuseen Bare         |
| 226. | X/le | Cabdulahi Qeyr Cabdi Lugeey       |
| 227. | X/le | Joolaal Xuseen Xiireey            |
| 228. | X/le | Maxamed Cali Maxamud cadawe       |
| 229. | X/le | Axmed Maxamuud Cali Cabdi         |
| 230. | X/le | Maslax Cabdi Xasan                |
| 231. | X/le | Cumar Shiine Maxamed Axmed        |
| 232. | X/le | Cabdinuur Aadan Samow             |
| 233. | X/le | Maxamed Ceydaros Axmed Ceynab     |
| 234. | X/le | Axmed Cabdi Axmed Cabdule         |
| 235. | X/le | Maxamuud Cabdi Jaamac Cali        |
| 236. | X/le | Sharmarke Cali Aadan Maxamed      |
| 237. | X/le | Aadan Cabdi Maxamuud Aadan        |
| 238. | X/le | Maxamed Cabdi sh.muuse            |
| 239. | X/le | Cismaaciil Maxamed Mqtaar         |
| 240. | X/le | Aadan Xuseen Cabdullaahi          |
| 241. | X/le | Carab Bootaan Kulmiye Afrax       |
| 242. | X/le | Farxaan Axmed Xasan               |
| 243. | X/le | Xasan Cumar Xasan Cumar           |
| 244. | X/le | Cusmaan Cali Cumar (Jareer)       |
| 245. | X/le | Feynuus Cadow Abshir              |
| 246. | X/le | Idriis Maxamed Hiloowle Tifow     |
| 247. | X/le | Bashiir Maxamed Salaad            |
| 248. | X/le | Cabdixakin Maxamed Cali Madar     |
| 249. | X/le | Axmed Cabdullaahi Geedi Faarax 36 |
| 250. | X/le | Cali Cabdi Cawaale Cabdulle       |
| 251. | X/le | Yuusuf Cabduqadir Cabdi Maxamuud  |
| 252. | X/le | Daahir Axmed Guul Hiraab          |
| 253. | X/le | Cabdulahi Cali Maxmuud w.dhere    |
| 254. | X/le | Dalmar Maxamed Cabdi Bucur        |
| 255. | X/le | Muxidiin Abshir Cali Nuur         |
| 256. | X/le | Cabduqadir Maxamed Aadan          |
| 257. | X/le | Cadifitaax Maxamed Cali           |
| 258. | X/le | Cali Xasan Cali Maxamed           |

|      |      |                               |
|------|------|-------------------------------|
| 259. | X/le | Muumin Ciise Maxamuud         |
| 260. | X/le | Maxamed Cabdi Daahir Cabdulle |
| 261. | X/le | Maxamed Cadceed Cusmaan       |
| 262. | X/le | Daa.uud Dalmar Axmed          |
| 263. | X/le | Cabdiqani Cabdullahi Salaad   |
| 264. | X/le | Cabdifitaax Cabdi Maxamed     |
| 265. | X/le | Cabdullahi Yusuf Cabdiraxmaan |
| 266. | X/le | Yuusuf Caadiil Muumin         |
| 267. | X/le | Maxamed Cali Guure Siyaad     |
| 268. | X/le | Cadaan Cabdi Cariif           |
| 269. | X/le | Cali Cumar Tuuryare           |
| 270. | X/le | Maxamed Cumar Maxamuud        |
| 271. | X/le | Nuur Siid Cumar               |
| 272. | X/le | Aweeys Abuuwe Abiikar         |
| 273. | X/le | Xasan Muqtaar Sh.Maxamed      |
| 274. | X/le | Cabdiqani Cali Xasan          |
| 275. | X/le | Aadan Xasan Cabdi             |
| 276. | X/le | Maxamuud Cabdi Jimcaale       |
| 277. | X/le | Mahad Salaad Cismaan          |
| 278. | X/le | Caagane Kaafi Maxamed         |
| 279. | X/le | Cumar Xaashi Xuseen           |
| 280. | X/le | Cabdifitaax Cabdi Bashiir     |
| 281. | X/le | Daahir Cumar Cabdullahi       |
| 282. | X/le | Axmed Cali Daahir             |
| 283. | X/le | Cabdullahi Cali Axmed         |
| 284. | X/le | Cali Nuur Cali                |
| 285. | X/le | Maxamuud Maxamed Xuseen       |
| 286. | X/le | Muqtaar Sh.xuseen             |
| 287. | X/le | Maxamed Cali Maxamuud         |
| 288. | X/le | Yuusuf Cismaan Maxamed        |
| 289. | X/le | Siyaad Macalin Xasan          |
| 290. | X/le | Zakariye Cabdi Cali           |
| 291. | X/le | Maxamed Cabdi Maxamed         |
| 292. | X/le | Xaamud Maxamed Cismaan        |
| 293. | X/le | Cusmaan Maxamed Nuur Calasow  |
| 294. | X/le | C/wali C/qaadir Qalaf Jaamac  |
| 295. | X/le | Maxmed Xashi Canshuur         |

|      |      |                                   |
|------|------|-----------------------------------|
| 296. | X/le | Maxamed Xuseen Salaad (B.Dil)     |
| 297. | X/le | Xasan Nuur Sangaab                |
| 298. | X/le | Maxamed Mudeey Sicow              |
| 299. | X/le | Axmed Maxamuud Cali               |
| 300. | X/le | Cabdi Salaan Shaati Muuse         |
| 301. | X/le | Cali Nuur Cali Aadan              |
| 302. | X/le | Cusmaan Cabdi Maxamed Faarax      |
| 303. | X/le | Maxamed Suleybaan Aadan Yusuf     |
| 304. | X/le | Maxamed Bootan Xashi Cigalle      |
| 305. | X/le | Abshir Cali Cabdulqadir Yare      |
| 306. | X/le | Maxamed Cabdalla Xaaji Maxmed     |
| 307. | X/le | Maxamed Aadan Jibriil Deer        |
| 308. | X/le | Maxamed Cumar Sicow               |
| 309. | X/le | Xasan Cabdi Xuseen                |
| 310. | X/le | Faarax Maxamed Xassan Nuur        |
| 311. | X/le | Cusmaan Afrax Maxamuud Cosble     |
| 312. | X/le | Farxiyo Maxamed Daahir Wardheere  |
| 313. | X/le | Cabdisalaan Shaati Muuse Cali     |
| 314. | X/e  | Cali Maxamed Xasan Maxamed        |
| 315. | X/le | Cabdulqaadir Maxamed Xuseen Axmed |
| 316. | X/le | Aadan Cabdullahi Isaaq Cumar      |
| 317. | X/le | Xasan Cali Cusmaan Dhiblawe       |
| 318. | X/le | Khaliif Xassan Odawaa Fidow       |
| 319. | X/le | Ibrahim Maxmed Rooble Raage       |
| 320. | X/le | Maxamed Xuseen Sabriye            |
| 321. | X/le | Cabdifitaax Cabdi Baashe          |
| 322. | X/le | Nuur Maxamed Isaaq Cumar          |
| 323. | X/le | Cawil Cali Shire Xaaji Jaamac     |
| 324. | X/le | Nuurto Cumar Axmed Absuge         |
| 325. | X/le | Raxmo Ciise Cali Calasow          |
| 326. | X/le | Maxamed maxamuud Isaaq Ibarahim   |
| 327. | X/le | Cali Maxamed Cabdi Sabariye       |
| 328. | X/le | Aadan Maxamed Xuseen              |
| 329. | X/le | Axmed Maxamed Nuur Afdhuub        |
| 330. | X/le | Maxamuud Maxamed Xuseen Jimcaale  |
| 331. | X/le | Maxamed Abuukar Afrax Jinaqow     |
| 332. | X/le | Cabdullahi Cali Axmed Daauud      |

|      |      |                                           |
|------|------|-------------------------------------------|
| 333. | X/le | Sahro Cismaan Cali Gaabow                 |
| 334. | X/le | Deeqo Xuseen Cali Xalane                  |
| 335. | X/le | Cusmaan Maxamed Cawaale Weheliye          |
| 336. | X/le | Farxiyo Yuusuf Cumar Maxamed              |
| 337. | X/le | Fardowso Xassan Axmed Maxamuud            |
| 338. | X/le | Maxamed Cabdiraxmaan Aadan Nuur (Istiila) |
| 339. | X/le | Naciimo Faarax Guleed Maxmed              |
| 340. | X/le | Dahabo Shiikh Doon Faarax Xirsi           |
| 341. | X/le | Maxamuud Dhicisow Gaabow                  |
| 342. | X/le | Maxamed Cusmaan Caddow Gabow              |
| 343. | X/le | Maxamed Yusuf Jaamac (Hurre)              |
| 344. | X/le | Muxidiin Maxamed Shoole Culusow           |
| 345. | X/le | Siyaad Macalin Xasan Nuur                 |

**DALLACSIIN SARAAKIIL & L/SARAAKIIL**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo Jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. XTC/XDS/499/18 Taariikh 24/12/2018 kuna saabsan Soo Jeedin Dallacsiin Saraakiil & L/Saraakiil

**MARKA UU GARWAAQSADAY:** Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiyo Saraakiishan

***Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Saraakiisha Magacyadooda hoos ku qoran loo dallacsiyey darajada ku hor qoran midwaliba, kana tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

| <b>No</b> | <b>Darajada</b> | <b>Magaca</b>                        | <b>Loo Dallacsiyay</b> |
|-----------|-----------------|--------------------------------------|------------------------|
| 1.        | G/Sare          | Maxamuud Maxamed Cusmaan (Maalik)    | S/Guuto                |
| 2.        | G/Sare          | C/raxmaan Maxamed Cusmaan (Timocade) | S/Guuto                |
| 3.        | G/le            | Maxamed Aadan Yariis                 | G/Dhexe                |
| 4.        | G/le            | C/laahi Xuseen Dhuxulow              | G/Dhexe                |
| 5.        | G/le            | Nuur Maxamed Gaaboow                 | G/Dhexe                |
| 6.        | G/le            | Barre Maxamed Macoow                 | G/Dhexe                |
| 7.        | Dhamme          | Axmed Maslax Xuseen                  | G/le                   |
| 8.        | Dhamme          | Ismaaciil Cabdimaalik Maalin         | G/le                   |
| 9.        | Dhamme          | Cali Shariif Xaaji Maxamed           | G/le                   |
| 10.       | Jaamici         | Ibraahim Abuukar Maxamed             | G/le                   |

|     |               |                                      |        |
|-----|---------------|--------------------------------------|--------|
| 11. | Dr            | Cali Maxamed Cali Maxamuud           | G/le   |
| 12. | Ex. Darawiish | Xasan Aadan Maxamed (Xasan Ciraaqi)  | G/le   |
| 13. | L/x/le        | Muqtaar Maxamed Yare Cabdullaahi     | Dhamme |
| 14. | L/Sarkaal     | Ibraahim Maxamed Maxamuud            | Dhamme |
| 15. | L/Sarkaal     | Imran Axmed Warsame Isaaq            | Dhamme |
| 16. | L/Sarkaal     | Cabdullaahi Cusmaan Jimcaale         | Dhamme |
| 17. | L/Sarkaal     | Mubaarag Cali Jaamac                 | Dhamme |
| 18. | L/Sarkaal     | Cabdikariim Axmed Maxamed            | Dhamme |
| 19. | L/Sarkaal     | Cabdifitaax Cabdishakuur Ibraahim    | Dhamme |
| 20. | L/Sarkaal     | Cumar Cabdisataar Sheekh Cabdisalaan | Dhamme |
| 21. | Jaamici       | Cabdixakiin Mahad Nuur               | L/X/le |
| 22. | X/le          | Maxamuud Cabdi Mire                  | L/x/le |
| 23. | X/le          | Maxamed Saciid Salaad                | L/x/le |
| 24. | X/le          | Maslax Xaashi Dhoore                 | L/x/le |
| 25. | X/le          | Saacid Cabdi Xasan                   | L/x/le |
| 26. | X/le          | Khaalid Ibraahim Mire                | L/x/le |
| 27. | X/le          | Maxamed Cabdiraxmaan Warsame         | L/x/le |
| 28. | X/le          | Abshir Cusmaan Diini                 | L/x/le |
| 29. | X/le          | Jamaal Cabdinaasir Mahad             | L/x/le |
| 30. | X/le          | Maxamed Cusmaan Maxamed              | L/x/le |
| 31. | X/le          | Saalax Maxamed Axmed                 | L/x/le |
| 32. | X/le          | Maxamed Axmed Cumar                  | L/x/le |
| 33. | X/le          | Cabdifitaax Suleymaan Nuur           | L/x/le |
| 34. | X/le          | Cali Aweys Yuusuf                    | L/x/le |
| 35. | L/Sarkaal     | Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullaahi     | L/x/le |
| 36. | L/Sarkaal     | Cabdinaasir Axmed Ibraahim           | L/x/le |
| 37. | L/Sarkaal     | Axmed Iraad Maxamed                  | X/le   |
| 38. | L/Sarkaal     | Cabdiweli Saciid Fiidow              | X/le   |
| 39. | L/Sarkaal     | Shariif Cabdiraxmaan Jaamac          | X/le   |
| 40. | L/Sarkaal     | Cabdikariin Salaad Maxamed           | X/le   |
| 41. | L/Sarkaal     | Cabdiwaaxid Maxamed Nuur             | X/le   |
| 42. | L/Sarkaal     | Maxamed Yuusuf Axmed                 | X/le   |
| 43. | L/Sarkaal     | Cabdiraxmaan Maxamuud Yuusuf         | X/le   |
| 44. | L/Sarkaal     | Ibraahim Feysal Maxamed              | X/le   |
| 45. | L/Sarkaal     | Farxaan Maxamed Jimcaale             | X/le   |

### **Qodobka 2aad**


Saraakiishaan ku tilmaaman xeerkaan waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

### **Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 26/12/2018**

Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo



**XIL-KA QAADIS TALIYAHA CIIDANKA BADDA IYO  
MAGACAABID TALIYE KU MEEL GAAR AH (KMG) CIIDANKA BADDA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad, Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Sharci Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**MARKUU GARWAAQSADAY:** Inay muhiim tahay in la magacaabo Taliye Ku meel gaar ah inta laga magacaabay Taliye aan ku meel gaar aheyn oo uu yeesho Ciidanka Badda.

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan  
Qodobka 1aad**

1. Waxaa **S/Guuto Xasan Nuur Col-ujoog** laga qaaday xilkii **Taliyaha Ciidanka Badda**.
2. Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 30/12/2018 waxa uu Madaxweynaha si ku meel gaar ah (KMG) u magacaabay **S/Guuto Cabdi Warsame Cusmaan** in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Badda


**Qodobka 2aad**

Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka hor imaanaya.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 30/12/2018**



Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo

**OGGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA  
HAY'ADDA NAAFADA QARANKA****MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka  
Ref; 197/03/03/B-10/18 Taariikh: 27/12/2018  
kuna saabsan SHARCIGA DHISMAHA  
HAY'ADDA NAAFADA QARANKA ee ay  
ansixiyeen labada Aqal ee Baarlamaanka

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo dhismaha Hay'adda  
Naafada Qaranka.


**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan****Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa  
si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta labada Aqal Baarlamaanka ee  
Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS Saxiixo Sharcigaan, waxaa lagu soo daabaci  
doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 31/12/2018**



Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo



# Sharciga Aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada Ah

Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada Ah

## Gogoldhig

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, oo fulineysa tilmaanta Ra'iisul Wasaaraha, barnaamijka Xukuumadda iyo waajibaadkeeda shaqo ee la xiriira ilaalinta xuquuqda iyo badbaadinta shacabka, waxa ay soo diyaarisay Sharciga aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah. Sharcigani waxa uu awood siinayaa dadka Naafada ahi in ay helaan Hay'ad xuquuqdooda u doonta, isla markaana u abuurta fursado isugu jira dhinacyada dhaqaalaha, waxbarashada, shaqada, fududaynta dhinaca isu-socodka, helitaanka xogta iyo in dadkaasi ay helaan matalaad siyaasi ah intaba.

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanku, iyada oo:

- 1) Garwaaqsan tirada badan ee dadka la nool naafanimada heerarkeeda kala duwan iyo caqabadaha ku hareeraysan;
- 2) Tixgelinaysa Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo xuquuqda uu siinayo muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo qof kaska oo si sharci ah ugu nool Dalka Soomaaliya oo ay mudnaan gaar ah leeyihiin dadka naafada ah;
- 3) Tixgelinaysa Axdiga Qaramada Midoobay iyo dhammaan heshiisyada Caalamiga ah ee khuseeya Xuquuqda Aadanaha, gaar ahaan Xeerka Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, iyo heshiisyada caalamiga ah ee dhaqan galka ah ee laga gaaray in qof walba uu

leeyahay xuquuqda iyo xorriyadaha ku xusan heshiisyadaas, iyada oo aan la kala soocayn.

- 4) Aqoonsanaysa in dadka naafada ah ay u baahan yihiin in ay fursad u helaan isticmaalka adeegyada bulshada ee jira iyo baahida in loo abuuro fursado khaas ah si ay u helaan adeegyada bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, dhaqaalaha iwm;
- 5) in Loo dhiso Hay'ad u doodda xuquuqdooda, u raadisa fursado waxbarasho, shaqo iyo in tixgalin gaar ah ay u helaan qoondo fursad kasta ee bulshada inteeda kale u furan.
- 6) Tixgalinaysa in dadka Naafada ahi tan iyo xorriyaddii JFS aanay helin xuquuq gaar ahaaneed oo Dastuur ah, sidaas darteed dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ahi waxa uu siinayaa awood ay ku xaqiijiyaan xuquuqda ka maqan.
- 7) Garwaaqsan in ansixinta sharcigani uu si wax ku ool ah hoos ugu dhigi doono ama dabar jari doono caqabadaha dadka Naafada ah ee ka hor taagan in ay helaan fursado la mid ah dhigooda aan naafada ahayn.
- 8) Garwaaqsan in sharcigani uu ilaalinayo sharafta iyo karaamada dadka Naafada ah, uuna xoojinayo in ay noqdaan muwaadiniin leh xuquuq la siman inta kale, Hay'addu waxa ay u taagnaan doontaa doonista dhammaan xuquuqda dadka Naafada ah, iyada oo aan loo kala soocin lab iyo dheddig, rayid iyo ciidan.

Magaca Sharciga (Cinwaan gaaban), sharcigan waxaa loogu yeerayaa, ka dib marka la meelmariyo, Sharciga Aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah ee JFS (2018).

## Qodobka 1aad: Qeexid

Haddii aan sharciga gudihiisa si kale loogu micneyn ereyada soo socda waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

- 1) **Hay'ad Qaran:** waxaa loola jeedaa Hay'ad madax bannaan, oo heerka Dowladda Federaalka ah, waxayna qaabilsan tahay arrimaha dadka naafada ah ee lagu dhisay Qodobka 2aad ee sharcigan.
- 2) **Guddiga Sare ee Maamulka:** waxaa loola jeedaa guddiga ugu sareeya maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah ee lagu dhisay Qodobka 7aad ee sharcigan.
- 3) **Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah:** waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka, ahna Madaxa Hay'adda Dadka Naafada ah.
- 4) **Naaf:** iyada oo laga duulaayo ujeedada sharcigan, dadka naafada ah waxaa soo gelaya qof kasta oo la nool naafonimo jir ahaaneed, mid dareen ahaaneed, mid maskaxeed iyo mid dhinaca garashada ama garaadka la xiriirta, taas oo uu qabo/qabay muddo dheer, laguna daray saamaynta caqabadaha curyaaminaya ee kaga imaanaya bulshada ama deegaanka oo sababaya in qofku gaaro heer uu nolol maalmeedkiisa caadiga ah u maamuli karaynin ama u maarayn karaynin sida dadka kale.

## Qodobka 2aad: Dhismaha Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada Ah.

1. Waxaa la dhisay hay'ad heer Federaal ah oo u xil saaran arrimaha dadka naafada ah, oo lagu magacaabo "**Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah**", hadda ka dibna waxaa loogu yeerayaa '**Hay'adda**'.
2. Hay'addu waxay u madax bannaan tahay fulinta, dhammaan hawlaha la xiriira dadka naafada ah, si waafaqsan shuruucda Dalka, waxayna meel marinaysaa shaqooyinka iyo qorshayaasha la xiriira dadka

naafada ah, iyadoo aysan ka qaadayn ama aysan ka hor imaanaynin, hay'adaha kale ee qaranka gudashada waajibka ka saaran daryeelka iyo u adeegidda dadka naafada ah, si waafaqsan Dastuuka, shuruucda dalka iyo Xeerarka caalamiga ah.

3. Hay'addu waxay yeelanaysaa:

- a) Guddi fulin oo ka kooban Guddoomiye, Guddoomiye ku Xigeen, Xoghaye Guud iyo labo xubnood, (wadar ahaan shan xubnood), dhamaantood na waa in ay noqdaan dad naafo ah.
- b) Hoggaan dheelli tiran oo haddii uu midkood Guddoomiye noqdo (Lab ama Dheddig) Guddoomiye ku xigeenku waa in uu noqdaa jinsiga kale;
- c) Ka dib soo jeedinta Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka (WHHXI), waxa Hogaanka Hay'ada ansixinaaya Golaha Wasiirrada. Xil ka qaadistooda waxa loo raacayaa isla hanaankii loo maray ansixintooda.
- d) Muddada xil haynta hoggaanka Hay'addu waa afar (4) sano oo mar kaliya la cusboonaysiin karo, waxaana hadda ka dib loogu yeerayaa hoggaanka Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah oo ah sida ku cad farqadda 3aad xarafka (b).

4. Hay'addu waxa ay fulinaysaa qorshe siyaasadeedka xukuumadda Fedaraalka ah ee Soomaaliya, ee khuseeya arrimaha dadka naafada ah, waxayna kala shaqaynaysaa hay'adaha iyo wasaaradaha kala duwan ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed.

- a) Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ayaa leh hagidda siyaasadeed ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah;
- b) Hay'addu waxay u madax bannaan tahay howlaheeda shaqo;
- c) Guddoomiyaha Hay'addu waxa uu warbixinta Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah toos u siinayaa Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka.

## **Qodobka 3aad: Saldhigga Sharci ee Hay'adda.**

Hay'addu waxay u hoggaansamaysaa Sharciyada iyo Xeerarka soo socda:

1. Xuquuqda muwaadinka ee ku xusan Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Sharciyada Shaqada iyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;
3. Shuruudaha iyo Xeerarka habka Xisaabaadka & Hanti-dawrka Dawladda;
4. Shuruucda iyo Xeerarka la xiriira xuquuqda dadka naafada ah;
5. Dacwadaha khuseeya go'aannada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa loo marayaa hab qaanuuni ah ee sharciyadda Dalka waafaqsan;
6. Dadka Naafada ah ee shisheeyaha ah ee ku sugan Dalka gudihiisa, waxaa u xilsaaran ilaalinta xuquuqdooda iyo dabagalkoodaba Hay'addan, iyadoo lagu dhaqayo shuruucda Dalka u degsan ama loo dejin doono;

## **Qodobka 4aad: Maqaamka Hay'adda.**

1. Hay'addu waxay leedahay shaqsiyad sharciyeed, waa la dacweyn karaa, waxna wey dacwayn kartaa, ayadoo la raacayo qaabka ay Hay'adaha Dowladdu wax u dacweeyaan, waxayna u gudanaysaa adeegga ay bixinayso si sharcigu u ogol yahay ee lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkeeda.
2. Hay'addu waxay leedahay shaabad iyo calaamad u gaar ah.

## Qodobka 5aad: Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda.

1. Xilka iyo waajibaadka Hay'addu, waa in ay qaabayso, horumariso, isla markaana hirgeliso qorshaha Dawladda Soomaaliya ee ku saabsan dadka naafada ah, iyada oo la hubinayo xaqiijinta helista fursado dhinac walba ah oo ay helaan dadka naafada ah.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimaynin Hay'addu, waxay u fulinaysaa xilalka iyo waajibaad kale ee guud ama gaar ahaaneed ee uu sharciga ama xeer hoosaadku uu u xilsaaray sida soo socota:
  - a) Hay'addu waxa ay door hormuud ah ku leedahay hawlaha lagu curinaayo, lagu saxaayo, amaba lagu midaynaayo shuruucda dalka ee khuseeya dadka naafada ah.
  - b) Hay'adu waxa ay masuul ka tahay hubinta in xafiisyada dawladda iyo goobaha caamka ee dadweynaha ay yeeshaan marino ama qalab u sahli kara dadka naafada ahi in ay soo geli karaan.
  - c) In wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladdu, wixii shaqadooda ka khuseeya Dadka Naafada ah, ay Hay'adda kala tashadaan xiliga qorshaynta, marka ay fulinta timaaddo na, in Hay'addu ay door ku yeelato.
  - d) Asaasto xarumo gaar ah oo dadka naafada ah lagu tababaro;
  - e) Hubiso sidii dadka naafada ah ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed ay ku heli lahaayeen fursado buuxa oo ay bulshada kale kula wadaagaan adeegyada waxbarashada ee Dalka gudahiisa iyo kuwa dibadda loo aado, fursadaha shaqooyinka, adeegyada caafimaad, ka qayb qaadashada guud ee dhaqdhaqaaqyada bulsho sida ciyaaraha (sports), iyo ka qayb qaadashada dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee heer walba leh;
  - f) Hubiso gacan ku haynta xogta dadka naafada ah ee dalka oo dhan laga soo sooco tiro-koobyada guud ee dadwaynaha;

- g) Hubiso meel marinta siyaasadda Qaran ee ku saabsan fududaynta dhaqdhaqaaqa maalinlaha ah ee dadka naafada ah warbixin joogta ahna ka siiyaan WHHXI;
- h) Hubiso in qoraallada rasmiga ah ee dadka naafada ah ku socdaa ay ku soo baxaan hab ay akhrin karaan, sida Bareel, farta ishaarooyinka, iyo wixii la mid ah;
- i) Hubiso, isla markaana daba gasho, sidii Dawladda Soomaaliya ay si buuxda uga mid noqon lahayd heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee ku saabsan xuquuqda dadka naafada ah, si buuxdana u dhaqan geliso waajibaadka ka saaran meel marinta iyo wax ka beddelidda sharciyada dadka Naafada ah ee aan la socon karin heshiisyadaas;
- j) Qabanqaabinta iyo abaabulka shirarka ay ka qayb galaan hay'adaha dawladda iyo daneeyayaasha arrimaha dadka naafada ah, kuwaas oo lagu eegayo horumarinta siyaasadaha khuseeya dadka naafada ah, iyo falanqaynta habsami u socodka iyo hirgelinta qorshayaasha Qaran ee dadka naafada ah;
- k) Hubiso, isla markaana diiwaan geliso dadka naafada ah;
- l) Doonto, bixiso, ama fududayso helista qalabyada kala gaddisan ee caawiya qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah;
- m) Maamusho sanduuq gaar ah oo loo qoondeeyo horumarinta nolosha dadka naafada ah, warbixinna ka siiso WHHXI iyo Hantidhowrka Guud;
- n) Abuurto xiriir wada shaqayn, oo ay la yeelato hay'adaha dawliga ah iyo kuwa madaxa bannaan intaba iyada oo xiriiradaas uga faa'iidaynaysa danaha dadka naafada ah;
- o) Fududayso dhismaha Gole Naafo oo Madax bannaan, kaas oo ay ku kulansan yihiin qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah, oo ilaalin doona danaha dadka naafada ah.
- p) U abaabusho, una doonto dadka naafada ah ilo dhaqaale oo awood u siisa isku filnaan;
- q) Hay'addu waxa ay qaban kartaa wixii kale ee ay dani ugu jirto dadka naafada ah ee aanu xeerkani tilmaamin.

3. Hay'addu waxa ay leedahay awood ay ku oogto dacwad cid ama hay'ad kasta, ha ahaato mid dowladeed ama mid gaar ah, oo ku xad gudubta, ka hor timaadda, ama ka gaabisa hirgelinta sharciga xuquuqda dadka naafada ah iyo shuruucda kale ee la xiriirta, ayadoo u marayso qaabka loo dhaqaajiyo Dacwadaha Hay'adaha Dowladda ama gaarka ah.
4. Dhammaan hay'adaha dawladda ama kuwa gaarka ah, hay'adaha iyo shirkadaha shisheeyaha, kuwa gaarka ah, Xafiisyada Qaramada Midoobay waa in ay fursadaha shaqo ka siiyaan qoondo ay leeyihiin dadka naafada ah, laguna saleeyo u dheelli tirnaan jinsi, si waafaqsan sharcigan iyo qaanuunka iyo Heshiisyada Caalamiga ah.

## Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda

1. Hay'addu, si ay hawsheeda u fuliso, waxa ay yeelanaysaa:
  - a) Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah, waxa uu ka koobanyahay shan (5) xubnood, dhamaantood na waa in ay ka yimaadaan dadka naafada ah.
  - b) Agaasimeyaasha iyo hawlwadeennada kale ee loo baahdo, waa in ay ku jiraan qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah, kuwaas oo lab iyo dhadig ba leh.
2. Hay'addu waxay yeelan kartaa guddiyo qabta hawlo kala gaar ah. Guddiyadaas, shaqooyinkooda, iyo tirada shirarkoodu ku guntamaan, waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, iyadoo lagu salaynayo dheelitirnaan jinsi ah iyo shuruucda Dalka.
3. Waajibaadka Guddi-hoosaadyada, waxaa lagu qeexayaa xeer-hoosaad u gaar ah oo ay Guddiga Sare ku soo saarayaan kulammadooda ugu horreeya.
4. Waxaa kaloo Xeer hoosaadka lagu nidaaminayaa anshaxa iyo habraaca anshax marinta madaxda maamulka iyo shaqaalaha

Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, si waafaqsan shuruucda Dalka iyo shaqaalaha hay'adaha madaxa bannaan.

## **Qodobka 7aad:** **Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda.**

1. Guddiga Sare ee Hay'addu waxa uu ka kooban yahay:
  - a) Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
  - b) Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
  - c) Saddex xubnood oo leh aqoon iyo khibrad, oo mid ka mid ah uu yahay Xoghayaha laguna magacaabo sida ku xusan qodobka 2aad xarafkiisa J.
2. Xubnaha Guddiga Sare iyo saraakiisha sar sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, loo magacaabay waa in ay noqdaan kuwo lagu xulay aqoonta iyo waaya aragnimada ay u leeyihiin:
  - a) Ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah;
  - b) Xuquuqda aadanaha iyo shuruucda kale ee Caalamiga ah;
  - c) Wax u qabadka bulshada iyo ka shaqaynta horumarkooda.
  - d) Xubnaha guddiga iyo Saraakiisha Sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa inay leeyihiin aqoon heer Jaamacadeed ah ama aqoon u dhiganta iyo khibrad shaqo oo ugu yaraan shan sano ah.

## **Qodobka 8aad:** **Waajibaadka Xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka.**

1. Dejinta qorshaha siyaasadeed ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, kaas oo dadka naafada ah gaarsiinaya in ay helaan xuquuqda ay leeyihiin muwaadin ahaan, iyada oo la tixgelinayo baahiyahooda gaarka ah iyo awoodda dhaqaale ee Dalka.
2. Dabagalka iyo hubinta sidii loo meel mariyey siyaasadda iyo Qorsho hawleedka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah;

3. Ansixinta miisaaniyadda iyo xisaabxirka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee uu soo hordhigo Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ka dibna loo gudbiyo Wasaaradda.
4. Gacan-siinta guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, dhanka horumarinta istiraatiijiyadda iyo qorshaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, hawlaheeda lagu hagaajinayo;
5. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ama markuu maqan yahay waxaa matalaya Guddoomiye Ku Xigeenka, wuxuuna yeelanayaa ugu yaraan bishii hal fadhi oo caadi ah iyo markii kale ee loo baahdo;

## Qodobka 9aad:

### Xilka iyo Awoodda Guddoomiyaha Hay'adda.

Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa madaxa xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka iyo Hoggaanka maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, mas'uulna ka ah waajibaadka fulineed ee hawlaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, si waafaqsan sharcigan iyo xeer-hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, siyaasadda iyo shuruucda Dalka; wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:

1. Ilaalinta awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee sida ku cad qodobka 5-aad ee sharcigaan.
2. Maaraynta, isku-duwidda iyo kormeerka hawlaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah loo dhisay iyo hawladeennadeeda, si waafaqsan siyaasadda iyo sharciyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Xiriirinta hawlaha adeegga ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, kala dhexeeya hay'adaha qaranka, hay'adaha caalamka iyo samafallada, horumarinta iyo ciddii kale ee ay khasayso wax u qabashada dadka naafada ah;
4. Matalaadda arrimaha shaqo ee khuseeya dadka naafada ah iyo saxiixa heshiisyada ay hay'addu la galayso hay'adaha samafalka iyo kuwa caalamiga ah, iyadoo lala kaashanayo Garyaqaanka Guud ee Dowladda, si waafaqsan shuruucda Dalka iyo kuwa caalamkaba waxayna nuqul heshiisyadaas iyo warbixinba siinayaan WHHXI;

5. Diyaarinta iyo abaabulidda qorshayaal dhaxalgal ah ee waqtiyaysan oo lagu maamulayo, laguna fulinayo mashaariicda horumarineed oo loogu talo galay dadka naafada ah, iyo sidoo kale, diyaarinta iyo dhaqangelinta mashaariicda awood u siinaya, in dadka naafada ah noloshooda maareeyaan, gaaraanna isku filnaan, kana qayb-qaataan horumarka iyo dhismaha Dalka;
6. Ka shaqaynta hirgelinta qorshayaasha qaran ee ku aaddan dadka naafada ah, iyada oo lala tashanayo wasaaradaha xukuumadda ee ay kala khusayso iyo hay'adaha caalamiga ah ee arrimahaas ku shaqada leh.
7. Maamulidda xarumaha iyo wixii tashiilaad ah ee loogu adeegayo dadka naafada ah, iyadoo lala kaashanayo hay'adaha qaranka iyo kuwa dowliga ah ee ay khusayso.
8. Abuuridda waaxyo shaqo-fulineed iyo kuwo latalin oo ay ansixinayaan Guddiga Sare ee Maamulku sida ku cad xeer hoosaadka, isagoo ku kormeeraya habka shaqo fulinteeda oo u abaabulan xog aqooneed iyo qalab shaqo oo lagu fuliyo mashaariic wax gal ah oo waqtiyaysan;
9. Fulinta shaqooyinkii kale ee muhim u ah gaaridda ujeedada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah oo uu sharcigu u ogol yahay;
10. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada ee shanta xubnood ee Hogaanka Hay'adda, Guddoomiyaha waxa Xeer ku soo saraaya Madaxwaynaha JFS, waxaana lagu baahinayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.
11. Xil ka qaadista Guddoomiyaha waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.
12. Muddada xil haynta guddoomiyaha Hay'addu waa afar (4) sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.

## Qodobka 10aad:

### Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Hay'adda.

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa guddoomiye ku-xigeen.
2. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada ee shanta xubnood ee Hogaanka Hay'adda, Guddoomiye ku Xigeenka waxa Xeer ku soo saraaya

Madaxwaynaha JFS, waxaana lagu baahinayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

3. Xil ka qaadista Guddoomiye ku xigeen ka waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.
4. Muddada xil haynta Guddoomiye Ku-xigeenku waa afar (4) sano oo hal mar oo kali ah la cusboonaysiin karo.
5. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu xubin ka yahay Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
6. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu sii wadayaa hawlaha caadiga ah ee
7. Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, haddii ay timaaddo xaalado uusan hawshiisa sii wadi karin, sida bukaan, geeri, safar uu u baxo, amaba xilkoo laga joojiyo ama si sharci ah looga qaado.
8. Waxa uu Guddoomiye ku-xigeenku fuliyaa wixii hawl kale ah ee Guddoomiyaha Hay'addu u xil saaro.

## Qodobka 11aad:

### Shaqaalaha.

1. Xuquuqda iyo waajibaadka sharciga ah iyo xuquuqda dhaqaale ee shaqaalaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa lagu dhaqayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;
2. U tartamidda shaqaalaha Hay'adda Qarranka ee Dadka Naafada ah, waxaa uu noqonayaa tartan furan, iyada oo la raacaayo shuruudka dalka ee shaqaalaynta, mudnaan gaar ah na la siinayo dadka naafada ah.
3. Waalidka caruur naafo ah, ama caruurta waalid naafo ah, Haddii ay buuxiyaan shuruudaha shaqooyinka ka banaanaada Hay'adda, waxa la siinayaa mudnaan gaar ah.
4. Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, iyo mashruucyadeedu waxay awood u leeyihiin in ay qortaan shaqaale farsamo yaqaan ah ama xirfad gaar ahaaneed leh, haddii laga waayo cid buuxisa shuruudahaas dadka naafada ah, iyadoo la raacayo shuruudaha shaqo qorista ee xeerka shaqaalaha ee Dalka.

5. Hay'addu waxay Dalka dibaddiisa ka keensan kartaa khubaro markii loo baahdo, haddii laga waayo Dalka gudihiisa cid leh aqoonta loo baahan yahay waxaana la raacayaa sharciga shaqaalaha shisheeye ee Dalka.

## Qodobka 12aad: Dhowrista Xogta Dadka Naafada ah.

1. Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliso dhammaan xogta dadka naafada ah ee ay u adeegayso.
2. Shaqaale, wakiil iyo cid kale midkoodna ma gudbin karo xog qarsoodi ah sida uu qabo sharcigani, marka laga reebo:
  - a) Ogolaansho sababaysan waafaqsanna sharciga oo ay wadar ahaan u gaaraan Guddiga Sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ama;
  - b) Fulin hawleed sharcigani u ogolaanayo;
- c) Amar maxkamadeed oo sharciga waafaqsan;
3. Ciddii ku xadgudubta sharcigan waxay galaysaa fal dambiyadeed faafin xog dhawrsan waxaana laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga Ciqaabta Dalka.

## Qodobka 13aad: Miisaaniyadda iyo Hantida Hay'adda.

1. Hantida Hay'addu waxay ka kooban tahay:
  - a) Miisaaniyadda sannadlaha ah ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee ay qorshayso xukuumaddu.
  - b) Wixii hibo ama kab dhaqaale ee uga yimaada hay'adaha caalamiga, shaqsiyaad, ururro gudaha ama dibadda ah.
  - c) Dakhliga ka soo xarooda mashaariicda Hay'addu ay maamusho.
  - d) Hanti kasta oo dawladeed, guurto ama ma guurto, ee loogu adeegi jiray dadka naafada ah, waxa yeelanaaya maamulkeeda Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah marka uu sharcigani dhaqan galo. Hantida ay Hay'addu yeelan doonto, ma ku jirto wixii hanti ah ee ay gaar u lahaan jireen, amaba hadda ay leeyihiin dad naafo ah, iskaashatooyin naafo ama ururo dad naafo ah.
2. Guddoomiyaha Hay'addu, ka dib marka uu ka doodo, oggolaadana Guddiga Sare ee Maamulka, waxa uu Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul

Insaanka u gudbinayaa miisaaniyad-sannadeedka si looga ansixiyo Golaha Wasiirrada;

3. Kharashka iyo isticmaalka dhaqaalaha iyo hantida soo gasha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, lagu dhaqayaa Sharciga xisaabaadka iyo baarista ee hantida dowladda.

## **Qodobka 14aad: Warbixin Sanadeedka Hay'adda.**

Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa laga doonayaa in uu diyaariyo warbixin sannadeedka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, oo dhammaystiran isaga oo u gudbinaya Wasiirka HHXI si loo hor dhigo Golaha Wasiirrada taas oo ay ku jiraan hawlaha shaqo iyo waxqabad ee Hay'adda Dadka Naafada ah, iyo sidoo kale xaaladaha culays ee la soo gudboonaada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.

## **Qodobka 15aad: Canshuur dhaaf.**

1. Hay'addu waxay leedahay cashuur dhaaf buuxa heer federaal iyo heer dawlad goboleedba, kaas oo la xariira kaalmooyinka, deeqaha ay ka hesho gudaha iyo dibadda, iyo dakhliga uga soo baxa ilaha dhaqaalaha ee ay Hay'addu leedahay, iyo guud ahaan wixii ay Hay'addu dhoofiso ama la soo dagayso.
2. Waxaa ka reebban haddii ay Hay'addu yeelato howlo ganacsi oo ujeeddadeedu tahay faa'iida-doon, waxaa lagu dhaqi doonaa sharciga Hay'adaha Dalka.

## **Qodobka 16aad: Ammaah.**

Hay'addu waxay awood u leedahay inay ammaah qaadata, bixisana, ha noqoto dalka gudahiisa ama dibeddiisaba, ka dib oggolaashaha Wasiirka

Wasaaradda u xilsaaran arrimaha dadka Naafada ah, iyada oo la raacayo Xeerarka iyo sharciyada Dalka.

## **Qodobka 17aad: Hanti-dhawrka Hay'adda**

Xisaabaadka hay'adda Dadka Naafada ah, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka maamulka xisaabaadka hay'adaha madaxa bannaan ee qaranka.

## **Qodobka 18aad: Qaybaha Hay'adda.**

Hay'addu waxa ay yeelan kartaa mashruucyo kala duwan oo mid walba, uu yeelan karo maareeyn iyo maamul u gaar ah, isla markaasna si toos ah u hoos yimaada Guddiga Sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah. Faah faahinta qodobkaan waxaa lagu qeexi doonaa xeer hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.

## **Qodobka 19 aad: Xarun iyo Laamo**

1. Xarunta Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa caasimadda Dalka ee Muqdisho, waxayna laamo ku yeelan kartaa Dawlad-goboleedyada iyo gobollada Dalka hadba sidii loogu baahdo.
2. Laamaha Dawlad-goboleedyadu waxay toos ula shaqaynayaan Hay'adda Dadka Naafada ah, iyo hadba mas'uuliyiinta Dawlad-goboleedyada ee u xilsaaran u adeegidda dadka naafada ah.

## **Qodobka 20aad: Baabi'in Xeer**

Sharci iyo Xeer kasta oo aan la socon karin ama ka soo hor jeeda xeerkan waa la baabi'iyay, waxayna Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ahi, marka uu xeerkani dhaqan galo yeelaneyso masuuliyadda u adeegista dadka Naafada ah ee J.F.S.

## Qodobka 21 aad:

### **Dhaqan-gal.**

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka ay ansixiyaan Golayaasha Baarlamaanka, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

### **Dhammaad**

## ANSIXINTA MEEL MARINTA QOONDAHA MIISAANIYAD SANADEEDKA DOWLADDA 2019

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad, Xarafka “F” ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 200/03/03//B-10/18, taariikh: 30/12/2018 kuna saabsan Ansixinta Meelmarinta Qoondaha Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda ee 2019 uuna u soo Gudbiyay Madaxweynaha JFS si uu ugu rogo Sharci.

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in la meelmariyo Qoondaha Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda 2019

***Wuxuu soo saaray Xeerkaan:*****Qodobka 1aad**


Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo sharcigan, waxaa la ansixiyey Qoondaha Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda 2019 ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Sharcigaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2018**

Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



# Qoondaha Miisaaniyadda 2019

| Madaxa | HAY'ADAHA                                   | Adeegga Shaqaalaha | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | Mashaaric  | Deeqaha Dowladda Dhexe | Hawlgabka | Keydka Kabiidda | Wadarta Guud ee Kharashka |
|--------|---------------------------------------------|--------------------|--------------------------------|------------|------------------------|-----------|-----------------|---------------------------|
| A      | Wadarta Guud ee Kharashka                   | 155,793,863        | 119,441,724                    | 27,605,709 | 35,974,501             | 352,680   | 5,024,208       | 344,192,684               |
| 100    | HAY'ADAHA ADEEGGA MAAMULKA                  | 55,451,812         | 36,012,220                     | 1,662,448  | 35,783,500             | -         | 5,024,208       | 133,934,188               |
|        | Xafiiska Madaxtooyada                       | 2,395,174          | 3,443,413                      | -          | -                      | -         | -               | 5,838,587                 |
|        | Xafiiska Madaxtooyada                       | 2,395,174          | 3,443,413                      | -          | -                      | -         | -               | 5,838,587                 |
| 102    | Baarlamaanka                                | 19,778,062         | 3,700,761                      | 470,000    | 112,500                | -         | -               | 24,061,313                |
|        | Xafiiska Golaha Shacabka                    | 2,933,232          | 1,592,749                      | 470,000    | 112,500                | -         | -               | 5,508,481                 |
|        | Xubnaha Golaha Shacabka                     | 13,642,800         | 806,512                        | -          | -                      | -         | -               | 14,449,312                |
|        | Xafiiska Agalka Sare                        | 3,202,020          | 901,500                        | -          | -                      | -         | -               | 4,103,520                 |
| 105    | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha                 | 2,354,980          | 3,422,650                      | -          | -                      | -         | -               | 5,777,630                 |
|        | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha                 | 2,354,980          | 3,422,650                      | -          | -                      | -         | -               | 5,777,630                 |
| 104    | Arrimaha Dibedda                            | 5,218,195          | 2,960,183                      | -          | -                      | -         | -               | 8,178,378                 |
|        | Wasaaradda Arrimaha Dibedda                 | 1,613,280          | 1,285,583                      | -          | -                      | -         | -               | 2,898,863                 |
|        | Safaradaha                                  | 3,604,915          | 1,674,600                      | -          | -                      | -         | -               | 5,279,515                 |
| 105    | Maaliyadda                                  | 7,993,923          | 8,342,041                      | 1,192,448  | 28,111,000             | -         | 5,024,208       | 60,663,620                |
|        | Wasaaradda Maaliyadda                       | 6,377,626          | 2,084,511                      | 192,448    | -                      | -         | -               | 8,654,585                 |
|        | Xisbiyaha Guud                              | 1,179,845          | 414,500                        | -          | -                      | -         | -               | 1,594,345                 |
|        | Adeegga Guud ee Dowladda                    | -                  | 5,619,482                      | 1,000,000  | 28,111,000             | -         | 5,024,208       | 98,754,690                |
|        | Agasirka Xarunta Warbixnada Maaliyadda      | 436,452            | 223,548                        | -          | -                      | -         | -               | 660,000                   |
| 106    | Qorsheynta iyo Isk. Caalamiga               | 1,431,791          | 1,242,000                      | -          | -                      | -         | -               | 2,673,791                 |
|        | Wasaaradda Qorsheynta iyo Isk. Caalamiga    | 1,431,791          | 1,242,000                      | -          | -                      | -         | -               | 2,673,791                 |
|        | Hay'adda Tirabkoolka Qaranka                | -                  | -                              | -          | -                      | -         | -               | -                         |
| 107    | Arrimaha Gudaha iyo Faderaalka              | 2,012,652          | 2,933,428                      | -          | 7,560,000              | -         | -               | 12,506,080                |
|        | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Faderaalka   | 1,517,688          | 2,862,428                      | -          | 7,560,000              | -         | -               | 11,940,116                |
|        | Guddiga Caawidiga Qaranka iyo Barakaciyasha | 494,964            | 71,000                         | -          | -                      | -         | -               | 565,964                   |
| 108    | Arrimaha Diinta iyo Awaqafka                | 910,600            | 118,000                        | -          | -                      | -         | -               | 1,028,600                 |
|        | Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awaqafka     | 910,500            | 118,000                        | -          | -                      | -         | -               | 1,028,500                 |
| 109    | Cadaaladda                                  | 4,033,768          | 3,421,524                      | -          | -                      | -         | -               | 7,455,312                 |
|        | Wasaaradda Cadaaladda                       | 528,588            | 189,500                        | -          | -                      | -         | -               | 718,088                   |
|        | Clidanka Asluubta                           | 3,505,200          | 3,232,024                      | -          | -                      | -         | -               | 6,737,224                 |
| 110    | Adadeegga Garsoor                           | 2,100,252          | 811,000                        | -          | -                      | -         | -               | 2,911,252                 |
|        | Maxkamadda Sare                             | 522,744            | 430,000                        | -          | -                      | -         | -               | 952,744                   |
|        | Maxkamadda Gobolka Baraadir                 | 1,296,432          | 203,000                        | -          | -                      | -         | -               | 1,499,432                 |
|        | Maxkamadda Raiaanka                         | 181,284            | 89,000                         | -          | -                      | -         | -               | 270,284                   |
|        | Guddiga Adeegga Garsoorka                   | 99,792             | 89,000                         | -          | -                      | -         | -               | 188,792                   |
| 111    | Xeer-ilaaliyaha Guud                        | 769,488            | 312,000                        | -          | -                      | -         | -               | 1,081,488                 |
|        | Xeer-ilaaliyaha Guud                        | 769,488            | 312,000                        | -          | -                      | -         | -               | 1,081,488                 |
| 112    | Garyaqanka Guud                             | 320,844            | 204,000                        | -          | -                      | -         | -               | 524,844                   |
|        | Garyaqanka Guud                             | 320,844            | 204,000                        | -          | -                      | -         | -               | 524,844                   |
| 113    | Hanti-dhowrka Guud                          | 798,804            | 987,300                        | -          | -                      | -         | -               | 1,786,104                 |
|        | Hanti-dhowrka Guud                          | 798,804            | 987,300                        | -          | -                      | -         | -               | 1,786,104                 |



|     |                                                       |            |   |            |   |           |   |            |
|-----|-------------------------------------------------------|------------|---|------------|---|-----------|---|------------|
|     | Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dii-u-dhiska              | 1,032,072  | - | 124,000    | - | -         | - | 1,156,072  |
| 309 | Gaadiidka & Duulista Hawadda                          | 1,763,016  | - | 1,355,000  | - | -         | - | 3,118,016  |
|     | Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawadda               | 1,763,016  | - | 758,500    | - | -         | - | 1,907,440  |
|     | Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Hawadda               | 614,076    | - | 594,500    | - | -         | - | 1,208,576  |
| 310 | Dekadaha & Gaadiidka Badida                           | 1,965,408  | - | 288,500    | - | -         | - | 2,253,908  |
|     | Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badida                | 1,048,608  | - | 184,000    | - | -         | - | 1,232,608  |
|     | Dekadaha Xamar                                        | 916,800    | - | 104,500    | - | -         | - | 1,021,300  |
20. OECD/DAC Waxay ku qeexday qiimeynta sidan “U-kuur-gal nidaam iyo ujeeddo leh oo lagu sameeyo mashruuuc, barnaamij ama siyaasad socota ama dhamaystimay, nashqadooda, dhaqan gelintooda iyo natiijooyinkooda. Ujeeddada waa si loo ogaado ahmiyadda iyo buuxinta himillooyinka, waxtarka horumarkooda, wax-ku-oolnimada, saameynta iyo waaritaanka Qiimeyntu waa inay noqotaa mid laga helo macluumaad la isku hallayn karo oo faa’iido leh, taasoo awood inoo siineysa in casharadii aan baranay kudabbaqi karno geedisocodka go’aan qaadashada ee qaatayaasha iyo deeq-bixiyayaasha (OECD,2000)<sup>3</sup>

---

<sup>3</sup> OECD (2002). Glossary of Key Terms in Evaluation and Results Based Management. OECD. Paris

### **Dib-u-eegid:**

21. waa u-kuur-galka waxqabadka ama hor-u-kaca siyaasad, qeyb, hay'ad barnaamij ama mashruuc, kaasoo waqti-watiq ah ama aan toos ahayn. Waxay qiimeynta ku kala duwanyihiin, qiimeyntu waxay u kuurgashaa natiijooyinka iyo saameynta howlaha horumarineed, halka Didb-u-eegiddu ay culayska saarto dhinacyada howl-galka/shaqada , sidaa daraadeed waxay si dhaw isugu xidhanyihiin hawsha kormeerka. Dib-u-eegidda waxaa loo qaabayn karaa si dhacdooyin gooraale ah oo ay daneeyayaasha muhiimka ahi uga doodaan waxqabadka arrimaha marka laga hadlayo, sida dib-u-eegidda qiimeynta wadajirka ah ee lagu sameeyo sanadkii sida caafimaadka waxbarashada, iyo biyaha, iwm.

### **Indho-indhayn:**

22. waxaa xaqiijin lagu sameeyaa alaabooyinka iyo adeegya ay bixiso Dawladu iyadoo la fiirinaayo inay waafaqsanyihiin heerarka, xeerarka iyo awaamiirta waxaan fuliya dad dibada ahi waxaa raadisaa inay ogaato meelaha nugulka ah iyo ciladaha iyo inay soo jeedisoo tallaabo sixitaan.

### **4.0 Mabaadi'da**

23. Habraaca K&Q ee QHQ wuxuu ku dhisan yahay mabaadi'da hagayaasha ee hoos ku xusan:

1) **Maareynta Natiijooyinka:** Natiijooyinku waxay u taaganyihiin Horumarinta nolosha ama badqabka dadka, taasoo ah natijada laga filayo QHQ. Kormeerka iyo Qiimeyntu waa inay xoogga saartaa cabiridda natiijooyinka QHQ, iyo barnaamijyada iyo mashaariicda la xidhiidha isla markaana dhalisaa casharro lagu horumarinayo waxqabadka mustaqbalka.

2) **Qiimaha Lacagta:** Habraaca K&Q ee QHQ waa in uu raadiyaa sidii loo ogaan lahaa in natiijooyinku (soo-saarka iyo natiijooyinku) ay u qalmaan maalgashiga iyo in kale iyadoo laga eegaayo dhanka

maaliyadda , hantida iyo cududda shaqaale iyadoo lagu saleynayo qiimaha suuqa ee maal-gashigan;

- 3) **Isla-xisaabtan:** Hay'adaha waxa lagula xisaabtami doonaa soo-saarka(outputs) lagu heshiiyay iyo wax yaabaha laga filayo, waxaana lagu qiimeyn doonaa nidamyo kormeer iyo qiimeyn ah:
- 4) **Lahaansho:** K&Q waa in ay hogaamisaa mudnaashaha qaranka. Howlaha K&Q waa in si habbon loo qorsheeyaa, la isugu duwaa, loona maamulaa midaamyada qaranka dhexdiisa .
- 5) **Dan-wadaag:** Dib-u-eegista iyo qiimeynta badan ee daneeyayasha ayaa la dhiirrigelin doonaa si mudnaan loo siiyo daah-furnaanta, lahaanshaha iyo hirgalinta talooyinka qimaynta, iyadoon wax loo dhimeynin kalsoonida/sharafta qiimeynta. Qiimeynta wadajirka ah ee dawladdu iyo deeq-bixiyayaasha waxay sidoo kale gacan ka geysaneysaa yareynta soo noq noqoshada/soo cel-celinta waxayna fududeesaa dhaqaalaha miisaan iyo isu-dheelitirnanta:
- 6) **Barasho:** K&Q waa in ay hagtaa baaahida macluumaad ee isticmaalayaasha oo ay ku jiraan siyaasad dejiyaasha, fuliyaasha iyo dadweynaha. Macluumaadka laga helo midhaha/natijooyinka K&Q waa in ay noqdaan mid waqti ku saleysan la heli karo oo la adeegsan karo si ay u hagaan siyaasadda iyo go'aammadda barnaamijka. Natijooyinka laga helo dadaallada K&Q waa in lagu falanqeeyaa Cawaaqibkooda suurta galka ah ee go'aannada maareynta iyo in lagu daro geedi-Socodyada go'aan qaadasho;
- 7) **Anshaxa iyo Sharafta:** su loo hubiyo kalsoonida iyo faa'iidada K&Q, dhexdhexaadnimda waafaqsanaanta heerarka caalamigaa ah ee uruurinta xogta, falanqaynta iyo warbixinta iyo madaxbannaanida qiimeeyayaasha waa in la ixtiraamo. Hab-dhaqanka /dabeecadaha qiimeeyayaashu waa in ay waaafaqsan yihiin heerarka ugu hooseeya ee loo baahanyahy marka la samenayo qiimeyn leh kormeer habboon.

## 5.0 Shuruudaha Siyaasadda:

### Guud-mar

**24.** Kormeerka, Qiimeynta iyo maareynta istatistikida rasmiga ah wxaa loo tixgalin karaa in ay yihiin kuwo kala duwan oo xayndaabyo kala duwan leh kuwaas oo ay qeyb ka yihiin ama ku lug leeyihiin bulshooyin kala duwan. Laakiin waxaa jira meelo mudan oo ay iskaga dhafan yihiin ama iska soo galaan kuwaas oo si dhaw isugu xidha xeyndaabyada. Waxaa jira faa'iidooyin aad u muhiim ah oo laga helayo wanaajinta xiriirka iyo iskaashiga udhaxeeya xayndaabyadan kala duwan. Dhammaantood waxey wadaagaan qalabka ay adeegsanayaan iyo danaha bixinta iyo falanqaynta xogta oo isku mid ah, laakiin haddane way kala duwanyihiin waana howlo aan shaqo isku laheen. Haddabo barnaamijka kormeerka, qiimeynta istaatistikada waxa uu ka koobanyahay seddex howlood ee kala duwan laakiinse leh isku-xidhka

### Howlaha kormeerka:

**25.** kormeerku waxuu utaaganyahay ama la micno yahy lasocoshada joogtada ah ee gashiga howlaha midhaha natiijooyinka iyo saameynta howlaha horumarinta heerka barnaamij qeyb iyo qaran. Tan waxaa kamid ah kormeerka hor-u-socodka wadanka ee dhanka cabirka qaran ee guusha horumarka sida yoolalka horumarinta qarniga (MDG's)<sup>4</sup> ama yoolyada horumarinta waarta (SDG's)<sup>5</sup>.

**26.** Qaabdhismeedka DF, dhammaan wasaaradaha Bah-wadaagta ah Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka (DFS). Dawladdaha hoose. Wakaaladaha Dawladda iyo Dhaqan-geliyayaasha kale ee miisaaniyadaha/lacagta dadweynaha waa in ay aasaasaan isla markaana socodsiiyaan qeyb kormeer toos oo isku-duwi doonta howlaha kormeerka si warbixinta kor loogu gudbiyo wasaaradda Qorsheynta MOPIED.

---

<sup>4</sup> Millenium Development Goals.

<sup>5</sup> Officials Statistics and Monitoring and Evaluation Systems in Developing Countries: Friends or Foes? Roger Edmuns and Tim Marchant. October 2008

**27.** Si si buuxda loola socda waxqabadka iyo kaqeyb-qaadasha himmillooyinka QHQ. Dhammaan Howlwadeenada / matalayaasha Dawladda waxaa looga baahan doonaa asaasida iyo dhaqan-gelinta arrimaha soo socda:

- 1)** Qorsheyaal iyo miisaaniyado leh habraac natiijo cad, geshi qiimo leh, midho iyo natiijooyin lafilaayo iyo sidookale. Tilmaamayaash (indicators) waxqabad kuwaa oo ah khaaas. Lacabirikaro, lahanankaro, muhiim ah isla markaana leh wakhti-cayiman (SMART).
- 2)** Qiimeyn hordhac ah loo lagu sameyo suurta galnimada mashaariicda, oo ay kamid tahay, haddii ay suurtagal tahay falanqeynta kharashka iyo faa'iidada (cost-benefits analysis):
- 3)** Dib-u-eegid joogta ah oo lagu sameeyo qorshayaasha iyo miisaaniyadda si loo xaqiijiyo in ay yihiin kuwu hadda ah ama waqtiga lasoca
- 4)** Kormeerka waxqabadku wuxu ka koobnaan doonaa waxyaabaha soo socda:
  - a) Istaraatiijiyad kormeer oo ku saleesan shaxda tilmaamayaasha waxqabadka, oo muujinaaya isha, waqtiga, goobta iyo hanaanka xog uruurinta midkaste.
  - b) Nidaamka maareynta macluumaadka (MIS)si loo fududeeyo qabashada, geedi socodka, falanqeenta iyo isticmaalka xogta kormeerka ee tiirkaste (each pillar) ee ay kujiraan wasaaradaha muhiimka u ah:
  - c) Shaqaaleyn kormeer oo u dhigma baaxada/ xajmiga howlaha ay qabanayaan
  - d) Miisaaniyad ku filan oo ay ku kormeeraan barnaamijta iyo Mashaaariicdooda
- 5)** Wasaaradda maaliyaddu waa ina ay xaqiijisaa uqabashada miisaaniyad kufilan hay'ad kasta oo ay dawladdu fangareeso si loogu qabto kormeerka iyo qiimeynta taas oo waafaqsan shuruuda lagu qeexay siyaasaddan.

- 6) Qorsheynta kormeerku waa in uu si cad qeyb uga ahaado qorshaynta iyo miisaaniyada heer mashruuc iyo guud ahaanba hay'adaha. Qiyaasta kharashka iyo miisaaniyadda hawlaha qiinaynta waa in lagu xaliyaaa sida ugu macquulsan marka la qorshaynaayo miisaaniyadahu mashruuca. Miisaaniyadda qiimayntu waa in ay ahaato mid kufilan in ay daboosho baahiyada kheyraadka qiimeynta, taas oo buuxisa shuruudaha qiimeynta ee lagu soo bandhigay siyaasadda

#### **Tayada shuruudaha kormeerka:**

28. kormeerka wax ku oolka ah in la xaqiijiyo mashaariicda si macquulka ah oo kalsooni leh loo qiimeeyo tilmaamayaashu waa in la qaabeeyo ayadoo la isticmaalayo shuruudo Khaas ah, la cabiri kara, lagaadhi karo, muhiim ah isla markaana leh wakhti cayiman.
- 1) Khaas: Tilmaamuhu waa inuu yahay mid u cad sida shayga la cabbiraayo isla markaana uu khaas yahay si loo cabiro hor-u-socodka qaabilsan/ku-wajahan natiijada.
  - 2) La cabbiri karo: Tilmaamuhu waa cabir la isku haleen karo waana mid leh himmillo la xaqiinjin karo. Cabbirida/quyaasaha tayo waa in si haboon loogu turjumo/baddalo qaab tiro ah.
  - 3) La gaadhi karo: Tilmaamuhu waa mid xaqiiqdii lagaadhi karo
  - 4) Muhiim: Tilmaamuhu Wuxuu qabtaa waxa la cabirayo (wuxuu muhiim u yahay hawlaha/natiijooyinka).
  - 5) Waqti-cayiman: Tilmaamaha waxaa la rajeynaa inla gaadho muddo waqti cayiman leh.

#### **Dib-u-eegid Hor-u-socodka Waxqabadka**

1. Dhammaan matalayaasha Dawlad waa inay qabtaan dib-u-eegid waxqabadka muuqda iyo kan maaliyadeed oo waqti ah iyagoo u maraya Dib-u-eegidda rubucle. Qiimeynta sanadkiiba laba (2) jeer iyo tan sanadlaha ah. Dib-u-eegistu waxay diiradda saari waqtiga iyo saxnaanta xogta waxqabad ee la uruuruyay, ka hor inta ay san sare u gudbin warbixinta, waxayna bixin doonaan talo-bixin wixii sixitaan u baahan ee dib-u-eegidda waqtiga xiga.

1. Dib-u-eegis rubucle ee hawl-wadeenada tiirku waxaa ka mid noqon doona uruurinta xogta waxqabadka geshiga iyo midhaha iyadoo loo eegayo qorshe howleedyada si ay ugu gudbiyaan Wasaaradda qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOPIED) iyo hawl-wadeenada Tiirka ay muhiimka u tahay. Dib-u-eegista rubuclaha ahi waxaa fulin doona shaqaale aqoon u leh ah oo qorsheynaya, kormeerka iyo qiimeynta. Dib-u-eegistu waxay diirada saari doontaa habbonaashaha iyo is waafaqsanaanta leh qorshe howleed la ansixiyay iyo saxsanaanta xogta waxqabadka la uruuriyay, ka hor inta aysan warbixinta sare ugudbinin, sidoo kalena inay ka tala bixiyaan wixii sixitaan uga baahan rubuca soo socda.
2. Dib-u-eegista gudaha ah ee sanadkiiba labo (2) jeer, ee hawl-wadeenada. Tiirku waxaa kamid noqon doona aruurinta xogta geshiga iyo midhaha waxqabadka ee natiijooyinka furaha ugu waaweyn sida lagu qeexay tiirka AWP. Dib-u-eegista sanadkiiba (2) jeer waxaa hogaamin doona godoomiyaha. Howl-wadeenada Tiirka (PWG). Waxaana qeyb ka noqon doona dhammaan daneeyayaasha muhiimka ah ee Tiirkaas. Dib-u-eegistu waxay diirada saari waqtiga iyo saxnaanta xogta waxqabad ee la uruuriyay, ka hor inta aysan sare ugudbin warbixinta, waxayna bixin doonaan talo-bixin wixii sixitaan ubaahan sanad badhka 6 (bil). Dib-u-eegiddani waa inay ahaataa mid fudud, waxaa lagu xeel-dheeraan doonaa dib-u-eegista la qabto sanadkii.
3. Dib-u-eegista sanadlaha ah waxaa kamid aha aruurinta xogta waxqabadka geshiga, midhaha iyo meesha laga helikaro xogta natiijada ee natiijooyinka furaha/muhiim ka ah. Dib-u-eegista sanadlaha ahi waxay diirada saari qiimeynta waxqabadkii sanad miisaaniyadeedkii la soo dhaafay, waxayna go'aamin ficilada iyo qorshayaasha kharashaadka ee sanadka soo fool leh (sanadka lagu jiro +1). Ficiladan iyo

kharashadkan waa in lagu xaliyaa wax ka baddelka qorshaha NDP-ga. Dib-u-eegidd Tiirka ee sanadlaha ahi waa inuu dhammadaa badhtamaha bisha Oktoobar ee sanadka kasta si loo hubiyo in natijooyinka kasoo baxaa ay geshi ugu noqdaan qorsheynta iyo geedi-socodka miisaaniyada sanadka soo socda iyo warbixinta sanad la ha ee loo gudbinaayo Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka.

### **Howlaha Qiimeynta:**

2. Qiimeyntu waa inay bixisaa macluumaad lagu kalsoonaan karo oo faa'iido leh, taas oo inoo siinaysa awood in casharada labartay lagu daro geedi socodka go'aan qaadashada ee deeq bixiyayaasha iyo qaatayaashaba.
3. Si loo xaqijiyo in wax laga barto hirgalinta, dhamaan barnaamijyada iyo mashaariicda lacag toodu ka Badantahy \$100,000 waxaa lagu sameyn donaa qiimeyn xeeldheer ama hanta-dhawr qiimo-lacageed ah (Value for money audit). Dhammaan barnaamijta iyo mashaariicdu waa in ay diyaariyaan qorshe qiimeyn oo ay ku jiraa:
  - a) Qeexid qeybaha kala duwan ee qiimeynta la qabanayo (qiimeynta asaaska[baseline], muddo – dhexaad [mid-term], dhammaadka[final] iyo saameynta [impact]);
  - b) Tusmada habraaca la isticmaalayo;
  - c) Dowrarka iyo mas'uliyadaha;
  - d) Qorshe-hawleed ;
  - e) Miisaaniyad faahfaahsan;
  - f) Shuruudaha tixraaca (ToRs) ee wakaaladaha fulinaya; iyo
  - g) Qeybinta /gudbinta iyo istaraatiijiyada la-socoshada.
4. Nooca qiimeynta ee loo qorsheynayo lana qabanay waa in uu ka turjumaa dabeecadda iyo baaxadda mashruuca. Tusaale,

mashaariicda tijaabada ah ee lagu qabanayo qaar kamida koox ka qeybgalayaal ah ayaa loo dooran karaa qiimeynta saameynta si loo ogaado in maal-gashiga la kordhiyo iyo in kale. Shuruudaha ugu hooseeya ee mashruuc kaste oo kamid ah qeybtan waxaa looga baahanyahay si loo fuliyo wax yaabaha soo socda:

- a) Daraasad saasiyadeed inta lagu jiro wajiga hor-dhaca ee naqshadeynta mashruuca;
  - b) Dib-u-eegid muddo-dhexaad (mid-term) ee badhtamaha mashruuca si loo qiimeeyo hor-u-kaca iyadoo laga fiirinaayo himillooyinka iyo si looga talabixiyo talaabooyinka sixitaanka; iyo
  - c) Qiimeynta ugu dambaysa ama qiimaha-u-dhignaanshaha lacagta (Value for money) ee dhammaadka mashruuca. Qiimaha u dhignaanshaha lacageed waxaa lagu sameyn mashruuca furaha/muhiimka ah ee adeeg bixinta safka hore kaga jira waa marka qiimaha-u-dhignaanshaha lacagta loo arko in ay tahay shuruudda ugu muhiimsan. Dhammaan mashaariicda kale waxay wajihi doonaan qiimeyn caadi ah oo kamadanbays ah oo xeel-dheer
5. Wasaaradda hormuudka ahi waxay mas'uul ka noqoneysaa naqshadeynta, maareynta iyo la socoshada qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicdeeda (oo ay ku jiraan qiimeynta asaaska iyo midda-dhexe). Dhammaan qiimeynta mashaariicda waxaa fulin doona qiimeyayaal dabada/banaanka ka yimid si loo xaqiijiyo madax banaanida la xidhiidha hanta-dhawrka qiimaha-u-dhignaanshaha lacageed.
6. waa inay waafaqsantahay caadooyinka/dhaqammada caalamiga ah, qorsheynta qiimeynuhu waa in si cad qeyb uga ahaato qorsheynta iyo miisaaniyad u qabashada heer mashruuc iyo guud ahaanba hay'adda. Qiyaasta kharashka iyo miisaaniyada

hawlaha hawlaha qiimeynta waa in lagu xaliyaa sida ugu macquulsan, marka la qorsheynaayo miisaaniyadaha mashruuca. Miisaaniyadda qiimeyntu waa in ay ahaato mid ku filan inay daboosho baahiyaha kheyraadka qiimeyn, taas oo buuxisa shuruudaha qiimeynta ee lagu soo bandhigoay siyaasadda.

7. Si loo helo la-socosho iyo waxkabarasho haboon :

- a) Dhammaan dib-u-eegista iyo qiimeynaha waxqabad waxay ka koobnaan doonaan talobixino khaas ah, oo la bar-tilmaameedsaday oo la fulinkaro
- b) Dhammaan hay'adaha la bar-tilmaameedsaday waxey wakhti la xadiday ku bixin doonan jawaab ku aadan talada (talooyink) iyagoo caddeynaya;
  - I. Talada (talooyink) la bixiyay ay taageersan yihiin inaysan taageersaneen;
  - II. Ficilada loo baahanyahay si wax loo dhaqan-geliyo talada (talooyink) la soo jeediyay; iyo
  - III. Waqti xadidan oo leh bar bilaw iyo dhammaad oo looga baahanyahay hirgalinta talada (talooyink) la soo jeediyay
- c) Dhammaan hay'adaha waxaa looga baahan doonaa in ay yeeshaan qorshe lagula soconayo dhaqan gelinta talooyinka, kaasoo la socon doona talooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta, talaabooyinka la-socosho oo leesku waafaqsan yahay iyo xaalada/halka ay marayaan howlahas: iyo.
- d) Waa inay jirto is waafaqsanaan u dhaxeysa tilmaamayaasha iyo bar-tilmaameedyada /yoolasha ku jira QHQ iyo tilmaamayaasha iyo bar-tilmaameedyada qorshayaasha wakaaladaha DXF. Is waafajinta waa muhiim si looga hortago asaasida nidaamyo macluumaad oo is garab socda isku shaqana qabanaya ama soo noqnoqonaaya.

## **Tayada Shuruudaha Qiimeynta**

8. Qiimeynta qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ku jira wejiyada kala duwan waxaa lagu salayn karaa shuruudo kala duwan. Siyaasaddan waxaa lagu saleeyay gundiga qiimeynta hoos ku qoran ee ay diyaarisay gudiga kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta (OECD).
- a) **Mudnaanta:** in la hubiyo heerka uu gaarsiisanyahay ku haboonaanshaha ahdafta qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ee baahiyaha iyo mudnaanaha kooxaha la beegsanaayo/ba-tilmaameedsanaayo iyo inuu waafaqsanyahay siyaasadaha iyo ahdafta Horumarinta Qaranka, iyo sidoo kale siyaasadaha deeq bixiyayaashaba:
  - b) **Wax-ku-ool:** in la qiimeeyo loona hubiyo heerka ilaa xad uu qorshe, siyaasadda, barnamij ama mashruuc uu ka gaadhay ama la filayo inuu ka gaadho himilloyinkiisa;
  - c) **Wartar:** in la cabiro midhaha (output) iyadoo laga eegaayo geshiga (inputs) lagashaday si loo qiimeeyo in midhuhu ay saamigal ku yihiin geshiga iyo in kale,, in la hubiyo heerka ilaa xad uu qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc uu dhalinayo natiijooyinkii looga baahnaa iyadoo la isticmaalaayo geshiga ugu yar uguna wxtarsan ee macquulka ah;
  - d) **Saameyn:** in lacabiro isbedelka tooska ah iyo kan dadban, togan iyo taban oo loogu talagalay iyo aan loogu talogalin iyo saameynta uu yeeshay qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc; iyo
  - e) **Waarid:** in lacabiro heerka ilaa xad la filayo in natiijooyinka ama midhaha uu soosaaray qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ay siisocdaa waqti kaddib.

34. Siyaasaddani waxa qireysaa in dhammaan shuruuduhu aysan kuwada habooneyn qiimeyn oo dhan iyo in go'aamada shuruudaha loo adeegsanaayo xaalad gaar ah ay haboontahay in lagu saleeyo nooca qiimeynta, su'aalaha ugu muhiimsan ee qiimeynta iyo tixgalinaha la xidhiidha hanaanka iyo suurtagalnimada.

### **Howlaha Istatistikis-ka**

35. Horumarka ku salaysan xaqiiqda wuxuu u baahan yahay in lagu gundhiyo macluumaadka iyo xogta istatistikiska, taasoo marta dariiq dheer si ay u siiso xog xaqiiqo ku saleesan oo cad oo loo adeegsado dajinta siyaasadda. Ujeedka nidaamyada istatistikiska waa inay soo saaraan xog xiliyeed taxana ah. Taasoo ah mid leesku haleen karo loona adeegsan karo baadh/ogaado isbedelka bulsho iyo dhaqaale ee muddo. Macluumaadka waxaa loo soosaaraa si joogta ah, iyadoo laraacayo jadwal hore loo cayimay, waana mid dhammeystiran oo dabooli doonta guud ahaan Qaranka (national coverage)
36. Iyadoo la tixgalinayo duruufaha hadda jira iyo sida ay u qaabeysay dhawrkii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya kheyraadka istatistikiska way caqabadaysan yihiin, sidaas daraadeed tirakoob (statistics) la iskuhalayn karaa guud ahaan way xaddidan tahay. Si kastaba ha ahaatee, waqtiga dheer, Dawladda Federaalku waa inay diyaarisaa istaraatiijiyada Qaran ee Horumarimta istatistikiska taasoo siin doonta wadanka istaraatiijiyad lagu xoojinaayo awooda istatistikiska ee guud ahaan nidaamka Qaran ee istatistikiska.

## Howlaha Warbixinta<sup>6</sup>

37. Dhammaan matalayaasha (actors) Dawladdu Waxay soo saari baahina/qeybina warbixinaha soo socda :

1. **Warbixinta Dib-u-eegidda Waxqabadka ee Rubuc-Sanadeedka:**  
Heerka DXF, warbixinaha waxqabad ee rubuclaha ah ayaa lagu soo jeedin doonaa laagana doodi doonaa kulanka/shirka dib-u-eegidda ee rubuc sanadeedka kaas oo ay qaeybgalayaan dhaqan-galiyayaasha ugu muhiimsan ee DXF.
2. **Warbixinta Waxqabadka ee Sanadlaha ah :**  
Warbixinta sanadlaha ah ee waxqabadku waxay qiimayn hor-u-kaca qorshayaasha shaqo ee sanadlaha ah ee matalayaasha, waxayna bixin qiimeyn guud oo ah waxqabadkooda iyagoo loo eegaayo yoolashii/bar-tilmaameedyadii udaganaa. Dhammaan matalayaasha DXF waxaa laga rabaa inay warbixinahooda isu uruuriyaan/isugeeyaan iyagoo raacaya waqtiga loo asteeyay gudbinta warbixinta ee heer Federaal iyo heeerarka la dhaadhiciyay kaddibna ay usoo gudbiyaan WQM&HDH is ay u diyaariso warbixinta waxqabadka sanadlaha ah. WQM&HDH waxay diyaarin doontaa nashqad loo adeegsado diyaarinta warbixinta sanadlaha ah ee waxqabadka sanadlaha ah si caqabadaha waxqabadka qeybta loogu soo bandhigo qaab fududayn kara geedi socodka maareynta aqoonta.

## 6.0 Dowrarka Iyo Mas'uuliyadaha

### Guud-mar

38. Kormeerka iyo qiimeyntu waa mas'uuliyad ay wada leeyihiin DF. Heerar kala duwan danwadaag kala duwan oo ku howlan shaqooyin kala duwan ee gudaha DF. Sawir (muuqaal) adag ayaa oo muujinaayo cidda ku lugta leh iyo waxa la qabanaayo ayaa kasoo baxaaya.

---

<sup>6</sup> Waxaa lagasoo guuriyay Qorshaha Horumarinta Qaranka. DFS. 2017-2019. Final-October.p. 183

39. Mas'uuliyada bulsho ee dhammaan wakaaladaha ay khusaysa waxay u baahan tahay in ay lasocod siiyaan dadweynaha xaqiiqooyinka barnaamijyada iyo mashaariicda loogu talagalay inay gaadhsiiyaan muwaadiniinta alaabooyinka iyo adeegyadaba. Waa qeyb muhiim ah oo kamid ah waajibaad kooda si ay ubixiyaan macluumaadka khuseeya barnaamijka shaqooyinkiisa ama wixii arrimo kale ee ay raadinayaan hay'adaha iyo shaqsiyaadka ay khusayso.
40. Waa muhiim in la xaqiijiyo in dhammaan daneeyayaasha lagu wargeliyo hawlaha iyo midhaha (outputs) barnaamijyada / mashaariicda kala duwan ee ay ku hawlan yihiin hay'adaha / wakaaladaha dawladdu, oo laga dhigo kuwa buuxiya waajibaadkooda bulsho.
41. Dhammaan daneeyayaashu waxay si toos ah ama si dadban ugu lugyeelan doonaan hawlaha Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q). Sidaa awgeed, habka qeyb-qaadashada oo u baahan in laga qeyb-geliyo dhammaan matalayaasha/kooxaha muhiimka ah iyo daneeyayaasha ugu mudan ayaa la dhaqan gelin doonaa. Tani waxay awood u siin doontaa dhammaan matalayaasha ugu muhiimsan inay si buuxda u gutaan una yeeshaan nidaam iyo sidoo kale inay u isticmaalaan natiijooyinka si ay ugu helaan xog ficillada / hawlaha ay fulin doonaan.

### **Dowrarka iyo Mas'uuliyadaha<sup>7</sup>**

42. Dowrarka iyo mas'uuliyadaha hay'adaha dawliga ah ee khuseeya waxqabadka kormeerka iyo qiimeynta ayaa si faah-faahsan ayaa hoos ku xusan. Tani waxay xaqiijin isku-duwid habboon waxayna sahlaysaa is waafajinta iyo isu-dheelitirka kormeerka, qiimeynta iyo ugu dambeynta hagaajinta adeeg-bixinta adeegyada dadweynaha.

---

<sup>7</sup> Waxaa laga soo guuriyay Qorshaha Horumarinta Qaranka, DFS, 2017-2019, Final-October, p 183

**43. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha:**

Wuxuu qabtaa kormeerka barnaamijyada Dawladda ugu muhiimsan si uu u siiyo talo-bixin siyaasadeed Golaha Xukuumada iyo in uu warbixin siiyo Madaxweynaha:

- 1) Wuxuu la socdaa si guud hirgelinta Qorshaha Horumarinta Qaranka; iyo
- 2) Wuxuu siiyaa dadweynaha warbixinta hor-u-kaca QHQ iyadoo lagu bixin doono qudbada sanadlaha ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**44. Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH)**

- 1) Waxay hagtaa Hay'adaha Dawladda Federaalka waxayna xaqiijisaa isku-duwid habboon iyo kor-kala-socoshada hawlaha K&Q;
- 2) Waxay diyaarisaa qorshayaasha horumarka ee muddada gaaban iyo dhexe ee Waddanka, kuwaas oo ah kuwo natiijo-dhalin leh, dhammeystiran oo isku-dhafaan;
- 3) Waxay midaysaa oo ay ka dhigtaa caadi (standard) hannaanka, habdhaqanka iyo farsamooyinka K&Q ee hay'adaha Federaalka;
- 4) Waxay siinaysaa taakulayn farsamo korkana kala soconaysaa unugyada qorsheynta, kormeerka iyo Qiimeynta (PME) ee Wasaaraddaha;

a) Hawlgelinta shaqooyinka kormeerka iyo istatistikiska; iyo

b) Nashqadeynta iyo hirgelinta qorshayaasha qiimeynta.

- 5) Waxay nashqadayn idman ku samaynaysaa dhawrida tayada si waafaqsan qiimeynta baahinta/qeybinta qorshe ee QHQ;
- 6) Waxay si gooraale ah Golaha Xukuumadda ugu gudbinaysaa warbixinaha waxqabadka iyo natiijooyinka Dawladda;
- 7) Waxay lasocota / kormeerta dhaqangelinta habraaca iyo qorshaha K&Q;

- 8) Waxay taakulaynasaa horumarinta awoodda maxalliga / gudaha ee qorsheynta Qaranka, gaar ahaan waxay siisaa taakuleyn iyo hagidda shaqsiyaadka heer Qaran iyo maxalli ah oo mas'uul ka ah dhaadhicinta/daadajinta geeddi-socodka qorsheynta;
- 9) Waxay daraasaysaa oo ay daabacdaa qiimeyn madax banaan ee muhiimka ah ee caqabadaha iyo khiyaaraadka looga bixi karo ee dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada, si kor loogu qaado fahanka dadweynaha iyo ka qeybgalka doodaha dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada;
- 10) Waxay gacan ka gaysataa diyaarinta warbixinta Waxqabadka Dawladda ee Sanadlaha ah iyadoo siisa xog iyo caddayn ku aaddan hor-u-kaca himmilooyinka qorshaha horumarinta Qaranka;
- 11) Waxay kormeertaa waxqabadka nidaamka la dhaadhiciday ee qorsheynta horumarka, waxayna soo jeedisaa casriyaynta looga baahan karo, wanaajinta shaqadiisa;
- 12) Waxay kormeertaa, qiimeysaa waxtarka iyo saameynta barnaamijyada horumarka iyo waxqabadkooda dhaqaale;
- 13) Waxay xiriir kala samaysaa qeybaha gaarka loo leeyahay (private sector) iyo bulshada rayidka ah (civil society) qiimeynta waxqabadka Dawladda iyo aqoonsiga iyo buuxinta gol-duleellooyinka siyaasadaha iyo barnaamijyada Dawladda;
- 14) Waxay ku samaysaa qiimeyn qoto-dheer/xeel-dheer oo saameynta iyo kharashaadka barnaamijyada horumarinta ee la xushay; iyo
- 15) Waxay soosaartaa xogta muhiimka ah ee kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada Dawladda. Xogtan, oo u badan heerka tilmaameyaasha natiijada (outcome indicators) iyo saamaynta (impact), waa in laga soo saaraa muunado/sahanno (sample surveys) ku salaysan qoyska.

#### 45. **Wasaaradda Maaliyadda:**

- 1) Waxay isku-dubaridda diyaarinta iyo soo bandhigida miisaaniyadda qaranka;
- 2) Waxay xaqiijisaa in maasaniyada qaranka kheyraad ku filan looga qoondeeyo sanadkii shaqooyinka istatistikiska, kormeerka iyo

qiimeynta ee Dawladda taas oo waafaqsan habraaca iyo qorshaha K&Q;

- 3) Waxay la socotaa/kormeertaa fulinta miisaaniyadda iyo hor-u-kaca balanqaadyadii lagu heshiiyay (MoUs commitments) si kor loogu qaado in dhamaan kharashaadka dawladda loo adeegsado si sax ah (effectiveness) iyo in lagu qabtay dariiqooyinka ugu saxan (efficiency).
- 4) Waxay siidayn macluumaadka fulinta miisaaniyadda oo tayo leh isla markaana waqti ah;
- 5) Waxay si gooraale ah ugu gudbin kor Golaha Xukuumadda iyo Mudanayaasha warbixinta diyaarinta, fulinta iyo waxqabadka miisaaniyadda;
- 6) Waxay kormeerta fulinta miisaaniyadda horumarka iyadoo adeegsan doonta koontooyin (akoono) mashaariicda deeq-bixiyayaasha oo khaas ah;

46. **Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dawladaha Hoose**

- 1) Waxay ka caawinaysaa dawladdaha hoose diyaarinta qorsheyaal natiijo-dhalin leh iyo miisaaniyaddaha.
- 2) Waxay xoojisaa maamulka suuban ee dawladda hoose iyo u-gudbinta warbixinta qaybaha kasareeya iyagoo hormarinaya nidaamyada iyo dhaqanka kormeerka iyo dabagalka ee Dawladdaha Hoose;
- 3) Waxay kor kala soconaysaa Dawladaha Hoose iyo u hoggaansanaantooda shuruudaha sharciga iyo raacida siyaasadaha iyo xeerarka Qaranka.

47. **Wasaaraddaha Bah-wadaagta ah (Line Ministers)**

- 1) Waxay xaqiijinayaan in hawlaha kormeerka, qiimeynta iyo istatistikiska ee kujiro adeega dadweynaha lagu meeleeeyay shaqaale ku filan;
- 2) Waxay xaqiijinaysaa hawl-gelinta maareyn ku salaysan natiijo (RBM) ee adeega dadweynaha;
- 3) Waxay isku-duweysaa hawlaha qiimeynta adeega dadweynaha, sidoo kale marka ay habboon tahay, waxay qaadaysaa qiimeyno khaas ah;
- 4) Waxay xaqiijinaysaa in dhammaan wasaaraduhu iyo wakaaladuhu ay hal boos ama ka badan ku qoraan dad mas'uul ka ah soo-saaridda istatistikiska, kormeerka iyo qiimeynta.
- 5) Waxay xaqiijinaysaa in Nidaamka Maareynta Macluumaadka (MIS) uu diyaar yahay isla markaana uu shaqaynaayo / hawl-gal yahay;
- 6) Waxay qorsheynaysaa oo ay miisaaniyad sanadle ah u qoondeynaysaa kormeerka iyo istatistikiska;
- 7) Waxay qabanaysaa kulamada rubuclaha ee dib-u-eegista Waxqabadka Tiirka (Pillar) si loo ogaado hor-u-socodka ku aaddan yoolasha/bar-tilmaameedyada miraha (output targets);
- 8) Waxay si rubuc sanadle ah usiin/ugu gudbin MOPIED xogta iyo macluumaad sharaxaad ah oo kusaabsan hor-u-kaca/horumarka marka laga fiiriyo tilmaameyaasha waxqabad (performance indicators);
- 9) Waxay xaqiijin isu-duwid iyo kor-kala socosho habboon oo ku aadan howlaha K&Q ee hawl-wadeenada Tiirka (Pillar Working Groups).
- 10) Waxay qorsheyn oo ay miisaaniyadna u qoondeynaysaa qiimeynta dhammaan mashaariicda iyo barnaamijta lacagtoodu kabadan

tahay **US\$100,000** (boqol kun) oo doolar, taas oo waafaqsan qorshaha qiimeynta ee QHQ;

- 11) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barnaamijka. Siyaasadda iyo qoondeynta kheyraadka;
- 12) Waxay diyaarin qorshe lagula soconayo dhaqan-gelinta tallooyinka, kaasoo la socon doona tallooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta, talaabooyinka la socosho oo la isku waafaqsan yahay iyo xaalada/halka ay marayaan hawlahaas;
- 13) Waxay xaqiijin in warbixinta dhammaystiran ee K&Q ee la'ansixiyay in laga dhigay mid dadweynuhu ay hawlyaraan ku heli karaan waqtiga ay rabaan;

#### **48. Dawladdaha Hoose;**

- 1) Waxay soo saarayaan qorsheyaasha Horumarinta Dawladda Hoose oo natiijo leh;
- 2) Waxay xaqiijinayaan isu-duwidda howlaha kormeerka ee laga fulinayo degmada oo habboon;
- 3) Waxay siin xog waqti iyo tayo leh oo ku saabsan tilmaameyaasha waxqabadka muhiimka ah Wasaaradda Warfaafinta (MoI). Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED);
- 4) Waxay xaqiijin in dhammaan waaxaha qorsheynta ee Dawladdaha Hoose ay hal boos ama ka badan ku qoraan dad mas'uul ka noqda soo-saaridda xogaha istatistikiska, kormeerka iyo qiimeynta;
- 5) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barnaamijka, siyaasada iyo qoondeynta kheyraadka;

49. **Xafiiska Hanti-dhawrka Guud**

- 1) Waxay hanti-dhawrku gelinayaan warbixina kasoo saarayaan dhammaan koontooyinka (akoonada) dawladda ee dhammaan xafiisyada dawladda iyo shirkad kasta oo dawladu leedahay ama lagu ansixiyay xeer Baarlamaan;
- 2) Waxay hanti-dhawr maaliyadeed, qiimaha u dhigma lacagta (value for money), iyo hanti-dhawro kale ku sameynayaan mashruuc iyo hawl kasta oo la xidhiidha ama lug ku leh lacagaha dawladda.

50. **Baarlamaanka**

- 1) Waxay baadhi walxaha/waxyaabaha kala duwan ee kharashka lagu bixinayo iyo wadarta lagu kharashgaraynayo mid kasta;
- 2) Waxay xaqiijin daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka isticmaalka Deeqda/lacagaha dawladda;
- 3) Waxay kormeeri dhaqan-gelinta barnaamijyada iyo mashaariicda Dawladda;

51. **Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka**

- 1) Waxay soo saari Qorsheyaasha Horumarinta Dawlad-goboleedyada oo natiijo-dhalin leh;
- 2) Waxay xaqiijin isu-duwida habboon ee dhaqan-gelinta, kormeerka, dib-u-eegidda iyo qiimeynta heer Dawlad-goboleed iyo ka hoosba;
- 3) Waxay siin xog waqti iyo tayo leh oo ku saabsan tilmaameyaasha waxqabadka muhiimka ah Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED), wasaaradaha iyo wakaaladaha kale ee ay wada-shaqeynta leeyihiin;

- 4) Waxay xaqiijin in dhammaan DXF ay yeeshaan wasaaarado qaabilsan hawlaha qorsheynta, istatistikiska, Kormeerka iyo Qiimeynta;
- 5) Waxay soo saari warbixinta waxqabadka sanadlaha ah oo waafaqsan himmilooyinka iyo yoolasha/bar-tilmaameedyada QHQ iyo Qorsheyaasha Horumarinta DXF ee u dhigma;
- 6) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barmaajika, siyaasada iyo qoondaynta kheyraadka;

52. **Goleyaasha Degmada;**

- 1) Waxay kor-joogtayn hawlaha kasocda Degmada;
- 2) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada siyaasada iyo qoondaynta kheyraadka;
- 3) Waxay xaqiijin in mamulka degmadu u hoggaansan yihiin heerarka iyo dhaqamada wan wanaagsan ee K&Q;

53. **Wakaaladaha / Hay'adaha kale ee fulinaaya (CSOs iyo Qeybaha qaarka looleeyhay);**

- 1) Waxay ka qeyb-qaadan geedi-socodka qorsheynta qaybta dawladda ee heer Federaal, DXF iyo Dawlada Hoose;
- 2) Waxay siin Udbaha / Tiirarka (Pillars), Wasaaradaha, Hay'adaha / Wakaaladaha iyo ama Dawladdaha Hoose ee muhiimka xog waqti iyo tayo leh oo khusaysa maaliyadda iyo dhaqan-gelinta muuqata ee mashaariicda ay wakaaladaha fulinaaya ka yihiin;
- 3) Waxay ka qayb-geli doodaha iyo guddiyada go'aanada qaadata ee heer Barnaamij iyo Qaran kuwaas oo did-u-eega kana talo-bixiya waxqabadka qaybta Dawladda;

- 4) Waxay u baahan in shaqooyinkooda ay waafajiyaan barnaamijyada iyo mashaariicda qeybta dawladda, sidoo kalena u hoggaansamaan waajibaadka dawladda ee warbixinta;
- 5) Waxaa laga fili/rajeyn in ay ka caawiyaan Dawladda (agab, maaliyad iyo dhanka kheyraadka bani'aadamka (gudbinta khibradda)) si ay u hirgeliso mashaariicda / barnaamijyada iyo hawlaha K&Q.

#### 54. **Dan-wadaagta Horumarinta (Development Partners)**

- 1) Waxay bixin aragti dibadeed oo ku aaddan waxqabadka iyo natiijooyinka dawladda;
- 2) Waxay siin xubnaha gudaha iyo dibadda hubaal-celin ku aaddan waxqabadka iyo natiijooyinka dawladda;
- 3) Waxay ku caawin maaliyad, farsamo iyo noocyada kale ee macaawino Dawladda si ay kor u qaado waxqabadkeeda.

#### 7.0 **Adeegsiga Natiijooyinka K&Q**

##### **Adeegsiga Natiijooyinka Kormeerka iyo Qiimeynta**

55. Siyaasada Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeyntu waxay u baahan tahay in natiijooyinka kormeerka iyo qiimeyntu yihiin kuwo la isticmaali karo si ay u wargeliyaan/xogsiyaan go'aan qaadashada si loo wanaajiyo adeeg bixinta.
56. Agaasinka K&Q waa inuu lasocdaa faafinta/qeybinta xogta laga soo saaray kormeerka iyo qiimeynta si loo wargeliyo dhammaan daneeyayaasha (stakeholders) hor-u-socodka dhaqan-gelinta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda.
57. Dhamaan hay'adaha waxaa looga baahan doonaa inay yeeshaan qorshe lagula soconayo dhaqan-gelinta talooyinka, kaasoo la socon doona talooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta talaabooyinka

lasocosho oo la isku waafaqsan yahay iyo xaaladda / halka ay marayaan hawlahaas.

58. Dawladda Federaalka waxay u adeegsan doontaa K&Q ujeedooyinka soo socda;
- 1) **Wanaajinta Tayada:** Agaasinka K&Q wuxuu adeegsan doonaa natiijooyinka K&Q si uu u wanaajiyo / hormariyo tayada iyo waxtarka shaqadooda. Sidaa darteed, Sidaa darteed K&Q waa qayb muhiim ah oo ka mid ah maareynta tayada ee horumarinta shaqooyinka agaasinka K&Q; K&Q waxay dower muhiim ah ka ciyaartaa ka helidda waajibaadyo cusub shaqooyinka horumarineed oo leh macaamiil cusub iyo xoojinta dhisidda xidhiidhkii macaamiishii hore u jirtay.
  - 2) **Barasho (learning) :** MOPIED waxay isticmaalaysaa natiijooyinka K&Q si ay u taageerto geedi-socodka barashada ee barnaamijyada iyo guud ahaan Dawladda.
  - 3) **Hoggaaminta (steering) :** Cadaymaha natiijooyinka ayaa la aruurin si ay wax ugu biiriso go'aannada hoggaamineed ee dhammaan heerarka kala duwan, laga bilaabo barnaamijyada kelida ah ilaa maareynta iyo hoggaaminta. M&E sidaas darteed waxay aasaas u tahay go'aannada hawl-galka, istiraatiijiyada iyo maareynta.
  - 4) **Warbixinta iyo Isla-xisaabtanka:** MOPIED waxay isticmaali doontaa K&Q si ay ugu xisaabtanto shaqooyinkeeda ee loo idmaday, macaamiisha iyo guud ahaan dadweynaha. Isla-xisaabtanka oo ahmiyad gaar ah u leh qeybaha idmanaya iyo dhammaan macaamiisha DF, waxaa sidoo kale ku jira warbixinta natiijooyinka lagaadhay.
  - 5) **Isgaarsiin:** Natiijooyinka iyo talooyinka K&Q ee leh ujeeddo hoggaansanaan ay la socoto waajibaadyo isla-xisaabtan iyo wargelin qeybaha idmaday iyo macaamiisha ayaa la daabici.

Gudaha DF, dhammaan warbixinaha qiimeynta ee dhammaan qeybaha kala duwan ee shaqo waxay ku diyaarsanaan doonaan keydka dhexe ee xogta (central database). Waxaa la xaqiijin daah-furnaanta iyadoo xubnaha dadweynaha ee daneynaya loo ogolaan doono inay qaab *Online*-ah ku helaan qiimeynaha mashaariicda oo kooban.

- 6) **Geedi-socodka Barasho:** Sida hay'ad waxbarasho oo kale, DF waxay doonaysaa inay natiijooyinka K&Q-ta ay u isticmaasho geedi-socod wax ka barasho oo guud ahaan dawladda ah. Natiijooyinka K&Q waxaa la-galin geedi-socod loona isticmaali si ay u fududayso wax-ka barashada barnaamijyada heer tiir (Pillar) iyo guud ahaanba Dawladda. Haddaba, si ay dawladu uga faaiidayso aqoontan, waa in lagu daraa geedi-socodyo dheeraada oo Dawladda oo dhan ah. Tani waxay u baahan tahay xog is weydaarsi heerar kala duwan ah: mid jiipto ah oo u dhaxeeya qaybaha kala duwan ee dawladda, iyo mid joog ah oo u dhaxeeya heerarka kala duwan ee Dawladeed, laga soo bilaabo maareynta ilaa shaqsiyaadka shaqaalaha ah. Shaqada ugu muhiimsan halkan waxay tahay in geedi-socodka khibrada loo galiyo dariiq ay daneeyayaasha kala duwani ay wax uga baran karaan geedi-socodyada kala duwan.
- 7) **Maareynta Hubaal-Celinta:** Si loo xaqiijiyo in Dawladu ay si cilmiyaysan uga jawaabto talo bixinta K&Q. Agaasinka Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa isu-duwi doona nidaam jawaab-celineed , kaasoo si cilmiyaysan usoo bandhigaya qiimeynaha iyo talooyinka sidoo kalena bixinaya sababaha loo ansixiyay ama loo qaadacay/diiday. Talaabooyinka quseeya fulinta talooyinka waa qaar si toosa la isugu raacayo iyagoo qayb ka ah nidaamkan. Agaasinka Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa is joogto ah ula socon doona/fiirin doona xaalada dhaqan-gelineed ee talooyinka la aqbalay. K&Q-tu waxay shaqaysaa oo ay qayb ka qaadataa horumar waara kaliya marka loo adeegsado/isticmaalo in lagu gaadho go'aano kama dambaysa iyo in isbedel la horseedo.

## **8.0 Horumarinta Awooda K&Q**

### **Hordhac**

59. Waxaa aad muhiim u ah in Nidaamka K&Q uu helo cudud shaqaale oo ku filan kuwaas oo leh xirfadaha loo baahan yahay, si uu waxtar u yeesho, waxaa muhiim ah in laga dhiso awoodda uruurinta macluumaadka waxqabadka iyo awooda isticmaalka macluumaadka K&Q ee hay'adaha dhexdooda iyo nidaamka. Helida nidaam fiicann oo K&Q ah kuma filna; baahi caqli gal ah oo loo qabo K&Q ayaa sidoo kale ah muhiim.
60. Qiimeynta baahida iyo awoodda K&Q waxay wargelin u noqon horumarinta kaabayaasha K&Q iyo raasu'maalka aadanaha/dadka ee dhammaan heerarka kala duwan. Agaasinka K&Q waa in uu si joogta isugu duwaa qiimeynta baahiyaha K&Q ee heerarka kala duwan. Agaasinka K&Q waa inay sidoo kale ogaadaan baahiyaha kale ee awoodeed ee laga yaabo inay hortaagan yihiin dhaqan-gelinta barnaamijyada. Miisaaniyadaha K&Q ee qorsheynta istiraatiijiyada, Mashaariicda iyo shaqada heerarka barnaamij waa inay bixisaa horumarinta kaabayaasha K&Q iyo raasu'maalka aadamiga.
61. Agaasinka K&Q oo kaashanaya Wasaaradda dan-wadaagta ay yihiin, Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka, iyo daneeyeyaasha kale ee muhiim ka ah waa inay hormarisaa awoodaha heerarka kala duwan si ay u xaqiijiso dhaqan-gelinta siyaasada K&Q oo sax ah. Tani waxay waafaqsan tahay horumarinta dhaqan ee maareyn ku salaysan Natiiyo (RBM), barasho iyo ka turjumida geedi-socodyada barnaamij iyo guulaha. Barnaamijyada kobcinta awoodu waa in loo nashqadeeyo loona dhaqan-geliyo hab ku salaysan baahiyaha gaarka ah ee kajira dhammaan heerarka kala duwan.

### **Awoodaha Farsamo iyo Maareyn**

62. Agaasinka K&Q waa inuu diyaariyo hab lagu xaqiijinaayo in shaqaalaha K&Q lagu hubeeyo khibrado ku filan iyo awoodo ay si

habboon ugu fuliyaan shaqooyinkooda si ay u diyaariyaan nidaam iyo awood kormeer iyo qiimeyn ee barnaamijyada.

63. Barnaamijka horumarinta awoodda K&Q ee Wasaaraddaha DF, Wasaaraddaha DXF iyo dawladdaha hoose waa in la diyaariyaa lana dhaqan-geliyaa.

64. Hawlaha kobcinta awooddu waa inay xaqiijiyaan:

- 1) In isticmaalayaasha xogta K&Q fahmaan sida shaqooyinka K&Q loogu dabaqayo mas'uuliyadahooda gaarka iyo sida looga falceliyo natiijooyinka K&Q isticmaalaha K&Q Waa inuu awooddaa inuu qiimeeyo macluumaadka lagu soo uruuriyay geedi-socodka K&Q, una isticmaali karaa sidii qalab/aalad lagu qatao go'aannada maaraynta iyo sidii uu u wanaajin lahaa faro-gelinta mustaqbalka isagoo adeegsanaya geedi-socod qorshe.
- 2) In maareeyeyaasha qeybta dawladdu ay awooddaa in ay diyaariyaan nidaam K&Q, maareeyaan nidaamkaas, kana soo saaraan natiijooyinka looga baahan yahay. Maareeyaha K&Q waa inuu awooddaa in uu isku xidhi karo qeybaha kala duwan ee shaqada K&Q ee xidhiidhka leh, si ay u sameeyaan nidaam isku-dhafan.
- 3) Fuliyaha K&Q ee dawladdu waa inuu awooddaa inuu adeegsado hanaan xaqiiq-ku-salaysan (evidence-based approach) si uu u uruuriyo una falanqeeyo xogta hawlaha/shaqooyinka dawladda. Uruurinta xogtu waa in ay ku salaysnaataa hab casriyaysan (scientific methods), iyadoo la adeegsanayo aalado kala duwan sida tilmaameyaasha iyo cabiraadaha kale ee lagu kalsoonaan karo. Xogta noocan ahi waa inay si cad u muujisaa in si wacan dawladdu u fulinayso shaqooyinkeeda la xidhiidha faro-gelino gaar ah iyo adeegeeda guud ahaaneed, mashaariicda iyo barnaamijyada.

## **10.0 U hogaansanaanta Siyaasada iyo Mabaadii'da K&Q (Compliance with M&E Policy and Standards)**

### **U-hoggaansanaan**

65. Dhammaan daneeyayaashu waa inay u hoggaansan yihiin siyaasada Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta si loo xaqiijiyo in si habboon loo dhaqan-geliyo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda dawladda. U-hoggaansanaanta siyaasadani waa ku-toosnaanta tilmaamaha/hagayaasha, mabaadii'da, wadiiqooyinka shaqada iyo awaamiirta.
66. Dhammaan Hay'adaha dawliga ah, Bulshada rayidka ah, iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ka diiwaan gashan dawladda isla markaana haya maaliyad dadweyne waxaa looga baahan yahay in ay u hoggaansamaan shuruudaha siyaasadan qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta. Shuruucda lagu dajiyay dhukumintigan Siyaasada ee hagaaya geedi-socodka kormeerka iyo qiimeynta waa in lagu dabaqi karaa qaab-dhismeedyada dawladda.
67. Shuruudaha U-hoggaansanaanta iyo Waajibaadka waxaa kamid noqon:-
- 1) Waajibaadyada warinta (warbixinta) iyadoo la-raacaayo naqshadaha lagu heshiiyay;
  - 2) Raacida mabaadii'da siyaasada qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;
  - 3) Raacida shuruudaha Kormeerka iyo Qiimeynta; iyo
  - 4) Ku-sugnaanta tayada, tirada, waqtiga iyo kharashka lagu heshiiyay (tan waa in la qeexo lagulana heshiiyo daneeyeyaasha)

### **U-hoggaansan la'aan**

68. U-hoggaansami la'aanta siyaasadan waxaa lagu maareynayaa qaab cuna-qabatayn ah oo lasaarayo ciddii u hoggaansami wayda shuruudaha.
69. Wasaaraddaha dan-wadaagta ah, DXF iyo Dawladdaha hoose waxay qaadi doonaan mas'uuliyadda gaadhida yoolasha/bar-

tilmaameedyada la dajiyay laguna heshiiyay sanadkiiba isku xardhan/qoran qorshahooda shaqo. Xogta waxqabadka ee Tiirasha iyo Dawladdaha hoose marka loofiiriyo yoolasha/bar-tilmaameedyada la-dajiyay ayaa dhibco la-siin doonaa, hay'adahana waa la xadayn doonaa (will be benchmarked).

## **Lifaaq I**

**Isla-xisaabtan**<sup>8</sup>: Waajibaadka in lasoo bandhigo in shaqada lagu qabtay si waafaqsan shuruucda iyo heerarkii lagu heshiiyay ama in si daacada oo sax ah looga warbixiyo natiijooyinka waxqabadka ee dowlada waajibaadka ama qorshaha. Tani waxay u baahan kartaa taxaddar, xitaa sharci ahaan la difaaci karo, soo bandhigid in shaqadu ay waafaqsan tahay shuruudaha heshiiska

**Hanti-dhawr**: Waa hawl loo naqshadeeyay qaab dammaanad-qaad himmillo oo madaxbanaan si qiimo loogu yeelo loona wanaajiyo shaqooyinka hay'adaha. Waxay ka caawisaa hay'adda in ay gaadho himmillooyinkeeda iyadoo keenaysa hannaan dhawrsoon si loo qiimeeyo loona hagaajiyo waxtarka geedi-socodyada maareynta khatarta, xakamaynta iyo maamul-wanaagga (maamulka suuban).

**Wax-ku'ool** (Effectiveness): ilaa heerkii laga gaaray hirgelinta himmillooyinka faro-gelinta horumarineed, ama la filaayo in laga gaadho iyadoo la tixgelinayo sida ay u kala mudan yihiin

**Waxtar** (Efficiency): Qiyaasta sida si dhaqaale ahaana kheyraadka/geshiga (lacagaha, khibrada, waqtiga, iwm) loogu badalay natiijooyin.

---

<sup>8</sup> Qeexida iyo dhammaan kuwa kaleba waa qaar la isla ogolyahay heer caalami oo laga soo qaatay "Glossary of key Terms in Evaluation and Results Based Management , OECD, 2010"

**Qiimeyn:** waa u kuur-gal nidaam ujeedo leh oo lagu sameeyo mashruuc, barnaamij ama siyaasad socota ama dhamaystirmay, naqshadooda, dhaqanglintooda iyo natiijooyinkooda. Ujeedku waa si loo ogaado ahmiyadda iyo buuxinta himmillooyinka, waxtarkooda horumarka.

Wax ku-oolnimada, saamaynta iyo waaritaanka. Qiimeyntu waa inay noqotaa mid laga helo macluumaad la isku haleyn karo oo faa'iido leh, taasoo awood inoo siinaysa in casharadii aan baranay ku dabaqi karno geedi-socodka go'aan qaadashada ee qaateyaasha iyo deeq bixiyeyaasha

**Qiimeynta Debedda** (external evaluation): Qiimeynta waxqabad faro-gelin horumarineed oo ay fulisay hay'ad ama shaqsiyaad ka baxsan deeq bixiyaha iyo hay'adda fulinaysa.

**Warcelin** (Feedback): U-gudbinta natiijooyinka kasoo baxda geedi-socodka qiimeynta qeybaha ay muhiimka iyo faa'iidada u leeyihiin si loo fududeeyo barashada. Tan waxaa kamid noqon kara uruurinta iyo faafinta/qeybinta natiijooyinka, gabagabada, talooyinka iyo casharada laga helay khibrada.

**Yool** (Goal): Waa hamilada sare ee waxqabadka faro-gelin horumarineed ee loogu tala-galay inuu wax biiriyo / kordhiyo.

**Saameyn:** Saameyn wanaagsan (taban) iyo saameyn xun (togan), waa saameynta koobaad iyo labaad ee muddada-dheer ee uu dhaliyay waxqabadka faro gelin horumarineed, taas oo toos ah ama dadban, loogu talagalay ama aan loogu talo-gelin.

**Tilmaame** (indicator): shay tiro ama tayo ama doorsoome kaasoo ina siiya hab fudud oo la isku haleyn karo oo aan ku cabirno

guusha si loo muujiyo isbedelada ku xidhan faro-gelin (intervention), ama si loo caawiyo qiimeynta waxqabadka shay horumarineed (development factor).

**Geshi** (Inputs): Maaliyadda, Dadka iyo kheyraadka alaabta loo isticmaalo faro-gelin horumarineed.

**Casharada La bartay:** Jaan-gooyooyin ku salaysan khibradaha qiimeynta mashruucyada, barnaamijyada ama siyaasado kuwaasoo oo laga soo koobay marxalado gaar ah ilaa xaaladaha balaadhan, badanaa casharadu waxay iftiimiyaan awoodaha ama daciifnimada diyaarinta, naqshadaynta iyo dhaqan-gelinta kuwaas oo saameeya waxqabadka, natiijada iyo saameynta guud.

**Qiimeynta Muddada-Dhexe** (Mid-term evaluation): Qiimeynta la fuliyo bartamaha xiliga dhaqan-gelinta faro-gelin (bartamaha cimriga mashruuca).

**Kormeer:** Waa hawl xidhiidhsan /joogt ah taas oo isticmaali xog si nidaamsan looga uruuriyay muujiyeyaal (indicators) gaar ah si ay uga caawiso maareynta iyo daneeyayaasha muhiimka ah ee faragelin horumarineed (development intervention) oo socota, muujinta heerka hor-u-socod iyo guul ee himmillooyinka iyo hor-u-socodka isticmaalka maaliyaddaha loo qoondooyey.

**Natiijo** (Outcome): Waa saameynta muddada-dhaw ama muddada-dhexe ee midhaha (outputs) faro-gelin (intervention) kuwaas oo la filaayo amaba la gaadhay/hantay.

**Miro-dhal** (Outputs): Waa wax-soo-saarka, raasa'maalka alaabooyinka iyo adeegyada kuwaas oo ka dhasha faro-gelinta horumarka (development intervention); waxaa sidoo kale ku jiri kara isbedelada ka dhasha faro-gelinta muhiimka u ah gaadhida natiijooyinka.

**Talo-bixinno** (Recommendations): waa soo jeedino looga gol leeyahay in lagu xoojiyo waxtarka, tayada, wax-ku-oolnimada fara-gelin (intervention) horumarineed: ama in dib loo naqshadeeyo himmillooyinka; ama si dib loogu naqshadeeyo himmillooyinka ; iyo/ama dib u qoondeynta kheyraadka. Talo-bixinaha waa in ay ku xidhan yihiin ama daba-socda gabagabooyinka (conclusions).

**Natiijo** (Results): Waa midhaha natijada ama sameynta (lagu talo-galay ama aan lagu talo-galin, sameyn wanaagsan iyo/ama sameyn xun) uu leeyahay faro-gelin (intervention) horumarineed.

**Dib-u-eegid** (Review): U-kuur-gal gooraale ah ama aan qorsheysnayn/tooska ahayn ee waxqabadka ay leedahay faro-gelini (intervention).

**Waarid** (Sustainability): Waa sii jiritaanka faa'iidooyinka wax-qabadyada horumarineed kadib marka taageerada horumarineed ee weyni ay dhamaato.

## **Ujeeddo: Go’aan Gole Ansixinta Ku-wareejinta Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho**

### ***Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay:** Qodobka 99<sup>aad</sup>, Xarfaha (a), (b), iyo (f) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Qodobka 100<sup>aad</sup>, Xarfaha (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha

**Markuu Arkay:** Go’aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.48.07.18** ee **26/07/2018** kuna saabsan ansixinta “**Ku wareejinta Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho**” oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey:** Muhiimadda iyo Baahida loo qabo ku-wareejinta Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho.

### ***Wuxuu Meel-mariyey:***

#### **Qodobka 1aad**

Go’aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.0048.07.18** ee 26/07/2018, kuna saabsan ansixinta “**Ku wareejinta Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho**” oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

#### **Qodobka 2aad**

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/07/2018, waxa si rasmi ah loogu wareejiyey **Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed** Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho.

#### **Qodobka 3aad**

1. Dhammaan Ciidamada Xasilinta qaybahooda kal duwan waxaa la hoos-geeyey **Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed**.

2. In Taliska Boolisku hawl-geliyo **Ciidamda 14-ka Oktoobar**, gaar ahaan kuwooda dhammaystay tababarrada, si gaar ahna loo siiyo tababarro la xiriira dhawrida Xuquuqul Insaanka.

### **Qodobka 4aad**

In Wasaaradda Maaliyaddu gacan buuxda ka geysato sidii Ciidamada qaarkood oo aan mushaarka qaadan loogu heli lahaa Mushaar, gaar ahaan ciidanka 14-ka Oktoobar ee hoos yimaada Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.


### **Qodobka 5aad**

In Hay'adda Nabad-sugidda iyo Sir-doonka Qaranka ay fuliso hawlaha la xiriira xogta, xuuraanka iyo la socodka dhaq-dhaqaaqa cadowga, si loo helo amni sugan oo taya sare leh.

### **Qodobka 6aad**

Qorshaha Sugidda Amniga Caasimadda Muqdisho, waxaa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

  
Mudane Xasan Cali Khayre  
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



**Ujeeddo: Go’aan Gole Ansixinta Siyaasadda Istiraatiijiyadda WACYI-GELINTA QARANKA**

***Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay:** Qodobka 99<sup>aad</sup> , (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Qodobka 100<sup>aad</sup> , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dal-xiiska.

**Markuu Arkay:** Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.54.09.18** ee **20/09/2018** kuna saabsan ansixinta **“Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyigelinta Qaranka”** oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyi-gelinta Qaranka.

***Wuxuu Meel-mariyey:***

**Qodobka 1aad**

Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.54.09.18** ee 20/09/2018, kuna saabsan ansixinta **“Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyigelinta Qaranka”** oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.


**Qodobka 2aad**

Waxa Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Siyaasadda Istiraatiijiyada Wacyi-gelinta Qaranka.

**Qodobka 3aad**

Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyi-gelinta Qaranka, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

  
Mudane Xasan Cali Khayre  
Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



**1.0 HORDHAC** Soomaaliya , waa waddan ay dadkiisu yihiin bulsho afmaal ah, oo warbaahinta aad u daneeya, waxaana ku yar qorista iyo aqrinta. Waxaa u badan bulshada in ay wax dhagaystaan in ka badan aqrinta iyo qorista. Badanaa go'aanada ay qaataan, waxay ku xiran yihiin waxa ay ka maqlaan aaladaha wax la isugu gudbiyo sida Idaacadaha iyo Tv-yada.

Ku dhowaad soddon sano kadib, oo dalka uu soo maray colaado wajiyo badan, sida kuwo qabiil ku saleysan, xagjirnimado diimeed, faragalin shisheeye iwm, ayaa dhalinyarada Soomaaliyeed, lagu qiyaasay 75% shacabka Soomaaliyeed, ayaan fursad u helin fahamka hanmaanka dowladnimo iyo nabad ku wada noolaanshaha. Tiro badan, oo ka mid ah ma helin waxbarasho tayo leh iyo fursado shaqo.

Duruufahaas, ayaa keenay in bulshada Soomaaliyeed ay u nuglaato argagixisada, qabyaaladda, marinhabaabinta iyo kala qeybsanaanta. Waxay arrintan caqabad ku noqotay is aaminka dawladda iyo dadweynaha, taasoo sida kaliya ee lagu daweyn karo ay tahay in wax laga badeelo sida ay u fakaraan bulshadu.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay leedahay Wasaarad Warfaafin, oo mas'uul ka ah wacyigalinta dadweynaha, adeegsanaysana qeybaha kala duwan ee warbaahinta dalka oo ay iyadu mas'uulka ka tahay.

Haddaba, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, iyadoo ka duuleysa xaaladaha aan kor ku xusnay, isla markaana maskaxda ku heysa ku talogalka qaran ee La dagaalanka argagixisada, dib u eegista dastuurka, in doorasho qof iyo cod ah la gaaro sanadka 2021 iyo qorshayaal kaleba, waxay soo gudbineysaa Qorshe Qaran, oo lagu wacyigeliyo qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed, kaasoo ku eg 2021.

Dowladda Federaalka, ayaa iska leh hogaanka iyo meel marinta istaratiijiyadda wacyigelinta qaran. Madaxda sare ee dowladda, waxaa saaran mas'uuliyadda ugu weyn ee hirgelinta Istaraatiijiyaddan. Wasaaradda Warfaafintu, waxay leedahay doorka xiriirinta iyo qiimeynta ayadoo kaashaneysa wasaaradaha heer Maamul Goboleed.

Istaraatiijiyaddan waxay aqoonsanaysaa doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin wacyigelinta Ururada Bulshada iyo saxaafadda madaxa bannaan, oo lagu dhiiri galinayo siday doorkooda muqadaska ah u qaadan lahaayeen.

Taabo gelinta Istaraatiijiyadda Wacyigelinta Qaran, waxay u baahan tahay qoondo maalgelin dowladeed. Wasaaradda Warfaafintu dalbanaysaa in wacyigelinta lagu daro arrimaha doorka u ah xasilinta iyo horumarinta dalka iyo in loo sameeyo qoondo miisaaniyadeed.

Hirgelinta istaraatiijiyadu, waxay mudnaanta kowaad siinaysaa ololayaasha muhiimada goonida ah u leh dowladda. Olole kasta wuxuu yeelanayaa istaraatiijiyadiisa wuxuuna xambaarayaa fariimaha qaaska u ah, marka madaxda qaranku iclaamiso kuwa ahmiyada goonida ah u leh. Olole kasta waxaa Wasaaradda Warfaafintu ay kala shaqeyneysaa wasaaradda uu sida gaarka ah u quseeyo wax-qabadkeeda.

Doorka Wasaaradda Warfaafintu waa qaabeynta ololayaasha iyo taakulada warbaahineed ee uu mid kastaa u baahan yahay. Wuxuuna tilaabo qaadku noqonayaa sidan hoos ku xusan:

**Madaxda Sare ee Dowladda:** Go'aan qaadashada la xiriira ololayaasha ahmiyada kowaad leh ee ay tahay in sida ugu dhaqsaha badan loo bilaabo.

**Baarlamaanka:** Hadii loo baahdo, Gollaha Shacabku, wuxuu meel marinyaa istaraatiijiyada iyo qoondada miisaaniyadeed ee loo baahan yahay.

**Wasaarada Warfaafinta:** Waxay qaabeysaa dhamaan ololayaasha ay madaxda sare iclaamiyeen ayadoo ka qeyb-gelineysa wasaarada sida goonida ah ololuhu u hoostagayo.

**Wasaaradaha Heer Dowlad Goboleed:** Wasaaradaha Warfaafinta iyo kuwa adeegayada kale ee heer Maamul Goboleed, waxay si buuxda uga qeyb qaadanayaan fulinta ololayaasha.

**Beesha Caalamka:** Dowladaha daneeya arrimaha dalkeena iyo hay'adaha samafalka, waxaa laga dalbanayaa maal-gelinta ololayaasha wacyigelinta ee loo baahan yahay.

**Wadatashiga Taabogelinta Istaraatiijiyada:** Wasaaradda Warfaafintu, waxay xiriirineysaa shirarka guud ee wadatashiga la xiriira diyaarinta iyo taabogalinta dhamaan qorshayaasha Wacyigalinta Qaranka.

**2.0. XEERINTA ISTARAATIJIYADDA** Ku dhowaad sodonkii sano ee ugu dambeeyay, waxaa ummadda Soomaaliyeed soo maray isbedello dhinacyada siyaasadda, amniga, dhaqaalaha iyo bulshada ah.

Waxaa isbadaladan ay ka dhasheen kadib burburkii dowladii dhexe ee dalka ka talineysay muddo dhowr iyo labaatan sano ah, kuwaas oo ay kamid yihiin:

- a. In ay dadweynaha ka guurto ahmiyadda ay leedahay wadaniyadda
- b. In ku dhaqanka qabyaaladda xoogeysto.
- c. In dagaalo sokeeye ay dalka ka dhacaan.
- d. In dhalinyaradu weyso cid ku hagta waddada qarannimo, qaarkoodna ku qaangaareen iyadoo tobanaan sano aysan dalka ka jirin dowladnimo.
- e. In dhalinyaradu waayaan manhaj mideysan oo dhallinta dalka ku hanuuniya Qarannimo, Soomaalinimo iyo Wadaninimo.
- f. In si khaldan u adeegsiga diinta uu badato
- g. In kooxo diimeed oo xagjir ah ay soo baxaan, oo dalka falal argagixiso oo arxan la'aan ah ka fuliya.
- h. In ka dhiidhinta dhibaatooyinka argagixisada aysan jirin ama aad u yar tahay.
- i. In shacabka Soomaaliyeed ay garan waayaan waxtarka dowladnimada.

Hadda oo dalka Soomaaliya ay ka jirto dowlad Federaal ah, waxaa lagama maarmaan ah in ay ka shaqeyso sidii loo dadweynaha Soomaaliyeed looga wacyigalin lahaa dhibaatooyinka aan kor ku soo sheegnay.

Muhiimadda wacyigalinta, waxaa tusaale nooga filan sidii dowladdii military-ga ee dalka ka talineysay 21 sano ay diiradda u saartay in warbaahintu door lama ilaawaan ah ka qaadato wacyigalinta dadweynaha, iyadoo lagu guubaabin jiray in dalkooda difaacaan, beeraha fashaan, ka qeybgalaan iskaa wax u qabso. Waxaana la adeegsan jiray farsamooyin ay ka mid yihiin xaafadaha dadka la isugu geeyo oo la baro himilooyinka kacaanka iwm, ilaa iskuulada hoose dhexe la baro heesaha kacaanka.

### **3.0. SIYAASADDA ISTARAATIJIYADDA WACYIGELINTA QARANKA**

Wacyigelinta & Hanuuninta Dadweynaha, waa qorshayayaasha ugu muhiimsan ee dowladda.

- a. Diyaarinta Istiraatiijiyadda iyo Qorshe-Howleedka Wacyigelinta, waxaa hogaankeeda iska leh Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta, Dhaqanka & Dalxiiska, oo matalaysa dowladda Federaalka.
- b. Dowlad Goboleedyada door muuqda, ayay ku leeyihiin Qorshaha Wacyigelinta Qaranka. Qorshaha Qaran, wuxuu ku wajahan yahay dhamaan guud ahaan shacabka Soomaaliyeed meel kastoo ay joogaan.

**4.0. HIMILADA** In la helo bulsho Soomaaliyeed, oo caafimaad qabta, mideysan, oo u diyaar ah la hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ah iyo dowlad diidka ku dhex baahay bulshada.

### **5.0. HANNAANKA**

Si loo gaaro himilada dowladda ee ku wajahan shacabka waa in wacyigelin ballaaran loo sameeyaa bulshada Soomaaliyeed, taasoo la fal-galaysa dhinacyada amniga, sharciga, dastuurka iyo doorashooyinka, horumarka, cadaaladda, caafimaadka, waxbarashada iyo dowlad wanaagga. Waa in si fiican loo isticmaalo qeybaha kala duwan ee aaladaha warbaahinta dalka.

**6.0. UJEEDDOOYINKA** Ujeeddooyinka laga leeyahay Istartaatiijiyadda Wacyigalinta, waxaa ka mid ah:

- a. In laga hortaggo, oo lala dagaalamo fikirka kooxaha xagjirka ah.
- b. In lagu dhiirigeliyo dhalinyarada Soomaaliyeed in ay ka qeybgalaan horumarinta dalka, isla markaana ay ka fogaadaan fikirada aan diinta Islaamka sal ku lahayn.
- c. In lagu hago bulshada tubta toosan ee horumarinta dalka, wadaniyadda, is xilqaanka iyo Isqaadashada.
- d. In la abuurro jawi ay bulshada iyo dowladdu ku wada fal-galaan si loo xaqiijiyo is aaminaad xoog badan.
- e. In la hirgeliyo nidaamka ku dhisan daahfurnaanta iyo dowlad wanaagga.
- f. In la helo ciidan Soomaaliyeed oo kasbada kalsoonida bulshada, isla markaana ku shaqeeya wadaninimo iyo u hogaansanaanta siyaasadda amni ee dowladda.
- g. In la muujiyo waxqabadka dowladda ee ku aaddan daryeelka bulshada sida dib u soo celinta waxbarashada, caafimaadka iwm.

## **7.0. MOWDUUCYADA AY ISTARAATIJIYADDU FULINAYSO 7.1. KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA AH**

Fikirka Xagjirka ah ee argagixisada, wuxuu ka mid yahay aafuoyinka dalkeenna ragaadiyay. Dhallinyaro badan iyo qeybo bulshada ka mid ah, oo aan laheyn aqoon diineed iyo mid maaddi ah oo ku filan, ayaa u nuglaaday marin habaabinta iyo qaadashada afkaarta xagjirnimada ee la huwiyay shaarka diineed.

In badan oo ka mid ah dadka ku sumoobay afkaarta xagjirka ah, waxaa arrintaas ku qaaday arrimo ay ka mid yihiin Aqoon la'aan, Diin jaceyl, Duruufo dhaqaale, Bulsho iyo Tabashooyin awood-sheegad ama ka qeybgalin la'aan nidaamka dowladnimo.

Sidoo kale waxaa jira dad badan, sida dhallinyarada, oo wali u nugul afkaarta xagjirka ah ee ay faafinayaan kooxaha argagixisaa ah sida Alshabaab, Alshabaab iyo Daacish.

Haddaba si loola tacaalo arrintan waxaa lagama maarmaan ah in laga hor tago faafitaanka afkaaraha xagjirka ah ee cunfiga ku dhisan iyo in lala dagaallamo afkaartan oo laga baabi' iyo dadka ay saameynta ku yeesheen.

Si haddaba loogu guuleysto labadaas howlood ee ka hortagga iyo la dagaalanka xagjirnimada, Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta, Dhaqanka & Dalxiisku, waxay dejisay qorshe wacyi gelineed oo isugu jira ka hor tagga iyo la tacaalidda xag-jirnimada sida:

- a. Abaabulka Culimaa'udiinka Soomaaliyeed, Indheer garadka, Aqoon-yahanada,
- b. Hoggaamiyeyaasha Dhallinyarada, haweenka iyo qeybaha kale ee ulshada, aynuga qeyb galaan la dagaalanka xag-jirnimada.
- c. Diyaarinta iyo baahinta duruus diini ah, oo diiradda lagu saarayo dhex dhexaadnimada Islaamka iyo sida ay diinta Islaamku uga fog tahay xag-jirnimada.
- d. Doodo dadweyne, oo dhiirri gelinaya wada noolaashaha, isu dulqaadashada iyo nabad dhisidda.
- e. Farriimo warbaahineed, oo maqal iyo muuqaal ah iyo kuwo daabacan oo da' yarta iyo qeybaha bulshada loogu sheegayo in ay ka feejignaadaan afkaaraha Khalaad ee shaarka diinta la huwiyay.
- f. Barnaamijyo iyo fariimo bulshada lagu barayo sooyaalka kooxaha xag-jirka iyo dhibaatooyinkii ay muslimiinta badeen taariikhda fog iyo waqti xadirkan.
- g. Barnaamijyo tooshka ku ifinaya cawaaqib-xumida xagjirnimada (Maxay bulshada tareen xagjirku vs Maxay dhib u geysteen? Halkee noo wadaan? iwm.

## **7.2. LA DAGAALANKA QABYAALADDA**

Qabyaalad, waa marka iyadoo la adeegsanayo qabiil la sameeyo eex, sadbursi xadgudub. Qabyaaladdu, waxay dhiirigelisaa kala qeybsanaanta bulshada, waxayna horseedaa burburka ummadda iyo dowladnimada.

Hadaba, waxaa lagama maarmaan in bulshada Soomaaliyeed lagu wacyigaliyo ka hortagga iyo joojinta qabyaaladda. Waxaana la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

- a. In dadka la baro dhibaataada ay qabyaaladdu leedahay iyo cawaaqibka ummaddu ay ka dhaxasho.
- b. In doodo furan laga sameeyo sababta ay noo qeybisay qabyaaladdu, inago dhan walba ka midaysan.
- c. Isbar-bardhigga qabyaaladda iyo dowladnimada
- d. Abuuridda afkaaro ka hortagaya dhaqamada adeegsiga qabiilka.
- e. In laga doodo habka ugu haboon ee loo joojin karo qabyaaladda.

## **7.3. MUUJINTA WAXQABADKA DOWLADDA**

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay si joogto ah u qabataa hawlo kala duwan, oo khuseeya dhinacyada siyaasadda, amniga, horumarka dhaqaalaha, daryeelka bulshada iyo guud ahaan taabagalinta waajibaadka qaran ee loo igmaday.

Hadaba, waxaa lagama maarmaan ah in waxqabadka dawladdu uu noqdo mid u muuqda bulshada Soomaaliyeed. Si taa loo suurtagaliyo, waxaa la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

- a. In si daahfuran loo soo bandhigo waxqabadka dawladda maalin, todobaad iyo sanadkiiba mar.
- b. In toddobaad walba la soo saaro barnaamijyo warbaahineed iyo wargeysyo muujinaya howlihii u qabsoomay dowladda.

- c. In Warbaahinta madaxa bannaan iyo tan gaarka loo leeyahay lagu dhiirigeliyo muujinta waxqabadka dowladda.
- d. Abuurista tartamo u dhexeeya howlaha dowladda si loogu tartansiiyo Isla markaana abaalmarin lagu siiyo hay'adda qabta hawlaha ugu wanaagsan saddexdii/lixdii bil ama sanadkiiba mar iwm.
- e. Abuurista barnaamijyo warbaahineed oo si joogto ah bulshada ugu gudbiya waxqabadka dowladda.
- f. Qabashada kulamo iyo tartamo lagu dhiirigelinayo ka warqabka dadweynaha ee waxqabadka dowladda.
- g. Dhiirigelinta Ciidamada Qalabka sida iyo muujinta kaalintooda difaaca qaranka.

#### **7.4. CADDAAALADDA**

Caddaaladda waa aas-aaska dowladnimada. Waa tiir dhexaadka iyo barta kalsoonida shacabka ka dhalato. Barnaamij wacyi gelin ah oo lagu dhiiri gelinayao doorka dadweynaha kaga aadan in la helo cadaalad dhameeystiran oo ku saleysan diinteena iyo dastuurka dalka.

Cadaaladda kama bilaabato maxakamadda ee waa silsilad ka soo bilaabata xog ururunta marka falka dhaco. Qof waliba oo muwaadin ah door ayuu ku leeyahay fulinta isku xirka iyo dhaqan gelinta cadaaladda. Kalsoonida iyo wada shaqeynta waxa lagu kasban karaa in laga wacyi geliyo dadweynaha xaquuqda muwaadinka uu leeyahay iyo waajibka lagu leeyahay muwaadin ahaan.

- a. In la abuuro barnaamijyo nidaamyada caddaalada lagu barayo dadwaynaha.
- b. In hey'adaha caddaalada ee dowlada lagu dhiiri galiyo in muwaadiniinta si eexla aan ah oo siman ugu caddaalad sameeyaa.
- c. In la muujiyo dadwaynahana loo soo bandhigo guulaha dhinaca caddaalada ah ee dowlada.

## 7.5. LA DAGAALANKA MUSUQA

Musuqa marka si kooban loo qeexo waa fal dembiyeed ah ku takri fal awood ama hanti qof ama xafiis dan guud loo idmey, oo dano gaara ah lagu fuliyey.

Wacyi gelinta ku wajahan Musuqa waxaa la adeegsan karaa fariimo lagu muujinayo in musuqa caqabad ku yahay danta guud ee ummadda. Waxaa muwaadinka la dareensiin karaa in muusuuq ku yahay dalka iyo danta guud.

Musuqa, ayaa la rumaysanyahay in uu yahay cudur halis ku ah Qarannimada isla markaana uu qeybta ugu wayn ku leeyahay aaminaad darrada, iyadoo qaar ka mid ah bulshadu ay ka muujiyaan Dawladnimada, wuxuu sidoo kale caawiyaa Amnidarada, Cadaalad xumada iyo kala fogaashaha Dawladda iyo Dadwaynaha, sidaas awgeed waa lagama maarmaan in bulshadu hesho Wacyigalin ku aadan Musuqa. Wacyigalinta waxaa loo qaadayaa sida soo socota:

- a. In Dadwaynaha iyo Mas’uuliyiintaba la baro waxa loola jeedo Musuq iyo nuucyada uu ka koobanyahay.
- b. In labaro Bulshada, Ciidamada iyo Masuuliyiintaba Ciqaabaha ka dhasha Musuqa,heer ama nuuc kasta uu yahay.
- c.
- d. In la barto dhibta uu Dal iyo Dadba u leeyahay Musuqa iyo natiijada xun ee laga dhaxlo aduun iyo Aakhiraba.

**7.7. BARISTA WADANIYADDA** Mid ka mid ah sababaha uu Dalku u soo kabsan la’yahay, waxaa lagu tilmaamaa in ay tahay, iyadoo aanay dad badani faham ka heysanin micnaha wadaniyadda iyo waxa ay u taagan tahay, sidaas awgeed waa lagama maarmaan in la helo Wacyigalin barta Bulshada micnaha Wadaniyadda. Si taas loo hirgaliyo waxaa la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

- a. In la qabto Doodo la isku waydiinayo waxa ay u taagan tahay Wadaniyadda.
- b. In la abuuro Barnaamijyo Taxane ah, oo Cilmi ahaan ubaraya Bulshada waxa loola jeedo Wadaniyad.

- c. In la soosaaro fariimo muujinaya qiimaha iyo faaiidooyinka uu muwaadinka u leeyahay Dalkiisu.
- d. In la dajiyo hannaan ay Dadwaynuhu ugu tartamaan Wadinayadda, oo lagu bixiyo Abaalmarinno.
- e. In aad loo muujiyo Dadka ku Calaamaysan Wadaniyadda sida naftood hurayaashii iyo kuwa la mid ka ah si ay ugu daysadaan Bulshada hadda nool.

## **7.7. DHIIRIGELINTA IS-XILQAAN-KA**

Is-xilqaadnimadu, waa tallaabo muujinaysa in bulshadu si iskood ah ay uga qeybqaataan horumarinta bulshada dhinacyada ka qeybgalka suggidda amniga, kobcinta dhaqaalaha, xoojinta kaabayaasha dhaqaalaha, kobcinta aqoonta dadweynaha.

Is-xilqaanku, wuxuu astaan u yahay wadaninimo iyo dal jeceyl. In la dhiirigeliyo in bulshadu dalkooda u dhistaan si iskaa wax u qabso ah, waxay keenaysaa in bulshadu ku kalsoonaato dawladda, kana qeybgalaan dadaalada dowladda. Si loo dhiirigeliyo ka qeybgalka dadweynaha ee horumarinta dalka, waxaa la qaadayaa talaabooyinka soo socda:

### **a. Abuurista Hal ku dhegyo dhiirigelinaya Is xilqaanka:**

- Dhisso Dalkaaga.
- Isku tashi.
- Dan Wadaag.
- Ka qeybgal sugidda amnigaaga.
- Ka qeybgal horumarka dalkaaga. Iwm.

### **b. Qabashada Kulamo dadweyne:**

- Ka qeybgalinta bulshada soo bandhigga waxqabadka dowladda.
- Dhageysiga tallooyinka qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed.
- Shirar heer Laan, Xaafad, Degmo oo bulshada lagu xusuusinayo ka qeybgalka barnaamijyada Iskaa-Wax-U-Qabso ee dowladda.
- Xusuusinta bulshada taariikhda Iskaa Wax u Qabso ee qeybo badan oo dalka ah lagu dhisay.

**c. Dhiiri-gelinta ka faa'iideysiga awoodda muwaadinka:**  
Waxaa muhiim ah in muwaadiniinta lagu dhiirigeliyo qaadidda tallaabooyin iskaa wax u qabso ah, kana qeybgalo kuwa kale ee ka socda laantiisa, xaafadiisa, degmadiisa iyo dalkiisa. Waxaa tallaabooyinkan laga bilaabi karaa in lagu dhiirigeliyo muwaadinka in uu:

- Ka qeybqaadashada sugidda amniga gurigiisa, deriskiisa iyo degmadiisa.
- Xaqiijinta fayodhowrka goobta uu degan yahay iyo guud ahaan deegaankiisa.
- Ka qeybqaato isku soo dhoweynta, wadajirka iyo isqaadashada bulshada.

## **7.8 FAHAMSIINTA DADKA EE DOWLADNIMADA**

In ka badan 75% dadweynaha Soomaaliyeed, ayaa lagu qiyaasay in ay yihiin dhalinyaro, taasoo macnaheedu yahay in 75% dadweynaha Soomaaliyeed aysan garaneynin dowladnimo waxa ay tahay, faa'iidooyinkeeda iyo sida shaqsiga, qoysaska iyo dadweynahaba ay dowladnimadu muhiimka ugu tahay iyo sida ay u adag tahay in dowlad la'aan la noolaado. Taas, waxaa sabab u ah in dalka Soomaaliya muddo ku dhow soddon sano ka hor ay ka burburtay dowladii dhexe.

Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah in dadweynaha la baro dawladnimada, iyadoo la qaadayo talaabooyinka soo socda:

### **a. Barista dadka Dowladnimada:**

- Macnaha dowladnimada,
- Sida ay u shaqeeyso dowlad,
- Noocyada dowladnimada,
- Mas'uuliyadaha hey'adaha dowladda,
- Qaab-Dhismeedka dowladnimada,
- Faa'iidoonyinka dowladnimada,
- Xuquuda muwaadinka ku leeyahay dowladda,
- Waajibaadka muwaadinka ka saaran dowladnimada.

## **7.9. XOOJINTA MIDNIMADA**

Bulshada Soomaaliyeed, waa bulsho isku diin, af, dhaqan, isir, midab, taariikh iyo masiir ah, balse muddooyinka dambe waxaa soo ifbaxay arrimo khatar ku ah midnimada ummadda Soomaaliyeed. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in laga shaqeeyo sidii loo xoojin lahaa, oo dhidibada loogu aasi lahaa. Tallaabooyinka soo socda ayaa la qaadi karaa:

- a. Qeexista macnaha iyo faa'iidooyina ay leedahay midnimada.
- b. Muujinta, ilaalinta iyo adkeynta astaamaha midnimada qaran.
- c. Muujinta halisaha ku xeeran midnimada iyo ka hortagga halisahaas.
- d. Xoojinta dhaqanka soo jireenka ah ee ummadda Soomaaliyeed.

### **7.10. LA DAGAALANKA DANEYSIGA GAARKA AH**

Danaysiga iyo waliba danta gaarka ah oo laga hormariyo midda guud waxay keentaa burbur qaran, kala qaybsanaan saamayn ku yeelata nolasha Bulshada oo dhan, sidoo kale waxay dhaawacdaa karaamadda iyo sumcadda shacabka Soomaaliyeed.

Dib u yagleelidda hay'adaha dowladda Soomaaliyeed waxaa suura galin kara in mudnaan koobaad lasiiyo fulinta danta guud ee kawada dhaxaysa Ummada Soomaaliyeed ee u ooman Dawlad hanaqaada.

- a. Sameynta barnaamijyo dadka looga digayo danaysiga gaarka ah.
- b. Heeso guugaabo ah iyo ruwaayado lagu muujiyo xumaanta daneysiga gaarka ah.
- c. Baridda bulshada danta guud waxa ay tahay, iyo qiimaha ay leedahay mudnaata koowaad in la siiyo taaba-galinta danta guud.
- d. Bulshada in laga wacyi galiyo khatarta ay leedahay danaysiga gaar ka ah iyo dibu dhaca uu u keenahayo Dawladnimada.
- e. Baahinta Baraamijyo diiradda lagu saarahayo in wadaniyadu tahay dhawrista danta guud ee Qaranka.
- f. Baaritaan lagu sameeyo sababaha keenaya daneysiga in ay dhaqan u noqota dadka qaarkood.
- g. Dhiiri galinta dadka mudnaanta koowaad siiya danta guud iyo waliba abaalamrintooda.
- h. Baahinta siyaasadaha guud ee Dawladda ee laxiriira ilaalinta danaha guud iyo hantida Qaran-ka.

## 7.11. DHIIRIGELINTA WAX SOO SAARKA DALKA

Soomaaliya, waxay lahayd wax soo saar ay u dhoofiso dibedda dalka iyo mid loo isticmaalo gudaha. Dowladdii dhexe, ayaa dadaal weyn u gashay sidii bulshada ay dalkeeda wax uga soo saaran lahayd. Soomaaliya, waxay soo saari jirtay si loo dhoofiyo, waxaana ka mid ahaa: Dalaga Beeraha sida: Mooska, Xoolaha Nool iyo Hargaha iwm.

Hadaba, waxaa haboon in la abuurro dadaalo lagu dhiirigelinayo in bulshada ay la yimaadaan wax soo saar cusub, lana helo suuq ay beeraleyda, xoolaleyda iyo guud ahaan ganacsatada wax soo saarta u iibgeeyaan suuqyo dibedda ah.

- a. In la bilaabo wacyigelin ku aadan qiimaha wax soo saarku u leeyahay dhaqaalaha dalka.
- b. In xukuumadda dadaal u gasho helitaanka suuqyada loo dhoofinayo wax soo saarka bulshada Soomaaliyeed.
- c. In horumar laga sameeyo nidaamka wax beeridda iyo xoolo dhaqashada si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee dhoofka.

## 7.12. CAAFIMAADKA

Caafimaadku waa mid ka mid ah meelaha ay u baahan tahay bulshada Soomaaliyeed in ay ka hesho wacyigalin ballaaran. Hadaba, iyadoo laga duulayo siyaasadda dowladda ee gaarsiinta bulshada adeegyo caafimaad, waxaan halkan ku soo gudbineyna qaabka wacyigalinta:

- a. In bulshada la baro siyaasadaha caafimaad ee dawlada, iyadoo lala tashanayo wasaaradda caafimaadka.
- b. In bulshada lagu wacyi galiyo dhibaataada ka dhalan karta caafimaad darrada
- c. In bulshada loo sameeyo kulamo lagu barayo baahiyaha degdega ah ee looga hortagayo caafimaad darada.

### 7.13. WAXBARASHADA

Aqoontu waa sirta ka danbaysa horumarka ay gaarto Ummad, markasta oo Bulshadu qiimo gaar ah siiso waxbarashada, waxaa kobca garaadkooda, dhaqaalahooda, nabadda iyo is dhaxgalka, wada noolaashaha, iyo daris wanaagga.

Waxaa jira xiriir ka dhaxeeya aqoonta, dhaqanka iyo maanka bulshada, markasta oo ay aqoontu sare u kacdo waxaa kobcaya wacyiga siyaasadda, dhaqanka, fikirka iyo wadaniyadda bulshada, sababtuna waxay tahay Aqoontu waa iftiin aan damaynin, laguna dhiso dadka iyo dalka. Hadaba si aan u helno dhalinyaro aqoon iyo tayo waxbarashaba leh. waxaan u baahannahay inaan qaadno talaabooyinka soo socda:

- a. Diiradda in lasaaro ahmiyadda ay leedahay midaynta manaahita waxbarasho ee dalka ka jira.
- b. Kor u qaadista tayada waxbarashada dalka
- c. Faaf reebitaadda waxbarashada dalka
- d. Wadaniyadda iyo taariikhda dalka in laga sameeyo Baraamijyo
- e. Wacyi galinta qoyska soomaaliyeed in ay caruurtooda u diraan iskuulada
- f. Bixin waxbarasho lacag laa, aan ah, gaar ahaan carauurta saboolka ah
- g. Dibu eegista aqoonta laga qaato Masaajidda, lagana sameeyo baraamijyo ifinahaya sooyaalkeeda.
- h. Dhiiri galinta furitaanka xanaanooyinka Caruurta, iyo waliba qiimaha ay u leedahay kobcinta garaadka u badadka.
- i. Dhiiri galin furidda xarumo aqooneed oo bulshada lagu wacyi galiyo, lagana sii daayo warbaahinta.
- j. Dhisidda idaacado waxbarashada dhiiri galiya ( iskuulada, Jaamacadaha)
- k. Qabasho tartan aqooneed, lagu bixinayo abaal marinno.
- l. Inkastoo burburkii dhacay sagaashameeyadii uu baabi'iyay nidaamkii waxbarasho ee dalka, waxaa muuqata hadda in ay jirto soo kabasho mudan in la dardargaliyo.

## 7.14. DHIIRIGELINTA DIB U HESHIISIINTA IYO IS QAADASHADA

Dadka Soomaaliyeed, waxaa dhexmartay colaad wajiyo badan lahayd: Qabiil, Siyaasad, Deegaan, Dhul iyo Daaqsi. Boogihii ay colaadahaas reebeen waxay u baahan yihiin in si rasmi ah loo dhayo.

Isla Xaaladaahaas Colaadeed, waxay abuureen kala shaki iyo isdiidmo Dadka Soomaaliyeed dhexmartay taas oo keentay in Bulshadeenu ay noqoto mid kala taagan, oo meelo badan aan is ogolayn.

Haddaba, mid ka mid ah tiirarka xalka waara looga gaari karo caqabadahaan ahna tan ugu muhiimsan, waa in laga wacyigaliyo Dadwaynaha Dhaqamada Gurracan ee ay reebeen Colaadaha iyo kala qeybsanaanta, waxaana soo jeedinaynaa Qodobadaan.

- a. In la hirgaliyo Barnaamijyo isugu jira Doodo, Fariimo, Riwaayado, Wacdi Diini ah iwm. Kuwaas, oo dhamaantood ku dhiirigaliya Bulshada in ay dhayaan Nabarrada dhexdooda ah.
- b. In la abuuro isla nuucyo wacyigalin, oo la mid ah kuwa kor ku xusan, oo ku tartarsiiya Bulshada in ay lama huraan tahay in aan is aqbalno, isna qaadano innagoo isu dulqaadanayna si aan uga baxno isdiidista muddada soo jirtay.
- c. In la baro Bulshada sida Dunidu uga gudubtay Colaadihii soo dhexmaray, una midoobeen taas oo ah habka kaliya ee lagu gaari karo barwaaqo.
- d. In la abuuro Barnaamijyo ku dhiirigalinaya Bulshada in aan isa saamaxno, isla markaana la isku garaabo, iyadoo loo sharaxayo faaiidooyinka Aduun iyo kuwa Aakhiro ee ka dhasha tanaasulka wanaagsan.
- e. Ugu danbayn in Bulshada loo iftiimiyo Khataraha ka dhalan kara kala qaybsanaanta iyo isqaadasho la'aanta iyo sida ay halis ugu yihiin Qarannimada.

## 7.15. CANSHUURAH

Canshuuruu waa qaaraan ay dadweynuhu uga qeyb qaataan dhismaha iyo jiritaanka dowladdooda, waana mid waajib ku ah muwaadin kasta ee canshuurtu ku waajibto. Canshuurtu waxay ku soo noqotaa bulshada oo loogu fidiyo adeegyada ay u baahan yihiin sida Jidadka, Iskuullada, Caafimaadka, Waxbarashada iyo kaabayaasha kale ee muhiimka u ah horumarka dowladnimada.

Sanado badan, oo aan canshuuro la qaadin darteed, waxaa muuqata in bulshadeennu illaaween bixinta canshuuraha iyo micnaha ay ku fadhiso intaba. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay arrimaha soo socda:

- a. In la qaado ololeyaal bulshada loogu sheegayo in ay bulshada bixiyaan.
- b. In bulshada la baro macnaha iyo faa'iidooyinka canshuurta.
- c. Diyaarinta doodo iyo barnaamijyo ku saabsan sida ay waajib u tahay bixinta canshuurta ayna ceeb u tahay canshuur la baxsada.
- d. Soo bandhigista dhibaataada ay na dhaxalsiisay canshuur bixin la'aantu.
- e. Muujinta in canshuurtu saldhig u tahay horumarka ay dalalka nala midka ahi gaareen markii ay canshuurta bixiyeen.
- f. Muujinta in aynaan qaran ku sii ahaan karin canshuuro ay bixiyeen dadyow nala mid ah oo dalal kale na siiyaan.
- g. In canshuurtu tahay habka kaliya ee aan ku gaari karno isku filnaasho dhaqaale.
- h. In bulshada la galiyo kalsooni ah in canshuurihii ay bixiyeen loo maamulayo si daah furnaan iyo ammaano ku jirto.
- i. Gudbinta wacyi gelinta canshuuraha waxaa loo adeegsanayaa dhammaan hababka war is gaarsiineed ee jira.

## **7.16. BARISTA BULSHADA DASTUURKA IYO XEERARKA KALE EE DALKA**

Dastuurku KMG ahi waa xeerka ugu sarreeya ee uu dalku leeyahay, waxaana muhiim ah bulshada Soomaaliyeed si buuxda uga war hayaan waxa ku qoran dastuurka lagu dhaqayo. Wuxuu kaluu dalku leeyahay xeerar kale oo ay lagama maarmaantahay in bulshada labaro. Sidaas darteed Wasaaradda Warfaafintu iyadoo kaashaneysa wasaaradaha iyo hay'adaha dowliga ah ee ku shaqada leh waxa ay diyaarisay barnaamijyo dadka lagu barayo Dastuurka KMG ah ee jamhuuriyadda Federaalka, kuwaas oo si toos ah uga baxa Qeybaha kala duwan ee Warbaahinta Qaranku ay ka kooban tahay.

Dhinaca kale ku dhaqanka sharciga, waxaa sal u ah in muwaadiniintu u siman yihiin, oo sharcigu qabanayo cid kasta. Sharciga oo loo hoggaansamaa waa ilbaxnimo horseedda horumarka aadanuhu hiigsanayo.

Haddaba, iyadoo laga duulaayo baahida loo qabo in dalku uu nabad iyo horumar gaaro, ayaa waxaa lagama maar maan ah in qof kasta oo muwaadin ah la baro sharciga iyo siyaasadda dalku ku dhisan yahay.

- a. Si loo dhiirigeliyo u hogaansanaanta sharciga iyo xeerarka dalka u degsan, waxaa loo baahan yahay in la sameeyo talaabooyinkan hoos ku xusan.
- b. Sameynta wacyigalin ballaaran, oo ku wajahan muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyadoo la adeegsanayo aaladaha warbaahinta qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahay.
- c. Sameynta dood cilmiyeedyo ku saabsan barashada sharciga iyo xeerarka dalka
- d. In Manhajka Dalka lagu daro barashadda Shuruucda dalka.

Sidoo kale waxaa la diyaariyay barnaamijka Xeerarka Dalka, oo dadka lagu barayo cutubyada iyo qodobbada uu ka kooban yahay dastuurku, iyadoo la adeegsanayo khubaro ku xeel dheer dhinaca dastuurka. Waxaa kaloo barnaamijku dadka barayaa xeerarka kale ee dalku leeyahay.

### **7.17. BARISTA BULSHADA FEDERAALAYNTA**

Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa fikir khaldan ka haysta nidaamka Federaalka oo ay u arkaan mid dadka kala qeybinaya, waxaana lagama maarnaan ah in bulshadu helaan macluumaad dheeri ah oo la xiriiira Federalism-ka, Noocyadiisa iyo Faa'iidooyinkiisa.

Marka ay bulshadu hesho faham dhameystiran oo la xiriiira federalism-ka ayay gaari karaan go'aan sax ah oo aan laab la kac ahayn, marka la gaaro cod bixin dadweyne oo lagu oggaaanayo ama lagu diidayo qaadashada nidaamka federaalka. Sidaas darteed ayay Wasaaradda Warfaafintu qaadaneysaa door wacyi galineed oo la xiriiira arrintanta fahamsiinta bulshada ee federaalka, taas oo loo marayo.

- a. Barnaamijyo Warbaahineed, oo lagu casuumayo dad khibrad u leh arimaha la xiriiira nidaamka Federaalka
- b. Farriimo kookooban (PSA)
- c. Doodo dadweyne

### **7.18. DOORASHOYINKA**

Tan iyo 1967-kii dalkeenna kama dhicin doorasho dadweyne oo ay dadku soo doorteen wakiiladii matali lahaa. Hadda oo la qorsheynayo in dalka laga hir geliyo doorasho qof iyo cod ah 2020, waxaa muhiim ah in bulshadu helaan wacyi gelin aad u weyn oo la xiriirta doorashada, xeerarkeeda iyo hababka loo marayo.

- a. Wasaaraddu iyadoo kaashaneysa hay'aha ku shaqada leh, ayay qaadaneysaa doorkeeda wacyi gelineed ee la xiriiira doorashada.
- b. Waxaa bulshada Soomaaliyeed la barayaa macnaha doorasho iyo muhimmadda ay leedahay.
- c. Diyaarinta barnaamij u gaar ah arimaha doorashooyinka, kaas oo xubnihiisa inta badan lagu falaqeyn doono wax kasta oo ku saabsan doorashooyinka.

## 7.19. DHIIRIGELINTA AFKA, FANKA IYO DHAQANKA

Afkeenna hooyo waa astaan midnimo iyo summad aan uga duwan nahay ummadaha kale. Waa Af hodan ah oo looga hadlo 4 dal oo gobolka ku yaal. Dhowrista iyo horumarinta Afku waa howl looga fadhiyo dowladda Soomaaliyeed, waxaana arrintaas ugu xil saaran wasaarado iyo hay'ado ay ka mid tahay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska waxa ay hadaba wasaaradu qorsheysay fulinta olole lagu xoojinayo Afka hooyo waxa ayna fulineysaa arrimaha soo socda:

- a. **Barnaamijka Afka Hooyo**, Iyadoo laga duulayo lagama maarmaannimada in bulshadu ku dhaataan aadna u bartaan afkooda hooyo, gaar ahaan da' yarta iyo qurbe joogta, ayay wasaaradda iyo Akaademiya Cilmiga Fanka iyo Suugaantu iska kaashanayaan barnaamij ka baxaya Telefishanka iyo Raadiyaha, laguna faafinayo Online-ka, kaas oo bulshada gaar ahaan dhalinyarada lagu barayo Afkooda hooyo iyo xeerarkiisa qoraal iyo akhrisba. Barnaamijkan oo socon doona muddo 2 sano ah waxaa iska kaashanaya Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska iyo Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta.
- b. **Xoojinta Fanka** Soomaalidu waxa ay leedahay fan iyo suugaan fac weyn oo ka mid ah hababka ugu sahlan uguna saameynta badan ee bulshada wax lagu gaarsiyo. Wasaaraddu waxa ay ku howlan tahay in la xoojiyo fanka, si taas loo helana waxaa wasaaraddu ku howlan tahay abuurista jawi suurto galinaya in si xowli ah looga faa'iideysto qeybaha kala ee fanka. Waxyaabaha udub dhexaadka u ah howshaasna waxaa ka mid ah.
- c. **Golaha murtida iyo Maddadaaladu** waxa uu ahaa barta ay ku kulmaan hal abuurrada Soomaaliyeed iyo kooxaha fanku, si ay ugu soo bandhigaan farriimaha lagu baddelayo wacyiga bulshada Soomaaliyeed. Sidaas darteed ayay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska mudnaan gaar ah u leedahay dib u howl gelinta Tiyaatarka Qaranka, si uu u qaato doorkii uu lahaa.
- d. **Isku dubbaridka Kooxaha Fanka** Dalku waxa uu leeyahay kooxo kala duwan oo faneed, kuwaas oo u baahan in la isu duwo, lana mideeyo dadaalladooda iyo farriimaha ay bulshada u gudbinayaan, taas oo haddi

lagu guuleysto keeni karta in ololeyaasha wacyi gelineed ee qorsheysani xilli kooban ku miro dhalaan.

**e. Qabashada Bandhig Faneedyo** Wasaaraddu ay fulineysaa bandhigyo iyo barnaamijyo lagu horumarinayo Fanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed, taas oo qeyb weyn ka qaadaneysa horumarinta Afka hooyo, fursadna u siineysa suugaanleydu in ay bulshada ku xirmaan ayna hab faneed ku gaarsiiaan farriimaha wacyi gelineed ee la xiriira dhaqanka, fanka iyo suugaanta.

**f. Hibada iyo Hal Abuurka** waxa ay hormuud ka noqoneysaa qabashada tartammo lagu soo saarayo hibooyinka iyo hal abuurnimada faneed ee ku duugan da' yarta Soomaaliyeed, kuwaas oo ku tartamaya qeybaha kala duwan ee fanka, sida gabayada, Heesaha, masraxiyadda, mu'allifnimada, Laxammada, Qoraalka iwm. Tani waxa ay suurto gelineysaa in ay soo baxaan dad badan oo wax ku soo kordhiya fanka iyo dhaqanka dalkeennu leeyahay.

## **7.20. DHIIRIGELINTA CIIDAMADA IYO MUUJINTA DOORKOODA**

Dalkasta waxa uu ku tiirsanyahay Awoodda Ciidan ee uu leeyahay iyo sida Bulshadiisu kalsooni ugu qabto Ciidamadiisa isla markaan Ciidamadu ay ugu kalsoon yihiin Shacabkooda, hadaba Dalkeenna oo burburkii dheeraa uu saamayn xun ku reebay sumcaddii Ciidamada Qaranka iyo Sida ay bulshadu u aragto ciidanka iyo kaalintiisa.

Waa muhiim in dib looga fikiro sidii Ciidamada loogu soo celin lahaa Doorkii ay ku lahaayeen quluubta Shababka si taas la mid ahna waa in Askariga laga dhigaa mid qalbigiisu uu la jiro Muwaadinka uu u adeegayo.

Hadaba Ciidamada Qaranka ee xilligaan jira waa kuwo haya howl aad u culus oo Maalin kasta ay kala kulmaan, Dhimasho, Dhaawac iyo aflagaado, una dheertahay in ay qabaan baahiyo dhinacyo badan.

Dhinaca kalana Shacabka oo ah kan loo adeegayo qaybo badan oo ka mid ahi uma hayaan garawshiyaha ay mudan yihiin Ciidamadu, umana arkaan in ay yihiin badbaadiyahooda, si taas la mid ahna qaybo badan, oo ka mid ah Ciidamadu ma dareensana Masuuliyadda ka saran Muwadinka taas oo keenta tacadiyo aan loo baahnayn in ay ugaayaan Bulshadii ay u

adeegayeen. Si loo abuuro isu soo dhawaasho Ciidamada iyo Bulshada isla markaana loo muujiyo kaalinta Ciidamada Naftood hurayaasha ahi leeyihiin waxaa loo baahan yahay in lahelu Wacyigalin labo dhinacle ah, oo Ciidamada iyo Bulshadaba ku hagta Dariiqa toosan.

- a. Waxaa la abuurayaa Barnaamijyo ka faalooda micnaha Askariga Maanta iyo sida uu naftiisa ugu hurayo Shacabkiisa, oo uu uga hor taagan yahay khataraha.
- b. Waxaa la muujinayaa noocyada halista uu askarigu uga hor gudban yahay muwaadinka Soomaaliyeed.
- c. Waxaa la qeexayaa waxa uu mudan yahay Askarigaas, iyadoo laga eegayo Diinta iyo Damiirka labadaba.
- d. Askariga, waxaa la barayaa in uu yahay u adeegaha muwaadinka.
- e. Askariga waxaa la xusuusinayaa si joogta ah in uu kala garto cadawga iyo Saaxiibka, oo uusan isla si ula dhaqmin.
- f. Muwaadinka, waxaa la barayaa in haddii aanu jirin Askari uuna jiri karin Qaran, Amni, Nolol iyo waxkasta oo kale.
- g. Muwaadinka waxaa la xusuusinayaa u hogaansamidda iyo Xushmadda Askariga, halka Askarigana loo sheegayo ladhaqanka wacan ee Bulshada.
- h. Waxaa la abuurayaa hanaan Taariikheed oo looga faalooda Geesiga ushahiida Qarannimada

## **8.0. FARIIMAHA MUHIIMKA AH**

Istaraatiijiyadani waxay wajahaysaa labo shacab oo kala duwan, waxayna xambaarsan tahay fariimo kala duwan oo is garab socda. Qeybta hore ee Wacyigelintu waxay ku wajahan tahay madaxda, masuuliyiinta iyo

dhamaan hawl-wadeenada dowladda. Waxayna si midaysan uga duulaysaa sidii dowlad wanaaga looga dhabayn lahaa, looguna qancin lahaa loona aaminsii lahaa ummada Soomaaliyeed nidaamka dawliga. Dhanka kale wacyigelintu waxay xoogga saareysaa qaabkii shacbi-weynaha loogu abuuri lahaa wadaniyad buuxda, isla markaana loogu jaheyn lahaa hiigsiga qaran ee saldhigiisu yahay horumar iyo barwaaqo.

## 8.1.FARIIMAHA KU WAJAHAN DOWLADDA

- a. **Hiigsiga Qaran:** Muxuu yahay itijaaha siyaasiga ee dalku? Waxaa laga maarmaan ah in la qeexo masiirka siyaasiga ee dalka ayna ku baraarugsan yihiin dhamaan xubnaha dowladdu si ay u gutaan masuuliyada ka saaran ka dhabeynta hadafka siyaasiga ee qaran. Xagee joognaa maanta halkeese hiigsanaynaa inaan gaarno weeye arrinta ugu muhiimsan wacyiga qaran ee loo baahan yahay maanta
- b. **Hufnaanta Shaqada:** Shaqada iyo Hawsha uu masuul kasta u hayo qaranka waa inay ka muuqato hufnaan iyo daacadnimado adeeg. Si taasi u hirgasho waa in madaxda iyo masuuliyiinta dawlada lagu wacyigeliyo shaqo hufan oo aan eex iyo musuq lahayn inay xafiisyada dawladda ka muuqato in adeeg ahaan loo siman yahay.
- c. **Xaq-dhowrka Shacbiga:** waa in shacbigu dareemaan in la xaqdhawro xogta, macluumaadka iyo tilmaanta ay u baahan yihiina ka helaan masuuliyiinta iyo hawl-wadeenada dawladda. Waana in arrintaan lagala hadlo masuuliyiinta iyo hawl-wadeenada dawladda gaar ahaan ciidamada amniga
- d. **Cadaalad iyo Garsoor Hufan:** Cadaaladu waa xubinta Ugu muhiimsan suurto galinta dawladnimada waana arrin aad ugu weyn shacbiga, wali maahan sidii la rabay. Sidaas daraadeed waa in garsoorayaasha iyo hawl-wadeenada cadaalada lagala hadlo ahmiyada ay leedahay xiligaan inay cadaalad falaan si kalsoonida shacbiga loo kasbado. Waana in la hubiyo madaxbanaanida cadaaladda oo farogelin laga ilaaliyo. Hadafkuna waa in sharcigu sidii loo dajiyay u shaqeeyo, sharciguna shaqadiisa qabsado.

- e. **U hogaansan Sharciga:** Dartuurka iyo sharciga dalka in loo hogaansamo waxay ka bilaabataa dawladda sidaas buu shacbiga ugu gudbi karaa ama ay ugu hogaansami karaan. Dastuurka iyo shuruucda dalka u yaal waa inay madaxda iyo hawlwadeenada dawladdu yaqaanaan una hogaansamaan.
- f. **Tilmaanta Qorshaha Horumarinta Dalka:** Masuulkasta iyo hawlwadeen kasta oo dawladdu waa inuu ku baraarugsan yahay doorka uu ku leeyahay hirgelinta qorshaha horumarinta dalka.
- g. **Ka Waantow Musuqmaasuq iyo Eex:** Musuqmaasuqa iyo eexdu waxay sumcadda xafiiska, dawladda iyo hogaanka siyaasiga. Waxayna caqabad rasmi ah ku yihiin hiigriga horumar iyo qaranimada Soomaaliya. Shaqada dawladdu maahan mid tabac iyo taajirnimu lagu gaaro ee waa mansab adeege bulsho. Sidaas daraadeed waa in aragtidaas caamka noqotay ee khaldan wax laga badalo wacyi ahaan. Dhanka kale eexdu waa inay noqoto wax laysku ceebiyo si ay u dhacdo sinaan fursad shaqo dowladeed.
- h. **Abuuridda Fursado Shaqo iyo Koboc Dhaqaale:** Masuuliyiinta dawladdu waa inay ku baraarugsan yihiin in looga fadhiyo ama had iyo jeer laga sugayo inay ummada gaar ahaan aqoonta iyo xooga dhalinyarada u abuuraan furshad nololeed oo ay ku hiran karaan. Qodobkani waa arrinta ugu weyn ee guusha iyo guul darada dawladda lagu qiimaynayo.
- i. **Ka Dhabee Balan-qaadka:** Ummada kuma filna rajo abuurid oo kaliya waxay u baahan yihiin inay arkaan balan-qaad fula iyo natiijo wax-qabad oo dhab ah.
- j. **Wada-shaqeyn Buuxda:** Hawsha iyo adeega dawladdu maahan tartan ee waa mid ku salaysan wada-shaqenta qeybaha kala duwan ee dawladda. Taasna waa in lagu wacyigeliyo dhamaan masuuliyiinta iyo hawlwadeenada dawladda.
- k. **Fariin Midaysan:** Mideynta fariinta dawladda ee midaysani waxay bixinaysaa sawir fiican waxayna xoojinaysaa kalsoonida shacbigu ku qabaan dawladda. Sidaas daraadeed waa in la mideeyo friimaha ka baxaya xafiisyada dawladda. Waana in laga dheeraado in

xubnaha dawladdu warbaahinta iyo baraha bulshada isku buriyaan ama isku khilaafaan oo isku mucaaradaan. Wixii khilaaf ah ee jira waa in qaab hoose loo xaliyo inta aanu warbahinta galin.

- l. **Hagaaji Xiriirka Bulshada:** Dhamaan xafiisyada dawladdu waxaa masuuli6ad ka saaran tahay inay hagaajiyaan xiriirka rasmiga ee ay la leeyihiin bulshada. Dhamaan mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeenada dawladdu waa inay ku baraarugsan yihiin baahida loo qabo xiriir wanaaga bulshada ee aas-aasiga u ah dawladnimada.
- m. **Safarada Shaqo ee Xubnaha Dawladda:** Maadaama ay dhaliilo badan ka yimaadaan safarada shaqada ee dowladda sidee loo wajahayaa ka fal-celinta dhaliilahaas? Waa in dowladu muujiso tanaasul ku wajahan safarada aan mudnaanta lahayn ee waqtiga iyo dhaqaalaha aadka loogu baahan yahay qaadanaya. Waana in lays waydiiyo wax ka soo baxaya safar kasta oo masuul dalka dibadiisa ugu baxayo. Waana in la shaaciyaa wixii ka soo baxay safarada laga maarmi waayo ee ahmiyada leh.

## 8.2. FARIIMAHA KU WAJAHAN SHACABKA

- a. **Hal Dal, Hal Calan iyo Ummad Midaysan:** Muujinta iyo xoojinta midnimada Soomaaliyeed waxay ku xiran tahay hadba inta shacabkeedu ku qancaan qiimaha midnimadu u leedahay. Dawladdu waxay qaadaysaa olole ku wajahan xoojinta iyo xaqiijinta midnimada iyo wada jirka ummada iyo dalka Soomaaliyeed. Waana in la abuuro wacyi keeni kara in qofkasta oo Soomaali ah ku qanco kuna shaqeeyo doorka muhiimka ah ee midnimadu leedahay.
- b. **Qaranimo iyo Dawladnimaa na Deeqa:** Waxaa shacbiga lagu baraarujinayaa manfaca iyo qiimaha weyn ee dawladnimada u wada leedahay. Waxaana lagu dhiirigelinayaa inay garab istaagaan qaranimada iyo madaxbanaanida ummadeed ee Soomaaliya.
- c. **Walaalnimadu waa u Door Guul:** Hadafka ololahani waa in ummada la walaaleeyo, laysna jeclaysiiyo isla markaana laga dhex abuuro kalsooni dhab ah.

- d. **Dantaadu Waxay ku Jirtaa Mida Guud:** Ololahani wuxuu abuurayaa in wacyiga qof kasta oo Soomaali ah la gaarsiiyo inuu had iyo jeer danta guud ka hormariyo tiisa goonida. Waxaa xooga la saarayaa qaabkii looga gudbi lahaa wacyi shaqsiyada ama anaaniyada iyo hanti-goosiga liita ku salaysan ee mudadadii dawlad la'aanta laga dhaqan yeeshay.
- e. **Nabad iyo Nolol:** Ololahan wuxuu xooga saarayaa muujinta guulaha dhinaca amniga ee dawlada federaalka iyo dawlada xubnaha ka ah ay ku talaabsadaan si bulshadu ugu war hayso dadaalka lagu xaqiijinayo in nabad buuxda la helo. **nabad la helaa nolol la hel.** nololsha waxa tiir u ah nabada. waxay umadu ka fikiri kartaa horumar iyo waxqabsi marka ay hesho nabad buuxda
- f. **Siyaasad Horu socodka:** Waa in la muujiyo horumar siyaasadeed oo rajo iyo hami galiya ummada. Taasina waxay ku suuroobaysaa in madaxda dalku ay aragti dheer iyo daacadnimo ku hagaan siyaasada dalka, loona turjumo sida ugu qurxoon oo dadku u fahmi karaan. Waxaa kaloo muhiim in la suurto galiyo in sidii shacbiku door ku haboon uga qaadan lahaayeen katalo bixinta siyaasada dalka, iyadoo fursado la siinayo, guud ahaan shacabka gaar ahaana, dhalinyarada, dumarka iyo dadka la hayb sooco.
- g. **Meeqaamkeena Caalamka:** Soomaaliya waxay caalamka ka joogtay meeqaam sare intii ay jirtay dowladii dhexe ee milatariga iyo dawladihii rayidka ee ka horeeyey. hasayeeshee wixii ka danbeeyey burburkii dowladnimo waxa aad hoos ugu dhacay meeqaamkii Soomaaliya ee ay caalamka ku lahayd sababa la xiriira dowlad la'aantii, dagaaladii sokeeye, budhcaddeedii qeybo kamid ah dalka ka dilaacday iyo falalka argagixiso ee kooxaha xagjirku ay ka geysteen gudaha dalka iyo dibadiisaba. hadaba waxa lagama maarmaan ah si loosoceliyo meeqaamkii Soomaaliya ee caalamka waxa haboon in xooga lasaaro muujinta waxqabadka dawlada, horumarka dhinacyada dhaqaalaha iyo bulshada oo dowladu ay kordhiso dadaalkeeda ku aadan ladagaalanka musuqmaasuqa, kobcinta dhaqaalaha, xoojinta dimuqraadiyada iyo daahfurnaanta, ladagaalanka argagixisada. waa in warbaahinta dalkana lagu dhiiri galiyaa in ay xooga saaraan xooga saaraan

mawduucyada wanaagsan iyo horumarka dalku ku talaabsanayo siloo suuliyo wararka xunxun ee warbaahintu dalka ka faafiso.

- h. **Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane:** Ololahani wuxuu diiradda saarayaa sidii loo suulin lahaa ku dhaqanka qabyaalada. Wuxuu ummada ku jeheynayaa midnimo iyo wax wada qabsi taabo-gal ah.
- i. **Diinteena Islaamku waa Nasteexo:** Ololahani wuxuu diirada saarayaa in culimada waawayn ee dalku ay qabtaan isusoo baxyo ay ka jeediyaan muxaadarooyin lagu muujinayo sida diinta islaamku ay utahay nasteexo isla markaana lagu cambaaraynayo fikradaha qaldan ee kooxaha xagjirka ah ku qaldayaan dadka aan waxbadan a fahansanayn diinta Islaamka.
- j. **Cadaalad baa ina Wada Deeqda:** Waa in cadaalad darada la diido cadaaladana loo hiiliyo. Waxaana shacbiga la dareensiinayaa dhibaataada cadaalad daradu leedahay iyo inaysan marna raali ka noqon in cadaalad daro lagu sameeyo
- k. **Dastuurka Qaran:** Ololahani wuxuu dhiirigelinayaa in shacbkii ka qeyb qaato hannaanka dib u eegista dastuurka dalka. Wuxuuna maareynayaa wacyigelinta la xiriirta aftida guud ee lagu meelmarinayo dastuurka federaalka.
- l. **Balanteenu waa Wax-soo-Saar:** Horumar dhaqaale lama gaari karo haduusan jirin wax-soo-Saarkii guduho. Sidaas daraadeed waxaa shacbiga lagu dhiirigelinayaa wax-soo-saarka beeraha, kaluumaysiga iyo warshadaha yaryar. Waana in la dhiirigeliyo lana hago qaabkay dadkeenu ugu dhiiran lahaayeen wax-soo-saarka.
- m. **Shaqaa Sharaf leh:** Dadkeena gaar ahaan dhalinyarada waxaa lagu wacyi-gelinayaa qiimaha ayleedahay inuu qofku shaqaysto si uu isku filnaash ugaadho. Waxaana lagama maarmaan ah in dowladu si daahfurnaah ay bulshada ugu soo bandhigto fursadaha shaqo iyo ganacsi ee jira.

- n. **U hogaansanka Shaciga:** Waxaa dadka la barayaa sharciga dalka waxaana lagu wacyigelinayaa inay ilaaliyaan una hogaansamaan sharciga.
- o. **Wax Barta aan Barwaaqo Gaarnee:** Ololahani wuxuu dhiirigelinayaa muhiimada waxbarashada heerarkeeda kala duwan iyo qiimaha nololeed ee ay ugu fadhido qofka, qoyska iyo dalkaba. Wuxuu kaluu meel marinayaa qorshayaasha waxbarashada iyo tacliinta sare ee dawladda.
- p. **Bulsho Caafimaad Qabta** Ka hortaga cuduradu wuxuu ka muhiimsan yahay daaweynta. Sidaas daraadeed wuxuu ololahani dhisayaa wacyiga dadka ee ku aadan ka hortaga cudurada dhamaantood gaar ahaan kuwa faafa. Sidoo kale wuxuu ummada ku wacyigelinayaa taxadarka caafimaad ee guud iyo gaar ahaan inta taagta daran ee ay ugu horeeyaan hooyada, dhalaanka iyo waayeelka.

## **9.0. AALADAHA XIRIIRKA (Communication Tools)**

Dawladdu waxay adeegsanaysaa dhamaan aaladaha lagu wada xiriir ee suur gal ah iyo kuwa u baahan maal-gelinta ee lagu gaaro karo shacbiga meel-kasta oo ay joogaan, si qoladaas fariintu u gaarto waa in la qiimeeyaa aalada xiriir ee ugu sahlan ee lagu gaari karo ama ay sida joogtada ah u isticmaalaan. Noocyada lagu gudbinayo fariimaha wacyigelinta waxay kala yihiin:

### **9.1. Qeybaha Warbaahinta:**

- a. Telefishanada,
- b. Idaacadaha,
- c. Website-yada,
- d. Wargeysyada,
- e. Warside
- f. Gawaadhi lasaaray cod baahiyeyaal oo bulshada lagu wacyi galiyo

### **9.2. Baraha Bulshada:**

- a. Facebook,

- b. Twitter,
- c. Youtube,
- d. Whatsapp,
- e. Fariimaha telefoonka (SMS)

### **9.3 Kulamo dadweyne: 21**

- a. Doodo,
- b. Isu soo bax,
- c. Shirar bulsho,
- d. Madal dadweyne

### **9.4 Tabeelayaasha/Boostarada Darbiga/Bandhiga qoraalka iyo Farshaxanka**

A.Warqadaha Qoraalka kooban (Handouts) Codbaahiyayaal

## **10.0. DABAGAL & QIIMEYN (Monitoring & Evaluation)**

Si joogto ah ayaa waxaa loo qiimeynayaa waxtarka iyo hoos u dhaca soo wajaha hirgelinta istaraatiijiyada ayadoo si gaar ah loo qiimeynayo guulaha iyo waxtarka ololeyaasha gaarka ah.

Wasaaradda warfaafintu waxay sameynaysaa qiimeynta heerka hirgalinta wacyigelintu marayso lixdii biloodba mar iyadoo la kaashaneysa qiimeeyayaal madax banaan hadii duruufka dhaqaale saamaxdo.

**10.1. SALDHIGGA QIIMEYNTA:** Dhowr arrimood ayaa saldhig u noqonaya qiimeynta saameynta ololeyaasha wacyigelinta ee la fuliyay.

- a. Qiyaasta saameynta ololaha ayadoo la eegayo hadba inta laga guul gaarey ujeedooyinkii laga lahaa ololaha. Waxaana laga diyaarinayaa warbixin buuxda o lagu cabirayo qirada saameynta ee dhabta ah ee uu olole kasta yeeshay.
- b. Cabirkaas waxaa laga qadanayaa fariimaha ay dadku ka qabaan ololaha ee ka soo noqotay xogtii shacbiga lala wadaagey mudadii ololuhu socday.

- c. Qiimeyn qaas ah (surveys) ayaa lagu sameynayaa saameynta ololayaasha, oo laga soo qaadayo dadka uu ku wajahnaa ololuhu oo wareysiyo gooni ah lala yeelanayo.
- d. Shirar gaar ah ayaa la abaabulayaa si loo ogaado loona qiimeeyo saameynta iyo guulaha laga gaarey ololayaasha. Shirarkaan waa inay ka qeyb qaataan dad aqoon iyo khibrad u leh hawlaha wacyigelinta ee socda u bulshada ay quseyso.
- e. Waxaa la cabirayaa is baddelka guud ee jira ee uu yeeshay ololuhu marka la eego kororka wacyiga bulshada ee la xariira hawsha qaaska ah ee dawladdu fulinayso ee ololuhu qeybta ka ahaa.
- f. Cabirka horumarka guud ee dawladda, kalsoonida shacbiga iyo aminiga iyo doorka ay ku yeesheen ololayaasha wacyigelinta ee arrimahaas la xariira. Qiimeyntani waxay noqoneysaa miday ka qeyb qaataan hawladeenada dawladdu ayagoo soo gudbinaya isbedelka ku yimid hawlaha dawladda ee ay masuulka ka yihiin.

## 10.2. NATIIJADA LAGA FILAYO ISTARAATIJIYADDA

Marka uu dhamaado barnaamijkaan waxaanu filaynaa in la gaaray guulo waawan oo ay ka mid yihiin

- a. In la helo dadweyne wacyigashan, oo dawladdooda taageersan,
- b. Wacyiga dadwaynaha ee ku aadan fahamka fikirka qaldan ee xagjirka oo sare ukacay
- c. In ay dadwaynuhu ku dhiiradaan in ay iska qabtaan argagixisada ku dhex dhuumanaysa ugu danbayna ay taasi u diido Shabaab in ay helaan meel ay ku dhuuntaan;
- d. In ay joogsato canshuuraha ay ganacsataduna siyaa kooxaha xagjirka ah
- e. In ay yaraato ama joogsato ku biirista al-Shabaab ee dhalinyarada.

- f. Kooxaha xagjirka ha oolaga sifiyay dalka oo dhan ama intiisa badan
- g. In la soo celiyay Soomaalinimadii iyo isjeceylkii shacabka Soomaaliyeed
- h. In rajo lagu abuuray bulshada Soomaaliyeed isla markaana bulshadu yeelato hiigsi nololeed
- i. Dadweynaha oo barta nidaamka doorashada.
- j. Dadweynaha oo si is-xilqaan ah uga qeybqaata dib u dhiska dalka.
- k. Wax soo saarka dalka oo kordha.
- l. Tirada dadka waxbarta oo kororta.

### **10.3. LAGAMA MAARMAANKA HIRGALINTA ISTARAATIJIDA**

Si ay Wasaaraddu u hirgaliso Istaraatiijiyadan, waxay u baahan tahay in ay hesho waxyaalahan soo socda:

- Dhaqaale lagu fuliyo barnaamijyadan, oo ku baxaya adeegyada fuddudaynaya barnaamijyada sida,
- *Gaadiiid*
- *Amni*
- *Isgaarsiin*
- *Dhiirigalin,*
- *Abaabul bulsho,*
- *Cabitaan iyo cunno,*
- *Kiro,*
- *Daabacaad,*
- *Sii baahinta barnaamijyadaan ee warbaahinta gaarka ah, iyo wixii la mid ah.*

## **11.0 GUNAANAD**

Sida ku cad istaraatiijiyadan, yoolka wasaaraddu waa in meel la isugu keeno aragtida shacbiga Soomaaliyeed, laguna jiheeyo dariiq midnimo, oo mar kale noo saamaxa dowladnimo taam ah. Sidaas daraadeed, waxay wasaaraddu waydiisanaysaa hey'adaha kala duwan ee qaranka in ay ku garabsiiyaan hirgelinta Istaraatiijiyadda Wacyigalinta Qaranka.

## **DHAMAAD**

**Ujeeddo: Go’aan Gole Ansixinta Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018 - 2020**

***Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay:** Qodobka 99<sup>aad</sup> , (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Qodobka 100<sup>aad</sup> , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta.

**Markuu Arkay:** Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.55.10.18** ee **04/10/2018** kuna saabsan ansixinta “**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020**” oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020.

***Wuxuu Meel-mariyey:***

**Qodobka 1aad**

Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.55.10.18** ee 04/10/2018, kuna saabsan ansixinta “**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020**” oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.


**Qodobka 2aad**

Waxa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta loo igmaday in ay hirgeliso, meel-marisana Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020.

**Qodobka 3aad**

Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

  
Mudane Xasan Cali Kheyre  
Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

ISTIRAATIJIYADA XASILINTA  
DEEGAANADDA NUGUL  
2018-2020

**Wasaaradda Arrimaha Gudaha,  
Federaalka & Dib-U-Heshiisiinta**

# 1. Horudhac

Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa qudbadiisa caleema-saarka ee February 22, 2017, ku sheegay in ay jiraan caqabado amni oo u baahan in wax laga qabto, wuxuuna balan qaaday “sareynta sharciga, xoojinta cadaalada, ciribtirka saboolnimada iyo soo celinta kalsoonida shacabka ee dowladda”. Madaxweynaha wuxuu bogaadiyay waxqabadka beesha caalamka, gaar ahaan Midowga Africa (AMISOM) gacantii ay ka geysteen xasilinta Soomaaliya ayaga oo kaabaya ciidanka xooga dalka. Iyadoo la tixraacayo qorshaha Xukuumadda ee Nabad iyo Nolol, dibu-habeynta Istaraatiijiyada Xasilintu waxay xooga saareysaa sidii loo soo celin lahaa adeega bulshada, gaarsiinta maamul dowladeed iyo laxisaabtan iyadoo la midaynayo dadaalka beesha caalamka, sida Qaramada Midoobay, AMISOM iyo Daneeya’yaasha Barnaamijiyada xasilinta, oo ka hoos shaqeynaya hogaanka iyo awaamirta Dowladda. Istaraatiijiyada Xasilinta waxaa la socon doona qorshe xasilineed oo heer dowlad-goboleed ah, kaas oo si hoose u eegi doona baahiyada iyo caqabadaha soo foodsaara dowlad goboleedyada, sida Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, Galmudug iyo Maamulka Gobolka Benaadir.

Istaraatiijiyada xasilintu waxay la falgalsaa qorshaha kalaguurka ee amniga (transition plan) kaas oo xooga saaraya in hay’adaha amniga ee dowladu hantaan lana wareegaan amaanka dalka.

Waxaa xusid mudan in dadaalada xasilintu ay qeyb weyn ka yihiin Qorshaha kala guurka oo haatan wajigiisii kowaad la hirgalinayo.

Istaraatiijiyadan ma’ahan mid hada la unkayo ee waxa ay qeyb ka tahay tii hore u jirtay, iyadoo xoojineysa mabaa’diida iyo waxa laga baran karo isbadalkii dhacay iyo caqabadihii lasoo maray, si loo helo qorshe iyo hanaan loo dhan yahay oo isku jaan go’an, kaas oo xooga saari doona arrimaha soo socda:

- Kor-uqaadida hogaanka rayidka, lahaanshaha iyo kormeerka howlaha horumarinta siyaasadda oo loo marayo dhismaha maamuladda xubnaha ka ah dowladda Federaalka iyo horumarinta qorshaha heer maamul goboleed iyo dibu-eegis lagu sameeyo hanaanka isku-dubaridka howlaha.

- In wax laga barto waaya-aragnimadii hore ee howlaha xasilinta, tusaale ahaan, in la xoojiyo xiriirka u dhexeeyada howlaha dibu-heshiisiinta bulshada iyo kuwa la xiriira sarayenta sharciga, soo

ceelinta adeega bulshada iyo maamul dhisida, iyada oo niyada lagu hayo doorka amniga ee howlaha xasilinta.

- In la darso lana ogaado goobaha iyo degmooyinka ay howlaha xasilintu ka socdaan ee nugul, si looga caawiyo xasilinta, loona xaqiijiyo bixinta adeeg dheelitiran oo wax ka qabta goobaha dhawaan dowlada gacanteeda ku soo laabtay ee nugul ama aan helin adeeg ku filan.

Sidaas darteed, istaraatiijiyadan waxa ay ka turjumeysaa go'aamadii dowladda iyo beesha caalamka ee ku aadanaa arrimaha "Iskaashiga Cusub Soomaaliya ee Nabadda, Xasilinta iyo Horumarinta" taas oo lagu ansixiyay Shirkii London ee bishii May 2017.

Shirkan waxaa la isla qiray horumarkii ay dowladdu ku tilaabsatay laga soo bilaabo xiligii dajinta barnaamijka Xasilinta iyo dadaalka ay ka geysatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee lagu hirgalinayay Heshiiskii Hiigsiga cusbaa (Somali Compact) ee 2013.

Wixii ka danbeeyay xiligaas, waxaa yimid isbedello iyo horumar dhanka siyaasada ah, oo ay ka mid yihiin dhismaha dowlad goboleedyada iyo dhameystirka hanaankii federaaleynta ee dalka. Isbadaladaas waxay ahaayeen kuwa nugul, oo marmarka qaar suurowda in burbur ku yimaado, gaar ahaan marka la eego qaska iyo amni-darada ay horkacayso kooxda argagixisada ee Al Shabaab.

Sidoo kale, mashaariic dhowr ah ayaa jiray oo qorshe joogta ah aan laheyn, ama aan ku xirneyn howlihii socday ee xasilinta. Dibu-eegis kadib, Istaraatiijiyadu waxay xooga saareysaa sidii wax looga baran lahaa caqabadihii iyo casharadii laga bartay hirgelinta xasilinta. Sidaa darteed, waa lama huraan in kor loo qaado tayada iyo xirfada hay'adaha hormoodka ka ah isku-dubaridka iyo dadaalka xasilinta, horumarinta, sameynta iyo fulinta siyaasadda si wadajir leh oo ay qeyb ka tahay istaraatiijiyada amniga iyo horumarinta.

## **2. Qiimeynta Nuglaanshaha**

Wadatashigii arrimaha dibu-heshiisiinta oo ay martigelisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee June 2017 wuxuu tilmaamay taariikh ahaan dhibaataada jirtay, isbadalkii lasoo maray iyo dabcan waxyaabaha kalifayay nuglaanshaha uu dalka ku jiro. Caqabadahaas waxaa ka mid ah in la maareyn waayo sidii loo sameyn lahaa nidaam

isku dheelitiraya dhaqanka Soomaalida iyo mabaa'diida guud ee diinta si loo helo dowlad casri ah, iyo sidoo kale in la qeexo jiritaanka dhibaataada asalkeeda, tusaale ahaan, kooxeysiga, qeybsiga kheyraadka, sinnaan la'aanta iyo heyb-sooca dadka laga badan yahay iyo dumarka<sup>1</sup>. Caqabadahaas siyaasiga waxaa mar walba dabasocday musiibooyin dabiici ah oo soo laablaabanayay.

Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxa ay ku tilaabsatay horumar la taaban karo oo dhinacyo badan quseeya laga soo bilaabo 2012-kii, dhowr ka mid ah isbadalkaasna waxay gundhig u yihiin taageerada Istaraatiijiyada Xasilinta. Waxaa ka mid ah sameyntii afar maamul goboleed, soo celintii goobihii Shabaabku qabsaday, maalgashi baaxad leh oo lagu sameeyay mashaariicda bulshada iyo dhismaha maamullo degmo, iyo xil-iskasaaridii wadajirka aheyd ee Dowladda Soomaaliya iyo Beesha Caalamka ee ahayd in Amniga Si Guud Loo Wajaho taas oo la filayo in ay hagto geedisocodka qariirada guud ee amniga dalka<sup>2</sup>.

Hadaba, mushtamaca Soomaaliyeed iyo maamulada dowliga ah oo ay wehliyaan xoogaga AMISOM, waxaa si joogta usoo foodsaara dhibaatooyinka amniga ee Al Shabaab oo haatan u xuubsiibtay in ay baadiyaha ka soo jabhadeeyaan, inkasta oo hadana ay weeraro argagixiso ka fuliyaan magaalooyinka waaweyn ee dalka. Inkasta oo ay doonayaan in dowladda ay kula tartamaan shacabka, hadana waxaa soo baxaysa in argagixisadu ay mar walba shacabka xoog iyo cabsi-galin ku maquuniyaan maadaama aysan bixin karin adeeg bulsho oo dabooli kara baahiyada jira. Taas badalkeeda, waxay shacabka ka hortaagan yihiin dowladooda; dowladiina waxay ka hortaagan yihiin adeeg bixinta shacabka, dhamaantoodna waxa ay u sahleen in ay majo xaabiyaan dadaalkii loogu jiray xasilinta dalka.

---

<sup>1</sup> Macluumaad dheeri ah waxaad ka heli kartaa warbixintii laga diyaariye shirkii dib u heshiisiinta ee hanaanka qaran oo lagu qariiradeeyey nabada iyo khilaafaadka dalka oo ay soo qaban qaabisay Wasaarada Arimaha Gudaha iyo Federaalka. Bishii Juun 2017

<sup>2</sup> Qorshaha kalaguurka amniga gaar ahaan qeybta hanaanka amniga ee CAS 1&2 kaas oo xooga saaraya si ay ciidamada soomaalidu u hanan lahaayeen amniga dalka.

In la gaarsiyo shacabka maamulka dowladdeed waxa shardi u ah saddex arrimood – joogis, karti waxqabad iyo in maamulka laga hibeysto. Si sare loogu qaado kalsoonida loo hayo dowladda, waa in qorshaha xasilinta uu taageero iyadoo la sare marinayo xirfada iyo kartida maamulka, jiritaanka dowladda heer federaal iyo mid maamul goboleed, kasbashada kalsoonida shacabka iyo sareynsiinta sharciga iyo kaladanbeynta. Saddexdaas arrimood waa isku xiran yihiin, oo midba ka kale ayuu la fan-galayaa. Sida ay u kala duwan yihiin karti iyo dhaqaale ahaan, ayaa maamul goboleed walba waxa uu u baahan yahay taageero u qalanta caqabadaha iyo fursadaha soo foodsaaraya. Xitaa marka la eego maamullada dhexdooda, waxaad moodaa mashaariicda horumarinta ay ku siman yihiin caasimadaha, oo degmooyinka aysan wax badan ka socon. Taas ayaa sababaysa in la balaariyo mashaariicda si loo helo waxqabad baahsan.

Dowladda Hoose waa Meesha ugu horeysa oo ay iskaga xiran yihiin muwaadanka iyo dowladda. Mid ka mid ah casharada aan ka baran karno Istaraatiijiyadii hore ayaa ah in shacabka ay aad ugu baahan yihiin cadaalad goobaha xasilinta, taas oo noqonaysa in sharciyada dib loogu laabto. In dadku ay helaan cadaalad waxa ay ka muhiimsan tahay wax walba marka la doonayo in la dhiso nabad iyo amni waara. Sidoo kale, goobaha aysan wali cadaaladda iyo ciidanka amnigu gaarin waa degmooyinka ka baxsan caasimadaha maamul goboleedyada.

Goobaha ka baxsan magaalooyinka waa weyn iyo caasimadda Muqdisho qiimeyn lagu sameeyey, gaar ahaan dhaqdhaqaaqa iyo horumarinta dhaqaalaha, ayaa waxaa lagu ogaaday in ay ku xiran yihiin axsoosaarka beeraha. Taas waxay cadeyneysaa in mashaariicda loo baahan yahay ay noqdaan kuwa abuuri kara fursado nololeed iyo waxsoosaar dhaqaale si bulshadu ay uga baxaan saboolnimada iyo faqriga mudada dheer halakeeyey. Colaadaha iyo iskudhaca bulshada ama qabaa'ilka Soomaalida iyana waxa ay qeyb ka yihiin culeyska saaran bulshada. Waxa ay u baahan tahay dibu-heshiisiin taabagal ah oo ka-falcelin u noqota culeyskaas, kana bilaabaneysa heerka ugu hooseeya ee bulshada, maadaama ay xaqiijineyso in hay'adaha dawladda ay maareeyaan si ay qeyb uga noqdaan dadaalka dibu-soocelinta dawladnimada iyo nabadeynta. Wajigani wuxuu horudhac u yahay in la daboolo baahida loo qabo dawlad leh awood dhexdhexaadnimo marka uu yimaado iska-hor-imaad hubeysan bulshada dhexdeeda, isla markaana u fududeyn kara bulshada in ay iyaga dhexdooda is nabadeeyaan.

Inkastoo mashaariicda xasilintu ay door humiim ah ka qaataan xal u helida asalka ee dhibaatooyinka nuglaanshaha, hadana waxaa jirta in aysan wax walba dawo u aheyn, oo loo baahan yahay in waxyaabo kale lala yimaado, sida dhismaha guddiga degmada, dhaqaalihii iyo fulinta hawlaha addeega aasaasiga bulshada. Hadaba, waa lama huraan in dawladda dhexe ay bilaabaan istaraatiijiyadii lagu mideyn lahaa ama la iskugu xiri lahaa barnaamijka xasilinta si gunta looga daweeyo dhibaatooyinka nuglaanta iyo xasilooni darada.

### **3. Hadafka Guud**

Hadafka guud ee laga leeyahay istaraatiijiyadan waa iyada oo laga miradhaliyo dadaalka xasilinta, bulshadana lagu xoojiyo isku-duubnaan dhexdooda ah iyo mid dawladda ah. Iyada oo la cuskanayo faa'idaada aan kor ku sheegnay, ujeeddada istaraatiijiyadan waxay tahay in la taageero nabadda iyo dhismaha nidaamka dawliga, loogana hortago dhibaatooyinka keeni kara iskudhaca iyadoo la sameynayo sidata /n:

- In lala sameeyo bulshada wadahal si looga caawiyo qaabkii ay ku xalin lahaayeen waxyaabaha dhabta ah oo ay kala tirsanaan, loona dhiso kalsooni buuxda.
- In la ballaariyo fursadaha dhaqan-dhaqaale si loo abuuro isku filnaansho, loona yareeyo saboolnimada, lana kordhiyo fursadaha keeni kara nolol-maalmeedka.
- In kor loo qaado daahfurnaanshaha iyo kamid-noqoshada bulshada rayidka si ay uga qeyb qaataan dhismaha dawladda, gaar ahaan heer gobol iyo mid degmo, loona gaaro nidaam loo dhan yahay.
- In la taabageliyo hawlaha amniga iyo cadaaladda si loo ballaariyo dawladda, dadkuna uga hibeystaan.

Guud ahaan, tilaabooyinkaas waxay meesha ka saarayaan colaadaha iyo qolyaha ka faa'iideysta, gaar ahaan Al Shabaab, waxaana badalkooda galaya dawladda loo dhan yahay iyo daahfuran dadku ay la xisaabtami karaan. Tusaale ahaan, sameynta hanaan dibu-heshiisiineed oo waxtar leh iyo nidaam dawladeed wuxuu muhiim u yahay in khilaafka, addeeg bulshada iyo dawladda ay noqdaan kuwa la maareyn karo si loo gaaro hadafka dhismaha-dawladeed iyo nabadeyn ballaaran.

## **Arrimaha Ahmiyada Leh**

In hadafka kor ku xusan la gaaro waxaa laf-dhabar u ah in la dardargeliyo go'aanka ah in wax laga qabto afar-arrimood oo isku xiran:

*i.) Soo kabsashada bulshada*

*ii.) Dib-u-heshiisiin bulsho*

*iii.) Maamul maxali ah, iyo*

*iv.) Sareynta sharciga*

Arrimahaas isku xiran ayaa sabab u noqon kara in xal loo helo nuglaanshaha iyo waaxyaabaha sababa colaadaha ee u baahan in laga hortago si loo dhiso heykal dawladeed oo suuragaliya nabadeyn iyo nidaam federaali ah oo dhameystiran. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibu-heshiisiinta doorkeeda ku aaddan hirgelinta qorshe xasilooni oo buuxa waxa uu salka ku haya in ahmiyad weliba ay leedahay qorshe u gooni ah iyo istaraatiijiyad taas oo ay caawinayaan hay'adaha qaabilsan ee dawliga ah iyo kuwa amniga ka kaalmeeya dawladda, sida AMISOM. Si gaar ah, Qorshaha Guud ee Amniga, qabyoqoraalkiisa saddexaad, iyo qeybaha xiriirka la leh ee amniga sida Qorshaha kalaguurka waa tixraac muhiim ah, sida uu qeexayo Sanduuqa Horumarinta iyo Dibudhiska Soomaaliya, oo leh qorshe siyaasadeed iyo mid ah sareynta sharciga.

In xal loo helo meelaha ay iskaga murugsan yihiin amniga iyo horumarinta ayaa ah kuwa ay garwaaqsadeen dhamaan inta dan-wadaagta ah – oo macnaheedu yahay ma jiri karo amni waara oo aan laheyn horumar, sidoo kale, ma jiri karo horumar aan laheyn amni. Sidaas darteed ayay muhiim u tahay in la xaqiijiyo dadka dan-wadaagta ah in ay ka xaajoodaan hanaankii ay ku dajin lahaayeen istaraatiijiyad xasilooni oo la jaanqaadi karta doodaha siyaasadeed ee jira. Taas badalkeedu waxay noqoneysaa in mashaariicdu ay hagaan siyaasadda salka ku heysa istaraatiijiyada xasilinta, oo xaliya caqabadaha sida ay u kala horeeyaan oo nidaamsan, tusaale ahaan, leh qorshe iyo qiimeyn ku xiran maamulgoboleedka booliskiisa, ciidanka qalabka-sida howlgalkooda iyo diyaar-garowgiisa iyo inta la qorsheeyay ee laga dhimi lahaa ciidanka AMISOM. WAGFD oo kaashaneysa dhigeeda maamul-goboleedyada ayaa horumuud ka noqoneysa madasha wadajirka ah ee lagu maamulayo taageerada dawladda hoose<sup>3</sup> taas oo gacan ka geysan doonta arrimo badan oo qeyb ka ah barnaamijka istaraatiijiyada xasilinta. Si kastaba ha ahaatee, istaraatiijiyada xasilinta ayaa ah madal guud oo ay qeyb ka yihiin Wasaarado dhowr ah, gaar ahaan Wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Amniga Gudaha marka loo eego arrimaha sareynta sharciga oo qeyb ka ah qorshaha xasilinta.

## Mabaa'diida Hagaya

Iyada oo ay horumuud ka tahay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibuheshiisiinta, oo si hoose ula shaqeyneysa wasaaraddaha dhigeeda ah ee maamulgoboleedyada, sida Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, Galmudug iyo Maamulka Gobolka Benaadir, iyo qeybo ka mid ah Dawladda Federaalka oo latashiyo badan kala yeelatay arrimaha xasilinta, ayaa waxay dibu-eegis ku sameysay istaraatiijiyada iyadoo laga eegayo dhinacyada soo socda:

Marka ugu horeysa, qorshaha xasilinta ee Soomaaliya ayaa ah hanaan siyaasadeed oo xasaasi ah, sidaas darteedna loo baahan yahay taxadar dheeraad ah oo ku aaddan isbadalka xaaladaha siyaasadeed. Sidoo kale, howlaha xasilinta waa in loo arkaa kuwa nugul, aad iskugu qasan oo aan la isku haleyn karin, wixii la galiyanna ay noqon karaan hal-bacaad lagu lisay.

In dib loo yagleelo oo la xoojiyo hay'adaha dowliga heerarkooda kala duwan waa hawl qaadaneysa jiilal, una baahan in waxqabadka barnaamijka xasilinta ee lagu xoojinayo hay'adaha dawladda mar walba qeyb ka noqdo, xiliga la joogo iyo mustaqbalka fog.

Maadaama uu barnaamijka xasilinta uu saameyn degdeg ah yeelan karo, hadana waxaa loo baahan yahay in mar walba qorshaha lagu daro sidii kor loogu qaadi lahaa tayada iyo kartida hay'adaha dowliga ah. Inkasta oo xal-u-helida amni-darada iyo hawlaha la xiriira ee hawlgalada ciidamada ay tahay arrin muhiim u ah istaraatiijiyada, hadana hawlgalada noocaas ah waxaa loo arkaa oo kaliya in ay qeyb ka yihiin dadaalada balaaran ee socda si loo maareeyo nuglaanshaha iyo dibu-sookabashada bulshada oo asal u ah dhismaha nabadadda iyo qorshaha horumarinta dawladdnimada.

Goobaha xooga la saarayo; markii istaraatiijiyada dibu-eegis lagu sameeyay waxay diirada saareysaa goobaha aan kor ku sheegay ee afarta ah ee ka tirsan Maamul Goboleedyada Cusub<sup>3</sup> iyo maamulka Gobolka Benaadir. Dhanka kale, maamulka Puntland waxa ay qeyb ka yihiin mabaa'diida iyo iskuxirka la doonayo ee istaraatiijiyada xasilinta ee u

---

<sup>3</sup> 5 qeybood oo barnaamijka wadajir oo kala ah (a) Dib- u heshiisiinta bulshada, (b) Mashaariicda bulshada, (c) Wadahadlka bulshada(d) Dowladdaha hoosel(e) Istraatiijiyada isgaarsiinta.

<sup>4</sup> Istraatiijiyadii hore waxa ay diirada saaraysay 25 degmo oo ay dowladu dib ula wareegtay,

Degsan maamulka, hadba sida ay u arkaan in loo fulin karo ama loogu baahan yahay<sup>5</sup>. Horumarinta xadidan ee gobolada waxaa loogu tala galay in lagu hirgaliyo mashaariicda degmooyinka kuwaas oo afarta arrimood ee qorshaha xasilintu eegayo, waxayna si gaar ah xoogga u saari doontaa meelmarinta mashaariicda degmooyinka iyadoo laga ambaqaadayo qorshaha maamul-goboleedka.

Dawladda dhexe iyo kuwa maamul goboleedyada waxa ay u baahan yihiin wadashaqeyn xoogan oo dhanka isku-dubaridka ah iyo hanaankii loo mari lahaa si wax looga guulgaaro hadafka xasilinta ee gobolada oo idil, loona helo iskaashi si hay'addaha caalamiga ah ay wax ugu kordhiyaan horumarka socda.

#### **4. Goobaha Bartilmaameedka ah**

Guud ahaan, goobaha bartilmaameedka ah waa in kor loo qaado ballaarinta awooda maamulka, kartida, iyo in maamulka laga hibeysto iyada oo la taageerayo addeega ay dawladdu horseedka ka tahay, iskuxirnaanta bulshada iyo dibu-heshiisiinta, kuwaas oo ah yoolalka ay hiigsanayaan maamul goboleedyada. Afarta tiir ee hoos ku xusan waxa ay ka dabqaadanayaan waxqabadkii istaraatiijiyadii xukuumaddii hore, laakiin waxaa ku jira qodob cusub oo tilmaamaya isdhexgalka bulshada iyo in la xaqiijiyo in maamuladda rayidka ay hogaamiyaan dadaalka amniga iyo cadaaladda oo la'aantood aysan suuragal aheyn in ay sii socdaan guulihii la gaaray. Sidoo kale afarta tiir waxaa la jira in istaraatiijiyada xasilintu ay door ku leedahay isku-xirka arrimaha isi-saameynaya oo ay wadaan hay'adaha kale ee dawliga ah iyo siyaasadaha hogaaminaya, sida qorshaha Ka-hortaga / Iskacaabinta Fowdada Xagjirka (Eeg qeybta 5-aad).

Dhanka maamul-goboleedyada, goobaha wadajirka loo abaarayo waxa ay yeelan doonaan qorshe u gaar ah oo xasilineed, kaas oo salka ku haya fahamka dadka deegaanka iyo arrimaha sababa nuglaanshaha. Qorsheyaashan heerka gobol waxa ay saldhig u yihiin hawlaha socda ee iskudubaridka, kuwaas oo gacan ka geysan doona ahmiyadaha iyo tilaabooyinka la qaadayo sida ay u kala horeeyaan, hadeey noqon laheyd dhanka mashaariicda ama howlaha caadiga ah. Waxaa intaas weheliya tixgelinta la siinayo mashaariicda mustaqbalka fog ee degmooyinka ku jira soo-kabashada.

---

<sup>5</sup> Waxaa la isku raacay hanaanka wadajir in khiBradaha iyo horumarka laga gaaray ee xaga dowladaha hoose gaar ahaan Putland loo ga faaiideeyo dowlad goboleedyada kale ee curdunka ah. Dowlad goboleedyada dhexdoodana ay iisku gudbiyaan xogta iyo khiBraaha ay ka dhaxlayaan mashaariicda xasilinta si ay ukala faa'iideystaan

Goobaha dhawaan Shabaab laga xoreeyay, ama dibu-heshiisiintu ka dhacday iyagana waxaa xoogga la saarayaa sidii loo dedejin lahaa balaarinta awoodda maamulka, oo loo marayo mashaariicda bulshadu rabto iyo sameynta maamul ku-meel-gaar ah kuwaas oo aassaas u noqda mashaariic horumarineed oo dheeraad ah. Sidoo kale, waxaa jira meela kele oo ay nuglaanshuhu ka jireen oo wax badan laga qabtay taas oo sahashay in mashaariic horumarineed iyo maalgashi laga saameeyo si loo taageero isku-filnaanshaha bulshada iyo yareynta saboolnimada. Qorshaha maamul-goboleedka waa in uu la socdaa istaraatiijiyad mas'uul ka ah iskukeenista arrimahaas oo idil.

### **Bartilmaameedka i) Soo-kabsashada Bulshada**

Marka aad eegtid wajigii koowaad ee Istaraatiijiyada Xasilinta ee WAGF oo bilaabatay 2013 kii, waxqabadkii ugu weynaa ee lagu taageerayay istaraatiijiyada waxaa lagu soo koobi karaa in uu ahaa mashaariicda soo-kabashada bulshada. Deeq-bixiyeyaasha, sida SSF, USAID, mashaariicda ay maalgeliso dawladda Norway oo ay dhameystiraan hay'addaha caalamiga sida TIS+, SSI/Dalbile, Nordic International Support (NIS), CPD, iyo kuwa kale oo la mid ah, waxay gacan ka geysteen taageerada bulshada iyo maamulada kusime-yaasha ah ee loo dishay degmooyinka. Hawlahaas waxaa ka mid ahaa dibu-dhis, ama dayactirka goobihii dawladda, sida xafiisyada, xarumaha bulshada, garoomadda kubadda, ceelasha, nalalka cadeeda ku shaqeeya ee wadooyinka ifiya, iyo dayactirka wadooyinka. Inkasta oo waxqabadkaas uu aassaasi u yahay soo-kabsashada bulshada, hadana qaar ka mid ah waxay xoojiyeen sareynta sharciga, waxaana ka mid ah ileyska wadooyinka oo gacan ka geystay amniga, dayactirka maxkamadaha (NIS waxa ay ka hirgelisay degmooyinka Waajid iyo Bakool) oo dhamaantood wax fiican ka badalay garsoorka.

Marka la eego baahiyada ay qabaan maamul-goboleedyada dhawaan la yagleelay, sookabsashada bulshada waxay leedahay ahmiyad gaar ah, dibu-eegista istaraatiijiyadda cusubna waa ay sii wadi doontaa. Waxay arrintan cadeyn u tahay soo-kabsashada horumarka leh ee laga hirgaliyay degmooyinka, oo lahaansho dawladeed lagu dhameystiray, taas oo abuurtay karti dhanka waxqabadka (heer degmo iyo mid gobol) iyo bulshadii oo ka hibeysatay maamulka. Qeybtan waxa ay xiriir la leedahay qodobka 2-aad ee Qorshaha Wadajir: oo ah hawlaha/mashaariicda nabadeynta, hadafkeeduna yahay “in la dhiso kartida maamullada iyadoo la siinayo waaya-aragnimo ku saleysan

dhaqanka dimuqraadiyada, oo la bixinayo adeegga aassaasiga iyo kaabeyaal dhaqaale oo bulshadu qeyb ka tahay.”

Dawladdu waxa ay garowsan tahay in mashruuc walba iyo hay’adaha fulinayaa ay isticmaalaan habab iyo nidaam u gaar ah marka ay la shaqeynayaan maamullada maxaliga ah iyo bulshada, taas oo ay u madaxbanaan yihiin, ama uusan jirin sharci u diidaya sidaas. Si kastaba ha ahaatee, dibu-eegista Istaraatiijiyada Xasilinta waxa ay soo jeedineysaa in toos loola shaqeeyo Guddiga Nabadda iyo Xasilinta Degmadda meelaha ay ka jiraan, ama la adeegsado raadraaca USAID TIS+ ee la-shaqeynta bulshada tixraac ahaan marka la doonayo in hawl loo fuliyo. Hawlahaas oo idil, maamulka degmadda iyo kan dawlad goboleedka waa in ay si hoose ula shaqeeyaan, kana qeyb galiyaan arrimaha iyo mashaariicda soo-kabsashada bulshada.

## **Bartilmaameedka (II) Dib-u-heshiisiin Bulsho**

Dhamaan jaaliyadaha soomalidu waxay si joogta ah xooga u saaraan muhiimada ay leedahay dib uheshiisiinintu waana mid ka mida qorshayaasha xukuumada ‘Nabad Iyo Nolol’. Arinkaasu wuxuu horseeday in Wasaaradda Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibu-heshiisiinintu ay qabato shir wadatashi mudadii u dhexeysay (13-17 June 2017) shirkaas oo looga arinsanaayey sidii loo ogaan lahaa heerka ay gaarsiinsan yihiin xaaladaha colaadaha iyo nabadeed ee dalka.

Wadatsahigaas waxaa diirada lagu saaray baahida looqabo in xooga lasaaro sadex qaybood oo dib-u-heshiisiinneed oo kala ah:

- 1) Dib-u-heshiisiin siyaasadeed,
- 2) Dib-u-heshiisiin bulsho, iyo
- 3) Dib-u-heshiisiin caqido.

Lakiin staraatiijiyada xasintu waxay diirada saaraysaa qodobka 2aad oo ah dib-uheshiisiininta bulsho inakstoo aysan ka marnayn wax kaqabshada ismaandhaafka ku salaysan kala aragti duwanaanshaha fahamka diinta iyadoo loomarayo istaraatiijiyada kahortaga xagjirnimada.

Inkasta oo ay colaadda Soomaaliya tahay mid wejiyo badan leh, hadana waa colaad maxaliya. Colaadahaas maxaliga ahi waa kuwa ay badanaa ururka Al-Shabaab uga faa’iidaystaan sidii ay ku xagal-daacin lahaayeen dhismaha dariiqa nabada. Sidaa daraadeed, istaraatiijiyada xasalintu waxay diirada saaraysaa dib-u-heshiisiin lala samaynayo jaaliyadaha

halka dib-u-heshiisiinta siyaasadeed loo mari doono dariiq iyo istaraatiijiyado kale. Lakiin arrimaha sida gaarka ah ula xiriira Hanaanka Wadajir waxaa lagu soo koobay kuwa soo socda:

- In la xoojiyo awooda dowlad goboleedyada iyo arimaha gacanta ka geysankara sharciyadooda sida dhismaha Golayaasha deegaanka. Sida daraadeed waxaa laga maarmaana in la abaaro jaaliyadaha heer deegaan hoosna laga soo bilaabo wadatashiyada dhismaha golayaasha deegaanka.
- In dib-u-heshiisiin bulsho loo sameeyo jaaliyadaha ay xurgufta colaadeed oo soojireenka ahi ka dhexeyso sida dagaalada ay sababaan baadka iyo biyuhu.
- In xal looraadiyo sidii hoos loogu dhigi lahaa colaadaha taagan oo u dhexeeya jaaliyadaha isku degaanka, ah gaar ahaan kuwa dhexmara maleyshiyo beeleeedyada.

Xasilintu waxa ay la xiriirtaa in lahelelo wada xaajoodyo badan oo isugu jira kuwa jaaliyada gudaheeda ah iyo kuwa ka baxsanba si loo horamariyo isdhexgalka bulshada iyadoo la raacayo sadexdeeda arimood ee aan kor kusoo sheegnay. Tusaale ahaan waxaa laysku xirikaraa howlaha laqabanayo si loo xoojiyo cadaaladda iyo hay'adaha dowladda si loo xaliyo ismarinwaaga bulshada dhexdeeda ka jira. Waxaa kaloo muhiim ah in gacan wax ku ool ah laysla garab taago bulshada rayidka ah si loo yagleelo hay'ado dolwadeed oo sharciyad leh isla xisbaatan iyo daah furaana kajirto loona helo nidaam loo dhanyahay laguna wada qanacsan yahay.

### **Bartilmaameedka (III) Maamulka Dowladaha Hoose**

Tiirka afraad ee hanaanka wadajir wuxuu tilmaamaya Maamulka dowladaha hoose oo isugu jira dhismaha Golayaasha deegaanka iyo kor u qaadida tayadooda. Hirgelinta dadaaladaas waxaa laga filayaa inay xoogga saaraan sadex arimood oo kala ah: Maamul daadejin, Baahinta siyaasadda iyo daadejinta maaliyada.

Tayeynta maamulada degmooyinka dhowaan la yagleelay waxaa diirada lagu sarayaa tababaro lasiinayo maamulka degmada iyo jaaliyadda ama shacabka degmadaas. Tabaradaasi waxa ay isugu jiri doonaan doorka iyo waajibaadka maamulka iyo shaqaalaha, qaabdhismeedka maamulka iyo adeeg bixinta.

Waxaa sidoo kale laga tayeynayaa arimha la xiriira qorshaynta, miisaaniyad dejinta, daahfuraanta, isla xisaabtanka, dakhli ururinta iyo qaabka loo maareeyo dakhliga.

Dowlad goboleedyada Jubaland iyo Koonfur galbeed waxay daah-fureen dhismaha goleyaasha degaanka kadib markii ay ansixiyeen sharcigii Dowladaha Hoose. Waxaase u baahan in gacan laga siiyo samaynta sharciga Dowladaha hoose Dowlad goboleedyada Galmudug iyo Hir - Shabeele si dhismaha goleyaasha degaanku u noqdo mid ku yimi qaab sharciya.

Istraatiijiyadda xasilintu waxay si weyn u qadarinaysaa doorka ay ka qaataan barnaamijka Dowladaha hoose mashaariicda kala ah UN/JPLG, FCA/CRD oo ay maalgeliso EU iyo SSF oo qorshaynaysa inay gacan ka siiso Dowlad goboleedyada dhismaha goleyaasha

deegaanka. Dowlad goboleed kastaa waxa uu diyaariyey ahmiyada iyo qorshaha dhismaha goleyaasha deeganka oo ah qaab ay kula horaynayaan dhismaha maamulka degmooyinku.

#### **Bartilmaameedka (IV) Saraynta Sharciga**

Barnaamijka saraynta sharcigu wuxuu ahaa mid meesha ka maqan marka lafiiriyo Istaraatiijiyadii xasilinta ee (2013-2017) taasoo xooga saareysey dib u soo kabashada bulshada, dib-u-heshiisiin iyo maamulka Dowladaha Hoose. Khibrada laga dhaxlay istaatiijiyadaas hore waxay tahay hadii aanu jirin amni bulsho oo hareer socda howlgalada ciidamada, horumarkasta oo laga gaaraa faafinta awoodda dolwadu wuxuu noqonayaa mid aan dhamaystirayn oo nugul.

Waxaa suurta gal ah inay kasoo ifbaxaan goobaha ay dolwadu gacnata ku dhigto isku dhacyo u dhexeeya beelaha ama shakhsiyaad oo la xiriira xurguf hore.

Sidaa daraadeed doorka iyo muhiimada ay leeyihiin hogaamiye dhaqameedku oo ku aadan maaraynta ismaandhaafyadu waa in xalka ay keenaan lagu xoojiyaa nidaam amni oo sharciya iyo hay'ado garsoor si loo joogteeyo saraynta sharciga iyo wadajirka bulshada.

Dib-u-eegista istaraajiyada xasilintu waxay qiraysaa talaabooyinka yididiilada leh ee la qaaday waxaana taas mahadeeda leh ilaahay ka sokow saaxiibada qaybta ka ah ku-dhaqanka sharciga ee caalimiga ah

kuwaas oo fududeeyey tababarro loo fidiyey shaqaalaha garsoorka, maxkamadaha guurguura si kor loogu qaado cadaalada, ka qaybqaadashada sugida amniga ee bulshada iyo tababarka ciidmada booliska oo loo sameeyey qaar kamid ah Dowlad goboleedyada. Laakiin iskudaydaasi waxay ka qabsoomeen Kismayo iyo Baydhabo oo keliya oo ah caasimadaha Dolwada goboleedyada ee Jubaland iyo Koonfur galbeed waxaana hada kasocda Beledweyn iyo Jowhar qorsheyaal cusub oo ku saabsan ilaalinta nabadgelyada oo ay ka qaybqaadanayaan shacabku.

Wasaaraddaha Arrimaha Gudaha ee heer federal iyo heer maamul gobeeld iyo kuwa amniga iyo cadaalada ee labada heer federal iyo mid dowlad gobeeldba waxay soojeedinayaan in labalaariyo talabaadan wax ku ool ka ah lana gaarsiiyo degmooyinka oo dhan si faa'iidada barnaamijka xasilinta looga dareemo dalkoo dhan.

Degmooyinka maamuladoodu cusub yihiin waxay u baahan yihiin boolis awood leh iyo garsoorkii oo dhinac taagan si ay uga miradhaliyaan dadadaalada ay ku xasilinayaan degmooyinkooda.

## **Caqabadaha Jira**

Daneeyayaasha arimaha xasilinta waxay isla qirsan yihiin inaan amni ku yimid qaab militeri xal u noqon karin colaadaha iyo is maan dhaafyada.

Sidaa daraadeed waa laga maarmaan in lahelu dadaalo ay horkacayaan bulshada rayidka ahi dhamaan meelaha ay istaraatiijayada xasilintu ka hirgelayso si loo joogteeyo wadaxaajoodyada siyaasadda iyo amaniga la hantay. Caqabadaha la filan karo waxaa kamida:

- Helitaanka amni bulsho si kor loogu qaado kalsoonida iyo sharciyada awoodaha dowlada. Waxaa sidoo kale muhiima in hay'adaha UN, NGO yada iyo bulshada rayidka ahi ay tegi karaan deeganda la xasilinayo si barnaamijyada laga fulinaayo goobahaas ay horay ugu socdaan.
- Isku xirnaanshaha amniga iyo isusocod aan xadidnayni waxay awood u siinayaan hay'adaha dowlada inay hogaamiyaan dadaalada socda ayna sameeyaan hirgeliyaana siyaasadaha lagama maarmaanka u ah xasilinta.

Waxaa la diyaariyey hanaan ku saabsan amniga oo loosoo gaabiyo (CAS). Caqabadaha hada wajahaya barnaamijyo badan waxaa ugu weyn

sidii laysu waafajin lahaa sii balaarinta barnaamijyadaas iyadoo si taxadar leh loo wajahayo arrimaha laxirrira amniga si loo xaqiijiyo inay barnaamijyadu noqdaan kuwa sii socda umaduna kawada faa'iidsato. Hanaanka (CAS) wuxuu abuurayaa gole ka talabixiya arrimaha amniga suurta geliya inay bulshada rayidka ahi ay si sahala uga qaybqaadan karaan barnaamijyadaas iyadoo aanay jirin caqabdo amni oo xanibaya dhaqdhaqaaqooda. Waxaa kaloo hanaankani sahlayaa suurtagalnimadii lagu heli lahaa qorshe midaysan oo u dhexeeya hay'adaha amniga iyo bulshada rayidka ah.

Waxaa kaloo lagama maarmaan ah in la isu dheel tiro maalgelinta arimaha amniga iyo gacansiinta wasaaradaha wadashaqaynta tooska ah laleh barnaamijkan ee heer federal iyo mid dowlad goboleed. Waxaa maalgelintaas ka mida in lasii balaariyo tayeynta dowlad goboleedyada/degmooyinka iyadoo sidoo kale la dhiirigelinayo ka qaybqaadashada jaaliyadaha iyo bulshada rayidka ah.

## 5. Qubaneyaasha

Iskudayada lagu doonaayo xoojinta nabada iyo dib-u-dhiska qaranka ee afarta arimood ee aan kor kusoo sheegnay oo loo dhan yahay lehna isla xisaabtan dhab ah, waxay ka turjamaan balanqaadyadii, istaariijayadaha iyo siyaasadaha dowlada ee laxiriira dhalinyarada, arimaha haweenka iyo ka hortaga xag-jirnimada.

Tusaale ahaan arimaha la xiriira ka hortaga xag-jirnimada waxaa kamida in lala shaqeeyo hay'adaha dolwada ee ay khusayso iyo daneeyayaasha beesha caalamka si loo hubiyo in barnaamijka xasilintu uu ku xiran yahay istaraajiyadda dolwada ee ka hortaga xag-jirnimada iyo heshiiska amniga ee qaabdhismeedka hanaanka (CAS).

Marka laga hadlayo barnaamijyada iyo howlaha ku taxaluqa haweenka iyo dhalinyarada waxaa laraacayaa istaatiijiyada xasilinta ee ku aadan qaraarkii golaha amniga ee *Haweenka, Nabada iyo amniga* ee tirisigiisii ahaa 1325 (2000) iyo qaraarkii *Dhalinyarada, Nabada iyo Amniga* ee tirsigiisii ahaa 2250 (2015).

Istaatiijiyada xasilintu waxay dhiirigelinaysaa in dhaqaalaha xasilinta boqlkiiba 30 loo qoondeeyo in wax looga qabto arimaha haweenka.

## **6. Xiriirinta & Iskudubaridka**

Xirririnta guud ee istaartiijiyada xasilinta waxaa loo mari doonaa qabashada kulan bille ah oo ay isugu imaanayaan daneeyashaasha xasilinta waxaana hogaaminaya gole ay Wasaaradda Arimaha Gudaha ee federaalka iyo UNSOM CRESTA isla shir gudoominayaan.

Goluhu wuxuu gacan kageysanayaa sidii loo qaban lahaa kulmo lagu xoojinayo dadaalada ay istaraatiijiyadani diirada saarayso ee heererka kala duwan ee federaal iyo mid dolwad goboleedba iyadoo lala kaashanayo deeq bixiyayaasha, UN ka iyo bulshada rayidka ah.

Golahani wuxuu sidoo kale xiriirn doonaa qodobka sadexaad ee hanaanka CAS iyo Golaha xasilinta ee Sanduuqa horumarinta iyo dib-udhiska qaranka (SDRF).

Kulamada Golaha waxaa looga doodi doona loogana arinsan doonaa arimaha khuseeya dhicayada qaybta ka ah istaatiijiyadda xasilinta waxaana laysku xiri doonaa howlaha la qabanayo, siyaasadaha iyo istaatiijiyada xasilinta.

Iskuxirka howlwadeenada qorshaynata & fulinta iyo hanaanka CAS wuxuu suurta gelinayaahowlwadeeno diiradda saara sidii ay ugu xiriirin lahaayeen arimaha gaarka ah ee istaraajiyadda kuwa guud. Goluhu wuxuu kaloo suurta gelinayaa islaxisaabtan dhab ah oo laxirria dedaallada xasilinta.

Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee Dowlad goboleedyadu waxay yeelan doonaan gole xasilin oo si joogta ah u kulma kuwaasoo diirada saari doona hirgelinta iyo qorshaynta arimaha xasilinta ilaa heer degmo ee dolwad goboleedkooda. Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee dowlad goboleedyadu waxay kaloo hubin doonaan sii jiritaanka xiriirka ay la leeyihiin Gudigga aminga Gobolka (RSA) si ay u caawiyaan hirgelinta Heshiiska amniga iyo hanaanka CAS ee heer dowladgoboleed.

Waxaa intaas dheer Wasaaradda Arimaha Gudaha ee heer federal iyo Wasaaradaha arimaha gudaha ee heer dowlad goboleed waxay yeelan doonaan wadatashi joogta ah si gacan looga siiyo dolwad gobeeldyada hirgelinta kulamada aan kor kusoo sheegnay. Kulamdaas waxaa lagu qaban doonaa Muqdisho iyo caasimadaha dowlad goboleedyada si meerto ah.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer federal iyo Wasaaradaha arrimaha gudaha ee heer dowlad goboleed waxay adeegsan doonaan hagayaal si ay u caawiyaan dhismaha Gudiga qiimaynta, nabada iyo xasilinta degmada. Hagayaashaas oo ay sameeyeen USAID TIS+ iyo UNJLPG waxay horseedayaan in lahelu habraac laysku waafaqsan yahay oo ku saabsan dib usoo kabashada bulshada. Waxay kaloo sahleysaa in lala falgalo dhinacyada kale ee qaybta ka ah xasilinta heer degaano-hoosaad si ay u hagaan una qaabeeyaan hirgelinta mashaariicdan xasilinta.

## **7. Kormeer iyo Qiimayn**

Baahida loo qabo isku xirka istaartiiyiyaadda xasilintu waa in istaartiiyiyaadda lagu sameeyo kormeer iyo qiimayn si loo helo waxqabad muuqda oo cadaytasiina leh kaasoo lagu hantay go'aan midaysan.

Muhiimada laga leeyahay hagayaasha kormeerka iyo qiimaynta ee ku daaban istaraatiijiyadu waa in lahelu Isfahan buuxa oo u dhexeeya daneeyayaasha heer qaran iyo kuwa heer caalami. Wasaarada Arrimaha Gudaha ee heer federal oo gacan ka helysa UNSOM CRESTA/A waxay adeegsan doontaa laba hagayaal si ay u caawiso kormeerka iyo qiimaynta guud ee istaartiiyiyaadda waxayna kala yihiin: (i) Hanaanka xogta ee Howlgalka midaysan ee loosoo gaabiyo (MCOP), (ii) Astaamaha iskufilaanshaha & nuglaanshaha buuxa oo isna loosoo gaabiyo (FIMM).

MCOP waa hage-nidaamiye lagu maareeyo xogta laga soo uriyey hay'adaha dowlada, deeqbixiyayaasha, Hay'adaha qaramada midoobey iyo ururada aan dowliga ahayn ee bahwadaagta la ah howlaha la xirrira istaraatiijiyadda xasilinta. Xogta lasoo uririyo waxaa lagu soo bandhigaa kulanka Golayaasha xiriirinta arrimaha xasilinta sida kan billaha ah ee Wasaarada Arrimaha Gudaha ee heer Federaal iyo kuwa bahwadeegteeda ah ee heer dowlad Goboleed iyagoo wadashaqayn la yeelanaya Wasaaradaha Qorshaynta iyo Unuga Iskuxirka Deeqaha.

Halka FIMM uu bixin doono diiwaan-qoraal tafatiran iyo qiimayni lasocoto si fahan buuxa looga helo hanaan socodka la xirrira istaartiiyiyaadda xasilinta ee dowlada kaasoo u sahalaya daneeyayaasha istaraatiijiyada inay helaan cadaymo lagu ogaan karo guulaha laga gaarey xaaladaha ku xeeran amaniga, ismaamulka iyo arrimaha dhaqan dhaqaalaha bulshada ee heer degmo. Tani waxa ay sahli doontaa in la guuleysto iyadoo la raacayo tusmeeyayaal muujinaya qaybkasta

horumarka ay samaynayso sida hay'adaha dowlada ee hirgelinta adeega garsoorka iyo amniga. Labadaan hage-nidaamiye waxay gacan kageysan doonaan dooda lagu xoojinayo xiriirinta iyo qaabdhismeedka iskuxirka barnaamijyada guud ahaan gaar ahaana dadaalada xasilinta. Waxa kaloo lagu samayn doonaa hage-nidaamiyaashan horumarin joogta ah iyo dib-ueegis si wax loo ga bedelo hirgelintooda.

Waxaa kaloo dib-u-eegis lagu samayn doonaa sidii laysu waafajin lahaa hage-nidaamiyaha kormeerka iyo qiimaynta ee hanaanka wadajir oo Wasaaradu samaysey si loo helo xog-ururin iyo warbixino dhamaystiran.

Inkastoo hage-nidamiyeeshani ay noqon doonaan kuwa rasmiga ah ee la isticmaalayo hadana waxaa jiri doonaa qaab ay Wasaarada iyo UNSOM CRESTA/A u maarayndoonaan habdhaqanka bulshada qaybta ka ah istaraatiijiyada xasilinta.

Waxaa kaloo lays weydaarsan doonaa casharadii laga bartay arimaha xasilinta iyo baahinta awoodaha dolwada ee laga soo minguuriyey meelo ka baxsan Soomaaliya. Waxaa kaloo jiri doonaa qiimayn ay samayndoonaan barnaamijyada gaarka ahi si looxoojiyo istaraatiijiyada xasilinta.

## **8. Istaraatiijiyada Isgaarsiinta**

Si looga mirodhaliyo istaraatiijiyada xasilinta dalka iyo qorshayaasha fulineed ee dowlad goboleedyada iyo Gobolka Banaadir ee ku lifaaqan, waxaa muhiim ah in la helo istaraatiijiyad isgaarsiin oo mug iyo macno leh. Waxaa mudnaanta koowaad la siinayaa marka lagahadlayo dadaalada isgaarsiinta in la adkeeyo kaalinta dowladnimadda heerarkeeda kala duwan iyo ku soo dabaalida amni iyo kaladanbeyn bulshada kunool deegaanada aysan dowladnimada wali sidii la rabay uga hanaqaadin. Waxaa kale oo hubaal ah in kooxda argagaxisada Al-shabaab ay carqaladeynayso barnaamijyada xasilinta ayagoo adeegsanaya weeraro gacan ka hadal ah iyo dacaayado dhanka warbaahinta ah. Kooxda argagaxisada ee Al-shabaab waxay isku muujisaa in ay cadaalad fasho ayagoo oo marin habaabinaya bulshada ku nool deeganada ay saameynta ku leeyihiin, balse waxa ay isticmaalaan caburin, handadaad iyo cagajugleyn joogta ah. Sidaa darteed, istaraatiijiyada isgaarsiintu waxay diirada saareysaa labo ahmiyadood oo kala ah:

- I. Cadeynta iyo kor uqaadida kaalinta dowladda iyo fahanka waxqabadka ay wado, gaar ahaan arrimaha barnaamijyada xasilinta iyo guulaha horumarineed, sida koruqaadida dowlad-wanaaga, heshiisiinta bulshada, dib u soo kabashada iyo sareynta sharciga iyo kala danbeynta,
- II. Ka-hortaga dacaayadaha Al Shabaab kuwaas oo ku salaysan majaxaabinta dadaalada dowladda ee hirgalinta istraatiijiyada barnaamijka xasilinta iyo gaarsiinta dadka shacabka addeegyada assaasiga ah oo ay u hamuun qabaan si ay u helaan nabad waarta.

Waxaa xusid mudan in dadaalka kaliya ee haatan jira dhanka siyaasada isgaarsiinta uu ku kooban yahay barnaamijyada ka baxa Raadiyaha la yiraahdo Wadajir, kaas oo taageera istraatiijiyada xasilinta dalka iyo qorshayaasha fulineed ee dowlad-goboleedyada. Waxaa iska kaashada Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta iyo Wasaarada Warfaafinta iyo hay'adaha daneeya arrimaha xasilinta. Raadiyaha Wadajir waxaa ka baxa barnaamijyo asbuucle ah oo lagu wacyi galinayo bulshada ku nool deegaanada ay hawlaha xasilintu ka socdaan. Barnaamijyada Wadajir waxay xoogga saaraan dowlad-wanaaga, dib- u-heshiisiinta, taabagalinta hanaanka dowladaha hoose iyo bixinta addeegyada assaasiga ah oo bulshadu u baahan tahay.

Sikastaba ha ahaatee, Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dowladda, gaar ahaan, Wasaaradda Warfaafinta iyo Xafiiska Raysul Wasaaraha barnaamijka Ka hortaga xagjirnimada- (P/CVE), waxa ay aaminsan tahay in loo baahan yahay in la ballaariyo istraatiijiyada Isgaarsiinta lana curiyo minbaro baraha bulshada si dadweynaha loo gaarsiiyo fariimaha waxqabadka mashaariicda xasilinta sida ugu fudud oo uguna dhaqsaha badan. Si arrintan looga mira-dhaliyo, Wasaaraddu waxay si dhaw ula shaqaynaysaa barnaamijka Kahortaga Xagjirnimada ee Xafiiska Ra'isul-wasaaraha iyo barnaamijyada kale oo ay wado Wasaaradda Warfaafinta.

## **9. Dhaqaalaha (Resources)**

Wixii ka horeeyey 2015kii waxaa unuga xasilinta ee Boqortooyada midowdey (UK) iyo midowga yurub (EU) ay taageera dhaqaale ku bixinayeen lataliyayaasha gacanta ka geysanayey horumarinta istraatiijiyada xasilinta iyo xiriirnta dowlada federaalka ah.

Laakiin ilaa iyo 2015-kii nidaamka xiriirinta ee istraatiijiyada xasilinta ee heer federal ilaa heer degmo waxaa taageeraysey Wasaarada Arimaha Gudaha Federaalka oo gacan dhaqaale ka helaya barnaamijka xasilinta ee loosoo gaabiyo (S2S) kasoo dhaqaale dhan 4 milyan doolar ka helay xafiiska taageerida dhismaha nabada ee qaramnada midoobey ee loosoo gaabiyo UN (PBSO).

Dhaqaalaha ay Wasaaraddu ku taageerto degmooyinka waxaa loo adeegsadaa dib-uheshiisiinta & wadaxaajoodiyada bulshada iyo caawimaad dhaqaale oo lasiiyo maamulada ku meelgarka ah. Hay'adda USAID TIS+ waxay dhaqaale ku taageertay lataliyaasha ka howlagala Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee Jubaland iyo koonfur Glabeed iyo lataliyeyaasha hanaanka Wadajir ee Wasaaradda. UK ERI waxay iyaduna gacan dhaqaale ka geysatay samaynta hage-nidaamiyayaasha kormeerka & qiimaynta iyo samaynta qorsheyaasha dowlad goboleedyada.

Si dhaqaale wax ku oola loogu helo istraatiijiyada xasilinta 2017-2020 waxaa lasoo jeediyey in la mideeyo taageerada dhaqaale ee ay beesha caalamku hada siiso dowladda federaalka ah iyo tan ladamcasan yahay in lagu taageero dowlad goboleedyada aan hada helin taagero dhaqaale oo la xiriirta arimaha xasilinta.

Marka si gaara diiradda loo saaro teegarada dhaqaale ee barnaamijka (S2S) oo markii hore loo qoondeeyey 2 milyan doolar; hada waxaa la qiyaasayaa inay noqoto 2.5 milyan doolar si loo xoojiyo iskuxirka, qiimaynta iyo baahinta hawlaha ee heer federaal iyo heer dowladgoboleed oo ay ku jiraan degmooyinka. Miisaaniyadu waxay ka jawaabaysaa baahida loo qabo in kor loo qaado tayada hay'adaha federaalka, dowlad-goboleedyada iyo kuwa degmooyinka si loo gaaro hadafka la higsanayo ee ku qeexan heshiiskii amniga iyo hanaanka (CAS)

Ka hor kulanka bahwadaagta CAS ee bisha December ee 2017-ka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer Federaal oo kaashanaysa Wasaaradaha Arrimaha gudaha dowladgoboleedyada waxay u soo gudbin doontaa beesha caalamka baahi dhaqaale oo faahfaahsan oo ay si cad uga muuqato kormeerka iyo qiimaynta.

**XEERKA DHAQANGALINTA HABRAACA HESHIISYADA  
DOWLADDA FEDERAALKA**

***Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya***

***Markuu Arkay:*** Qodobada 99<sup>aad</sup> iyo 100<sup>aad</sup> ee Dastuurka ku-meel-gaarka ah,

***Markuu Arkay:*** Qodobada 4<sup>aad</sup>, 5<sup>aad</sup> iyo 6<sup>aad</sup> ee Xeerka Maamulka ee Lr.. 14 ee 01/05/1965.

***Markuu Arkay:*** Qodobada 8<sup>aad</sup>, ee Xeerka Lr. 2 ee 29/12/1961

***Markuu Garwaaqsaday:*** Inay lagama maarmaan tahay ku dhaqanka shuruucda maamulka dalka, si loo xaqiijiyo saraynta sharciga.

***Markuu Tixgeliyay:*** Baahida loo qabo in heshiisyada ay galayso Dowladda Federaalka yeeshaan habraac isku mid ah, si ay heshiisyadu u noqdaan kuwo iswaafaqsan oo aan iska hor imaanayn, loona ansixiyay qaab isku mid ah.

***Waxa uu Xeeriyay***

***Qodobka 1aad***

***Heshiisyada Dowladda Federaalka la gelayso Dalal, Shirkado ama Hay’ado Ajnabi ah***

1. Waxaa ka reeban Wasaaradaha iyo Hay’adaha kale ee Dowladda Federaalka in ay heshiis si toos ah ama si dadban ula galaan dalal, shirkado ama hay’ado ajnabi ah, iyada oo aan la raacin talaabooyinka ku cad farqadda 2<sup>aad</sup> ee qodobkan.

2. Hashiisyada lala gelayo dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah waa in la horgeeyo Golaha Wasiirada ka dib marka la soo marsiiyo tallaabooyinka soo socdo:-
- a) Waa in Heshiisyada lasoo marsiiyaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda waaxdeeda Sharciyada iyo heshiisyada caalamiga ah
  - b) Ka dib mark ay Wasaaraddu hubiso in heshiisku waafaqsan yahay Shuruucda iyo siyaasadda dalka, waa inay Wasaarada Arrimaha Dibaddu u gudbisaa Garyaqaanka Guud ee Dowladda Federaalka;
  - c) Garyaqaanka Guud waa inuu Xukuumadda talo-bixin ka siiyaa sharcinimada heshiiska iyo weliba hay'adaha Dowladeed ee awoodda u leh saxiixyada iyo ansixinta heshiiskaas.
  - d) Talada Garyaqaanka Guud kaddib, waa in oggolaansho qoraal ah laga helaa Ra'iisul Wasaaraha inta aan la saxiixin heshiiska, kaddibna heshiiska la horgeeyaa Golaha Wasiirrada

### **Qodobka 2aad**

Heshiisyada ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda Federaalku la gelayaan shirkado ama hay'ado waddani ah, waa in la waafajiyo habraaca ku xusan Qodobka 8<sup>aad</sup> ee Xeer Lr. 2 ee 29/12/1961.

### **Qodobka 3aad**

#### **Waajibnimada Qodobka Feejignaanta**

Heshiisyada ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda Federaalku gelayaan waa in uu ku jiraa qodob si cad u sheegaya in heshiiskaasi waxba-kamajiraan yahay haddii uu baalmaro habraaca uu tilmaamayo sharciga dalka ee la xiriira dhaqangalnimada heshiisyada ay Dowladdu qaybta ka tahay, kaas oo ka horreeyey heshiiska.

## Qodobka 4aad

### Kaydinta Heshiisyada

Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxaa la dhigayaa nuqulka heshiis kasta oo oo Dowladdu la gasho dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah. Xafiiska Garyaqaanka Guud, Xafiiska Hantidhawraha JFS iyo Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha JFS waxaa mid walba la dhigayaa nuqulka heshiis kasta oo Dowladdu la gasho dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah iyo kuwa wadaniga ahba.

## Qodobka 5aad

### Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalku, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

  
Mudane Xasan Cali Khayre  
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



The seal is circular with the text "JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA" at the top and "XAFIISKA RA'IISUL WASAARAH" at the bottom. In the center is the coat of arms of Somalia, and below it, the text "THE PRIME MINISTER" and "GOVERNMENT OF SOMALIA" is visible.

